

Nidaam Sharciyeedyada Rukhsad Siinta Daryeelka ilmaha



GURYAHA QOYSKA EE DARYEELKA ILMAHA
EE DIIWAAN GASHAN AMA RUKHSADA HEYSTA

HAY'ADA ADEEGYADA AADANAHA
WAAXDA CARRUURTA & QOYSASKA

 VERMONT

**Nidaam Sharciyeedyada Rukhsad Siinta
Guryaha Qoyska ee Daryeelka Carruurta ee
Diiwaan Geshan iyo Kuwa Rukhsada Heysta
Taariikhda ay Dhaqan Gashay: Sebteember 1, 2016**

HORDHAC

Nidaam sharciyeedyada Rukhsad Siinta Daryeelka Carruurta waxay maamulaan goobaha iyo barnaamijyada daryeelka carruurta ee gobolka Vermont. Xeerarkani waa shuruudaha ugu yar ee la aasaasay si ay u ilaaliyaan caafimaadka iyo ammaanka carruurta Vermont ee daryeelka guriga dibadiisa iyo in la hubiyo in carruurta ku jirta barnaamijyada daryeelka ilmaha ee Vermont la siiyo koritaanka iyo waayo-aragnimada waxbarasho ee u roon.

Tani waa dib u eegista labada nooc ee nidaam sharciyeedyada: Nidaam Sharciyeedyada Guryaha Qoyska ee Daryeelka Maalinta, (Oktoobar 1996), iyo Nidaam Sharciyeedyada Rukhsad Siinta Daryeelka Ilmaha ee Qoyska, (Febraayo 2001), hadda ka dib marka la isku daro waxa loo yaqaan Nidaam Sharciyeedyada Rukhsad Siinta ee Guryaha Qoyska ee Daryeelka Carruurta ee Diiwaan Geshan iyo Kuwa Rukhsada Heysta. Guryaha Daryeelka Ilmaha ee Rukhsada Hesytaa waxay adeegyo siin karaan carruur badan iyo waxa looga baahan yahay in ay la kulmaan heerar dheeri ah oo aan looga baahnayn Guryaha Qoyska ee Daryeelka Ilmaha ee Diiwaan geshan. Xeerarkan ayaa marka la isku daro waxay si joogta ah u abuuraan heerarka aasaasiga ah ee guud ahaan heerarka goobaha guryaha qoyska ee daryeelka qoyska iyo wadiiqada cad ee noocyada kale haddii bixiyahu uu doonayo in uu ka wareego mid.

Muraajaco ayaa la sameeyay laba sanno iyo badh xidhiidh ah iyadoo ay ka qeybqaateen khubaro heer qaran ah, daneeyayaasha maxalliga ah, daryeelka ilmaha iyo bixiyayaasha waxbarashada, iyo shaqaalaha rukhsad siinta iyo tayada barnaamijka ee ka socda Qeybta Koritaanka ilmaha (CDD) si ay u soo saaraan dib u eegis dhamaystiran oo ah xeerarka daryeelka ilmaha Vermont kaas oo uu ilmuhu xudun u yahay, qoyska ku fiican iyo cadaalad u ah bixiyayaasha. Wakiilo ka socda Waaxda Caafimaadka ee Vermont, Hay'ada Waxbarashada ee Vermont, iyo Waaxda Caafimaadka Maskaxda ee Vermont ayaa sidoo kale tallooyin bixiyay oo ka qaybgelay. Dhammaan ka qaybgalayaashu waxay isku raaceen in hadafku uu iftiimiyo, uu joogto yahay, koritaan ahaan uu ku haboon yahay heerarka kuna salaysnaado sifooyinka barnaamij laga warheyn karo oo lagu ogyahay inay ilaaliyaan oo ay horumariyaan caafimaadka, ammaanka iyo fayyo-qabka carruurta ee daryeelka iyo waxbarashada goobaha.

Geedi socodka sameyntu waxay ka bilaabmatay kasoo ururinta ballaadhan ee tallooyinka bulshada oo ay soo ururiyeen CDD, Golayaasha Gobolada ee Dhisida Musqabal Dhalaalaya iyo Hay'adaha Taageerida Daryeelka Ilmaha ee Bulshada Maxalliga ee dhamaan laba iyo tobanka (12) Hay'adaha Adeegyada Aadanaha ee guud ahaan daafaha gobolka. Ka dibna, in ka badan boqol ah bixiyayaasha daryeelka ilmaha, ruqsad bixiyaayasha daryeelka ilmaha, iyo daneeyayaasha kale ee bulshada isugu yimid lix (6), goobood oo juquraafi ahaan kala firidhsan, kooxaha shaqada subaxaha Sabtida ayaa kow iyo toban (11) jeer saddex iyo tobankii (13) bilood si ay dib ugu eegaan cilmi baarista dhaqanka ugu fiican, looga wada hadlo dhaqanka hadda iyo xaqiiqooyinka, iyo si loo sameeyo tallooyinka heerarka rukhsad siinta ee dib loo eegay. Gobolka Vermont waa uu qadirinayaa kuwaas ay aadka uga go'nayd, mutadawaciinta sida adag u shaqeeyay ee tobarucidooda ay ku darsadeen natiijadan.

Bilihii lasoo dhaafay, koox ka mid ah shaqaalaha CDD ayaa tallooyinka kooxda shaqada dib ugu habeysay qoraalo qabyo ah, iyo shaqaalaha ayaa la kulmay shaqaalaha Qeybta Badbaadada Dabka ee Vermont, Hay'ada Khayraadka Dabiiciga ah ee Vermont, iyo Waaxda Caafimaadka ee Vermont si looga wada hadlo oo dib loo eego u qoraalada qabyada ah .

Dib u eegista xeerarku waxay ka tarjumaysaa fahamka cadaaynta sayniska hadda ee la xiriirta sida ay caruurta u barato ee ay u horumaraan. Xeerarka ayaa sidoo kale ka tarjumaya heerarka qeybtan oo kale iyo xaqiiqooyinka fulinta daryeelka carruurta iyo dhaqanka barnaamijka waxbarashada hore kaas oo saameeya caafimaadka, ammaanka iyo fayo-qabka carruurta. Waxay isbadel ku daraan ururarada Vermont ee hay'adaha gobolka Vermont ee masuulka ka ah rukhsad siinta iyo la socodka; isbedelada sharciyeynta iyo nidaam sharciyeedyada lagu dabaqi karo ee hay'adaha kale ee maamulka la xiriira ay khuseyso; isticmaalka tiknoolajiyada macluumaadka ee dawlada iyo maamulida barnaamijka, iyo nidaamka horumaraya ee adeegyada carruurnimada hore iyo adeegyada dugsiga kadib ee Vermont.

Waa ulajeeddada Waaxda Carruurta iyo Qoysaska, Qeybta Horumarinta Carruurta ee Hay'ada Adeegyada Aadanaha ee Vermont in shuruudaha rukhsad siintu ay yihiin kuwo cad, macquul ah, cadaalad ah oo la dhaqan gelin karo iyo in carruurta iyo qoysaskooda ay yihiin xadunta kuwa wax loo qabanayo.

Danaha u adeegida dadweynaha awgeed, faallooyinka ku saabsan xeerarku waa la soo dhaweeynayaa wakhti kasta, waana la tixgalin doonaa dib u eegida mustaqbalka ama sameynta shuruudo cusub.

Faallooyinka waxaa lagu gudbin karaa boggayaga internetka:

http://dcf.vermont.gov/cdd/child_care_licensing

Reeva Sullivan Murphy
Guddoomiye Xigeen
Division Development Child
(Qeybta Koritaanka Ilmaha)

Ken Schatz
Guddoomiyaha
Department for Children and Families
(Waaxda Carruurta Qoysaska)

SHAQADA

Shaqada Qeybta Koritaanka Carruurta waa in la hagaajiyo fayo-qabka carruurta Vermont. Waxaan arrintan sameynaa annagoo iskaashi la sameynayna qoysaska, bulshooyinka, dugsiyada, bixiyeyaasha iyo hay'adaha gobolka iyo federaalka ee kordhiya helitaanka adeegyada koritaanka ilmaha ee oo tayada sare leh, waarta iyo adeegyada koritaanka ilmaha.

TUSMADA

BOGGA

FCCH Qaybta 1 - Hordhac

1.1 Awooda Sharci ee Sharciyeynasya Adeega.....	1
1.2 Ujeedada	1
1.3 Taariikhaha Ay Dhaqan Galayso	1

FCCH Qaybta 2 - Qodobada Guud

2.1 Qeexitaanada Adeegyada Habraaca iyo Xaddidaada.....	2
2.2 Qeexitaanada erayada loo adeegsaday Nidaam Sharciyeedkan	2
2.3 Hanaanka iyo Nidaamka Rukhsad Siinta.....	8
2.4 Xadgudubyada iyo Tallaabada Sixitaanka	22
2.5 Hakinta, Kala Noqoshada ama Diidmada Rukhsada	22
2.6 Xuquuqda aad Racfaan Uga Dhiiban Karto Tallaabooyinka Qaanuunka.....	23
2.7 Ka Duwanaanshaha Xeerka	25
2.8 Diiwaanka Dadweynaha ee Xadgudubyada.....	25

FCCH Qaybta 3 - Maamulka iyo Hawlgallada

3.1 Ogeysiiska Rukhsad Siinta Daryeelka Ilmaha	26
3.2 Waajibada Sharciiga ee ku saabsan Dayacida iyo Ku Xadgudubka Ilmaha.....	27
3.3 Maamulida Barnaamijka iyo Diiwaan-Heynta	28
3.4 Diiwaangelinta Aan Takoorka Lahayn	32
3.5 Siideynta Carruurta ee Badbaadada Leh	32
3.6 U Diyaarsanaanta Xaaladaha Degdegga ah	32
3.7 Qarsoodiga	33
3.8 Barnaamijka Qiimeynta ee Sannadlaha ah	34

FCCH Qaybta 4 - Hawlgelinta Waalidka/Qoyska ee Daryeelka Carruurtooda

4.1 Booqashada Ka Horeysa Isqorida iyo Jiheynta.....	34
4.2 Booqashada iyo Helitaanka Carruurta.....	34
4.3 Shirarka Waalidka	34
4.4 La Xiriirka Waalidka	34
4.5 Hawlaha Dhiirigelinta Ka Qeybqaadashada Qoyska	35

4.6 Taageerada Naas-nuujinta	35
4.7 Soo Gudbinta Siyaasadaha iyo Nidaamka FCCH	35

FCCH Qaybta 5 - Caafimaadka, Ammaanka iyo Nafaqada

5.1 Kor u qaadida Caafimaadka iyo Ilaalinta Caruurta	36
5.2 Dhaqanada Caafimaadka ee Joogtada ah	37
5.3 Maareynta Cudurada Faafa.....	41
5.4 Qodobada Hurdada iyo Nasashada	42
5.5 Caafimaadka Afka (Cadayashada ilkaha)	44
5.6 Daawo Siinta	44
5.7 Qalabka Gargaarka Degdegga ah	46
5.8 Waxka Qabashada Shilalka, Dhaawacyada, iyo Gurmada Caafimaad ee Degdegga ah	46
5.9 Caruurta Leh Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka Gaarka ah iyo Naafooyin.....	47
5.10 Jawi Dhismeedka iyo Badbaadada.....	47
5.11 Cuntada iyo Nafaqada.....	65

FCCH Qaybta 6 - Baridda iyo Barashada

6.1 Barnaamijka Hawlaha Koritaanka (Manhajka).....	68
6.2 Sameynta Xidhiidho Fayow	72
6.3 Taageerida Caruurta Baahiyaha Gaarka ah leh	83

FCCH Qaybta 7 – Shaqaalaha Barnaamijka/Shaqaaleysiinta

7.1 Shuruudaha Guud ee Bixiyaha FCCH iyo Shaqaalaha.....	84
7.2 Hubinta Taariikhda Qofka iyo Ansixinaha Haboon	85
7.3 Aqoonta iyo Khibradaha	88
7.4 Horumarinta Xirfadaha ee Sannadlaha ah	90
7.5 Siyaasada iyo Nidaamyada Shaqaalaha.....	91
7.6 Isticmaalka Badelka.....	91
7.7 Isticmaalka Mutadawaciinta.....	92

Lifaaqa A

Shaxda Calaamadaha iyo Astamaha Xanuunka (La guuriyay)

Lifaaqa B

Guddiga Ammaanka Badeecada Macmiilka 16 CFR § 1220 ee La Xiriira Sariirta Carruurta

FCCH Qeybta 1 - Hordhac

1.1 Awooda Sharci ee Sharciyeynaysa Adeega

Qofka bixinaya daryeelka carruurta in ka badan laba (2) qoys oo aan kooda ahayn waa in la diiwaangaliyo ama la siiyaa rukhsad iyadoo la raacayo nidaam sharciyeedyadan. Shakhsi, hay'ad, shirkad, ama iskaashi ama shakhsi waa in aanuu ka shaqeyn ama sii wadin inuu ka shaqeeyo guriga qoyska ee daryeelka ilmaha ee diiwaangashan ama rukhsad heysta iyagoon oggolaansho ka heysan Waaxda Caruurta iyo Qoysaska (DCF) iyo rukhsad ay bixisay Qeybta Koritaanka Ilmaha (CDD). Awoodda sharci ee nidaam sharciyeedyadani waa Qeynuunada Vermont ee 33 VSA §§ 105 (b) & 3502.

1.2 Ujeedada

Ujeedada nidaam sharciyeedyadani waa ilaalinta iyo horumarinta caafimaadka, ammaanka, fayo-qabka, koritaanka wanaagsan iyo horumarka carruurta adeegyada ka jela Guryaha Qoyska ee Daryeelka ilmaha. Nidaam sharciyeedyadani waxay ka turjumayaan gundhiga ama heerarka ugu hooseeya ee barnaamijyada daryeelka ilmaha ee ay nidaamiso Vermont. Dhammaan barnaamijyada la nidaaminayo waxay yeelan doonaan fursada ay kaga badin karaan nidaam sharciyeedyada ay dejisay Waaxda Caruurta iyo Qoysasku.

1.3 Taariikhda ay Dhaqan Gelayso

1.3.1 Xeerarkan ayaa u dhaqan geli doona dhamaan codsiyada bilowga ah ee rukhsad qaadashada Guriga Qoyska ee Daryeelka ilmaha ee La Diiwaangeliyay ama Guriga Qoyska ee Daryeelka ilmaha ee Rukhsada Heysta ee hela Sebteember 1, 2016 ama kadib.

1.3.2 Xeerarkani ayaa u dhaqan geli doona dhammaan Bixiyeyaasha Daryeelka Ilmaha ee Qoyska ee hadda heysta rukhsad ay kaga shaqeeyaan Guriga Qoyska ee Daryeelka ilmaha ee La Diiwaan geliyay ama Guriga Qoyska ee Daryeelka ilmaha ee Rukhsada Heysta taariikhdu markay tahay Sebteember 1, 2016 marka laga reebo xeerarkan gaarka ah ee soo socda, kuwaas oo u baahan in la adeeco ugu dambayn Sebteember 1, 2017:

- 3.6.1 (Qorsheynta Xaalada Degdegga ah) ee nidaam sharciyeedkan;
- 3.6.3 (Hoy ka Dhigashada Meel) ee nidaam sharciyeedkan;
- 4.7 (Siyaasadaha iyo Hannaanka Qoran) ee nidaam sharciyeedkan;
- 5.4.1.2 (Sariiraha Carruurta iyo Kuwa La Dhaqaajin karo ee Waafaqsan CPSC) ee nidaam sharciyeedkan;
- 5.6.2 (Tobabarka Daawo Siinta) ee nidaam sharciyeedkan;
- 7.1.2.2 (CPR & Gargaarka Degdega ah ee waqtiyada oo dhan) ee nidaam sharciyeedkan;
- 7.1.3 (Tobabarka Jiheynta) ee nidaam sharciyeedkan;
- 7.3 (Shahaadooyinka iyo Waayo-aragnimada) ee nidaam sharciyeedkan; iyo
- 7.4 (Horumarinta Xirfadaha Sannadlaha ah) ee nidaam sharciyeedkan.

1.3.3 Bixiyeyaasha FCCH ee heysta rukhsada hadda ay kaga shaqeeyaan Guriga Qoyska ee Daryeelka ilmaha ee La Diiwaangeliyay ama Guriga Qoyska ee Daryeelka Ilmaha ee Rukhsada Heysta Sebteember 1, 2016, waa inay akhriyaan xeerarka la habeeyay iyo waa inay hubiyaan inay si buuxda u fahmeen xeerarkan ka hor Sebteember 1, 2017 iyagoo kasoo qeybgalaya tobabar ay ansixiyeen Qeybta Koritaanka Ilmuhu (CDD).

- 1.3.4 Bixiyeyaasha FCCH ee heysta rukhsada hadda ay kaga shaqeeyaan Guriga Qoyska ee Daryeelka Ilmaha ee La Diiwaan geliyay ama Guriga Qoyska ee Daryeelka Ilmaha ee Rukhsada Heysta Sebteember 1, 2016, ayaa laga yaabaa in la siiyo rukhsad kumeel gaar ah haddii aanay awoodin inay si buuxda u waafaqaan xeerarkan kahor Sebteember 1, 2017, iyadoo ikhtiyaar u ah Qeybta, iyo haddii shuruudaha xeerarka Qaybta 2.3.6.2 ee nidaam sharciyeedkan lala kulmay.

FCCH Qeybta 2 – Qodobada Guud

2.1 Qeexitaanada Adeegyada Habraaca iyo Xaddidaada

- 2.1.1 Guriga Qoyska ee Daryeelka Ilmuhu wuxuu bixiyaa daryeel koritaan waxbarasho, ilaalin haboon iyo kormeer kuwaas oo loogu talagalay si loo hubiyo koritaanka u roon iyo waayo-aragnimada waxbarashada carruurta ka maqan guryahooda muddo ka yar afar iyo labaatan (24) saacadood maalintii. Guriga Qoyska ee Daryeelka Ilmuhu waa in lagu qabtaa goob uu degenayahay Bixiyaha Daryeelka Ilmaha ee Qoysku (FCCP). Waxaa jira laba (2) nooc oo ah Guriga Qoyska ee Daryeelka Ilmaha:
- FCCH diiwaan gashan oo la rukhsadeeyay si ay ugu adeegaan carruurta lagu sheegay xeerarka qaybta 6.2.1, ama
 - FCCH rukhsad heysata oo la rukhsadeeyay si ay ugu adeegaan carruurta lagu sheegtay xeerarka qaybt 6.2.2.

2.1.2 Inkastoo xeerarka qodobadaan ay khuseeyaan labada nooc ee FCCH, xeerarka sanduuqa la galiyay waa xeerarka kaliya khuseeya noocyada FCCH ee rukhsada heysta. Noocyada FCCH diiwaangashan ma khuseyn doonaan xeerarkani.

- 2.1.3 Qof kasta ama hay'ad kasta oo ka diiwaan gashan ama rukhsad heyasta si ay uga shaqeeyaan FCCH waa in laga mamnuucah inay si talantaali ah uga hawlgalaan Xarun Ku Saleysan Adeega Ilmaha iyo Barnaamijyada Dugsiga Kahor ama Barnaamij Dugsiga kadib ah.
- 2.1.4 FCCP la ansixiyay lagama yaabo inay isku mar ansixiyo bixiyaha daryeelka korinta ee rukhsada heysta iyadoo aan ka duwanaysiin laga helin Waaxda. Waxa laga yaabaa in aan la siin nasasho yar carruurta la koriyo ama daryeelka korinta, ha ahaato mid rukhsad heysta ama xirfadle ahbee, marka laga reebo marka ay Waaxdu codsato, waxay laga yaabaa inay bixiyaan nasasho yar ama inay daryeel korin oo kumeel gaar ah ay siiyaan ilmo marhoreba ka diiwaan geshan FCCH la nidaamiyay.
- 2.1.5 Carruurta FCCH-ta la nidaamiyay waa in aan lala beegsan wax xadgudub ah, dayac, six un ula dhaqmid, ama goobo akhlaaq daro ah.

2.2 Qeexitaanada Ereyada Loo Adeegsaday Nidaam Sharciyeedyadan

- 2.2.1 "Shuruudaha Rukhsad Siinta Sannadlaha ah" waxaa loola jeedaa hawlaha waafaqsan ee ay tahay in la buuxiyo 365 maalmood oo kasta ee saddex (3) ee muddada rukhsada.
- 2.2.2 "Nidaamyada Macluumaadka Mustaqbalka ee Dhalaalaya" loo yaqaan "BFIS" ee nidaam sharciyeedyadan waxay ka dhigan tahay nidaamka macluumaadka iyo maamulka ee ku salaysan barta internetka ee ay isticmaasho Qeybtu

Si ay ula xidhiidhaan bixiyaayaasha daryeelka ilmaha iyo waxbarashada iyo waalidka. Waxa loo isticmaalaa si ay u maareeyaan hanaanka, tallaabooyinka, dhokumentiyada iyo macluumaadka kale ee la xiriira: daryeelka ilmaha iyo rukhsad siinta waxbarashada hore; aqoonta iyo horumarinta waayo-aragnimada xirfadeed ee carruurnimada hore ee xirfadoolayaasha dugsiga kadib, iyo Barnaamijka Taageerada Dhaqaale ee Daryeelka ilmaha iyo lacagaha kale.

- 2.2.3 "Awood" waxaa loola jeedaa tirada guud ee carruurta loo ogol yahay inay ku sugnaadaan halkii (1) wakhti sida lagu ansixiyey ee rukhsada.
- 2.2.4 "Ilmaha" ujeedada nidaam sharciyeedkan, waxay ka dhigan tahay qof ugu yaraan lix (6) toddobaad jir ah ee aan gaadhin da'da saddex iyo toban (13) sanno.
- 2.2.5 "Ilmo naafo ah" waxay ka dhigantaa (a) qof ka yar da'da saddex iyo toban (13) sanno, kaas oo xaq u leh adeegyada gaarka ah sida ay dhigayso Qorshaha Koobaad ee Adeegyada La Isku-dhafay ee Carruurta, Qorshaha Adeegyada Qoysaska Shakhsiga ah (IFSP), ama Qorshaha Waxbarasho ee La Shakhsiyeyay (IEP) ama qorshaha 504; kuwaas oo u baahan taageero gaar ah si ay ugu guulaystaan FCCH ama (b) qofka da'da saddex iyo toban (13) sanno ilaa da'da sagaal iyo toban (19) sanno ah kaasoo leh IEP ama xaalad jireed, dareen ama dabecadeed oo laga warhayo taas oo qofka ka horjoogsanaysa is daryeelida ama in laga tago kormeer la'aan sida ay xaqiijiso qoraalka diiwaanka dhakhtarka, cilmi nafsaaawi rukhsad heysta ama diiwaan maxkamadeed.
- 2.2.6 "Kaalige Fasal" waxaa loola jeedaa qof loo xilsaaro inuu la shaqeeyo ilmo gaar ah ama koox carruur ah lagu daro shaqaalaha tiriya saamiga shaqaalaha/ilmaha.
- 2.2.7 "Nadiifinta" waxaa loola jeedaa ka baabiinta dhamaan wasakhda qashinka iyadoo lagu dhaqayo iskudar wasakhtire iyadoo la raacayo tilmaamaha soo saaraha.
- 2.2.8 "Guddoomiyaha" waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Waaxda Carruurta iyo Qoysaska ama qofka loo xilsaaray.
- 2.2.9 "Xaalada" waxaa loola jeedaa shuruud kooban taas oo loo baahanyay in rukhsadu ay gaarto waafaqsanaanta ka hor taariikhda dhamaystirka ee ku qoran shahaadada rukhsada.
- 2.2.10 "Qarsoodiga" waxaa loola jeedaa ilaalinta macluumaadka shakhsiyeed, oo ay ku jiraan macluumaadka caafimaad ee laga helo dadka aan loo ogolayn inay arkaan ama u maqlaan.
- 2.2.11 "Ciqaabta Jirka " waxaa loola jeedaa waxyeelaynta ula kaca ah ee dhalisa xanuun jireed; hab kasta iyo ujeedo kasta oo ciqaab, hagaajinta, edbinta, tacliinta, ama sabab kasta oo kale ha ahaatee.
- 2.2.12 "Manhajka" waxaa loola jeedaa himilooyinka aqoonta iyo xirfadaha ee ay baranayaan carruurta iyo hawlaha iyo waayo-aragnimada kuwaas oo aqoontaas ah iyo xirfadahaas lagu gaadho.

- 2.2.13 "Waaxda" waxaa loola jeedaa Hay'ada Adeegyada Aadanaha ee Vermont, Waaxda Caruurta iyo Qoysaska, iyo/ama wakiiladooda.
- 2.2.14 "Si Koritaanka Ku Haboon" waxa loola jeedaa dhaqanada ay salka ku u yihiin cilmi baarista ku saabsan sida caruurta yar-yari u koraan oo ay wax u bartaan. Waxaa loola jeedaa bixinta hawlaha iyo isdhexgalka ku haboon da'da carruurta iyo xaalada horumarineed, sida shakhsiyaad iyo koox ahaan, iyo bixinta taageero ilmo kasta uu helo taageero ee gaarida himilooyin adag haddana la gaari karo kuwaas oo ka qeybqaata horumarkiisa/horumarkeeda iyo waxbarashadiida/waxbarashadeeda gaarka ah. Dhaqanada noocan oo kale ahi waxay mas'uul ka yihiin xaaladaha dhaqan iyo bulsho ee carruurta ay ku nool yihiin.
- 2.2.15 "Jeermis dillida" waxaa loola jeedaa in la burburiyo ama la joojiyo badi jeermiska ku jira walxaha ama dulaha. Jeermis dillidu waxay ku haboon tahay meelaha aanay dareeyayaashu ka gudbi karin ee aanay cuntadu taaban doonin ama aanay afka gashan doonin carruurta
- 2.2.16 "Qeybta" waxaa loola jeedaa Waaxda Carruurta iyo Qoysaska ee Vermont, Qeybta Koritaanka Carruurta.
- 2.2.17 "Waayo-aragnimo," sida loo isticmaalay ee la xiriirta aqoonta, waxay ka dhigan tahay waayo-aragnimada la shaqeynta kooxaha carruurta dhashay ilaa da'da dugsigaa ah iyadoo loo marayo xirfadle mushahar qaata ama mutadawac ama tobabarte si joogto ah jadwalka loo galiyo.
- 2.2.18 "Kaalayaha Daryeelka ilmaha ee Qoyska" waxaa loola jeedaa xubin shaqaalaha ah oo aqoon leh iyada oo ay kormeeraan FCCP oo bixiya adeegyada daryeelka ilmaha.
- 2.2.19 "Guriga Qoyska ee Daryeelka ilmaha," loogu yeedho "FCCH" xeerarkan, waxay ka dhigan tahay joogitaanka qof la ansixiyey si ay u bixiyaan daryeelka koritaanka waxbarasho, ilaalin haboon iyo kormeer loogu talagalay si loo hubiyo koritaanka iyo waayo-aragnimada u roon waxbarashada carruurta ka maqan guryahooda muddo ka yar afar iyo labaatan (24) saacadood maalintii. Tani waa goobta lagu bixiyo daryeelka.
- 2.2.20 "Bixiyaha Daryeelka ilmaha ee Qoyska," loogu yeedhay "FCCP" xeerarkan, waxay ka dhigan tahay qofka la ansixiyey si uu uga shaqeydo FCCH diiwaan gashan ama rukhsad haysata, wuxuu mas'uul ka yahay howlgalka FCCH-taas waxaana loo tixgeliyaa inuu sharci ahaan mas'uul ka yahay adeecida xeerarkan. FCCP waxay ansixisaa ama ay sameysaa barnaamijyo iyo manhajyo kormeera shaqaalaha.
- 2.2.21 "Bixiyaha Daryeelka Caafimaadka" waxaa loola jeedaa qof ka shaqeyda caafimaadka oo la kormeero ama aan la kormeerin, kaas oo uu rukhsad siisay rukhsad bixiye la yaqaano. Noocyada ugu badan ee shaqaalaha daryeelka caafimaadka waxaa ka mid ah dhakhaatiir, kalkaalisaal, kalkaalisooyin, iyo caawiyeyaasha dhakhtarka.

- 2.2.22 "Guddiga Adeegyada Aadanaha" sida lagu qeexay 3 VSA § 3090-3091.
- 2.2.23 "Qorshaha Horumarka Xirfada ee Shakhsga" loogu yeedhay "IPDP" xeerarkan, waxay ka dhigan tahay qorshaha hadda ee la shakhsiyeeyay ee lagu kordhinayo aqoonta qof iyo hagaajinta xirfadaha qeybta daryeelka iyo waxbarashada ilmaha. Waxa ka mid ah qiimaynta aqoonta iyo xirfadaha hadda, iyo hadafyada aqoonsada meelaha la horumarin karo, dhisida xeelado, khayraadka iyo wakhtiga himilada lala kulmi doono.
- 2.2.24 "Dhallaanka" micnaheedu waa ilmaha ugu yaraan jira lix (6) toddobaad iyo ka yar da'da saddex toban (13) bilood jirka.
- 2.2.25 "Fasalka Barbaarinta" waxay ka dhigan tahay barnaamij waxbarasho oo hal (1) sanno ah oo loogu talagalay in lagu daboolo baahida carruurta dhigan doonta fasalka koowaad ee sanad dugsiiyeedka soo socda.
- 2.2.26 "Rukhsad" waxaa loola jeedaa dhokumentiga rasmiga ah ee cadeynaya in FCCP uu ogoloonsho siisay Gobolku si ay u sameeyaan FCCH sida ay dhigayaan sharciyada iyo nidaam sharciyeedyada Waaxdu. Tani waxay khuseysaa FCCH diiwan gashan iyo ta rukhsada heysata labadaba.
- 2.2.27 "Goob Rukhsad Heysata" waxaa loola jeedaa meesha banaan ee gudaha ama dibada ah ee ay u ansixisay Qeybtu inay tahay goob la isticmaali karo halkaas oo laga yaabo inay carruurtu joogaan.
- 2.2.28 "Xarunta Kobcinta Waayaha Shaqada ee Northern Lights" loogu yeedhay "NLCDC" xeerarkan, waa nidaamka horumarinta xirfadeed ee carruurnimada hore iyo xirfadlayaasha dugsiga kadib ee Vermont.
- 2.2.29 "ilmahaaga" waxaa loola jeedaa ilmaha; ilmaha aad awoowga/ayeyda u tahay, ilmahaad awoowga/ayeyda labaad u tahay; ilmaha xaaskaaga; ama ilmaha aad mas'uulka ka tahay, ilmahaad heyso, ama ilmaha daryeelka korniinka ee FCCP ah; kaas oo degan isla guriga.
- 2.2.30 "Waalid" waxay ka dhigan tahay waalidka dhalay ama waalidka soo korsaday, mas'uulka sharciga ah, waalidka koriyaha ah, ama qof kale oo kasta oo masuuliyad haysta, ama haynta sharciga ah ee ilmaha.
- 2.2.31 "Warqada Ogeysiinta Waalidka" loogu yeedhay "PNL" xeerarkan, waxay ka dhigan tahay ogeysiis qoraal ah oo ka socda FCCP kuna socda waalidka/waalidiinta carruurta ka diiwaangashan, oo sheegaysa in si ammaan leh loo keenay, sida looga baahan yahay 33 VSA § 151 (7) oo sheegaysa in shaqaaleysiinta ama xadgudub halis ah oo caafimaad taas oo ay aqoonsatay Qeybtu.
- 2.2.32 "Shaqaalaha Shuraakada" waxaa loola jeedaa qof u shaqeeya hay'ad kale, oo aan ahayn FCCH, kaas oo la shaqeeya ilmo ama koox caruur ah oo gudaha FCCH ah.

- 2.2.33 "Fasalka Barbaarinta Kahor" waxaa loola jeedaa ilmaha lix iyo soddon (36) bilood jir ilaa da'da dugsiga ah.
- 2.2.34 "Kobcinta Xirfadaha" waxaa loola jeedaa hawlaha waxbarasho iyo taageero, oo loo nashqadeeyay si ay u waafaqaan mabaadii'da waxbarashada dadka waaweyn ee u diyaariya korna u qaada shakhsiyaadka shaqadoodu tahay la shaqeynta carruurta iyo qoysaskooda waxaaanay horseedaa horumarinta aqoonta, xirfadaha, iyo dhaqanka.
- 2.2.35 "Barnaamijka" waxaa loola jeedaa dhamaan waxqabadyada la xiriira daryeelka ilmaha iyo adeegyada waxbarashada ee FCCH.
- 2.2.36 "Qorshaha Horumarinta Barnaamijka" waxaa loola jeedaa tallaabooyinka ay qaado FCCP si ay si buuxda u waafaqsanaan karto xeerarkan marka xadgudubyada la daliishado.
- 2.2.37 "Rukhsad Ku Meelgaar ah" waxaa loola jeedaa rukhsad aan la cusboonaysiin karin oo ay Waaxdu siisay FCCH hadda rukhsad heysata ama FCCP aan si buuxda u waafaqsaneyn xeerarkan laakiin laga yaabo inay si buuxda u waafaqdo inta lagu jiro muddada go'aansashada hore ee ay sameysay Waaxdu in aanay ka badnaan ha (1) sanno.
- 2.2.38 "Kala Noqoshada" waxaa loola jeedaa tallaabada rukhsad xidhida rukhsada lagaga shaqeeyo FCCH iyadoo ay sabab u tahay xadgudubyo halis ah, soo noqnoqoshada waafaqsanaan la'aanta xeerarka, iyo/ama u hogaansanaan la'aan la xiriirta qaynuunka. FCCH waxaa laga yaabaa in ay sii shaqeeyso inta go'aanka racfaanka Guddiga Adeegyada Aadana la sugayo.
- 2.2.39 "Dhaqanada Hurdada ee Ammaanka ah" waxaa loola jeedaa xaalado dhaqano iyo dhaqanka loogu talagalay si loo yareeyo suurtagalnimada Dhimashada Dhallaanka ee Lama Filaanka ah (SUID).
- 2.2.40 "Fayo-dhawrka" waxaa loola jeedaa in la yareeyo jeermiska walxaha ama dulaha oo laga dhigo heerarka ay xeerarku caafimaadka dadweynahu u arkaan ammaan. Fayo-dhawrku waxay ku haboon tahay meelaha ay cuntadu gaarto ama wax kasta oo laga yaabo in carruurta afkooda geliyaan.
- 2.2.41 "Da'da Dugsiga" waxaa loola jeedaa ilmaha shan (5) sano jirka ah ama ka weyn ee dhigta dugsiga barbaarinta ama dhammaystay dugsiga barbaarinta ama fasal ka sareeya.
- 2.2.42 "Wakhtiga Shaashada" waxaa loola jeedaa wakhtiga lagu qaato daawashada telefishanka, cajaladaha, DVD-yada, ciyaarida ciyaaraha fiidiyaha, iyadoo la isticmaalayo kombiyuutarada (oo ay ku jiraan qalabka gacanta), iyo isticmaalka internetka ah.
- 2.2.43 "Dareenka" waxaa loola jeedaa habka ula kaca ah iyo wax ku oolka ah ee taageerida qaabka waxbarashada shakhsiga ee ilmo kasta iyadoo la siinayo fursad ay ku bartaan iyagoo isticmaalaya shan (5) dareeme.

- 2.2.44 "Xadgudubka Halis ah" Macnaheedu waa xadgudubka baaxada kooxda ama shurudaha shaqaaleysiinta ee si dhakhso ah khatar u geliya caafimaadka, ammaanka ama fayyo-qabka carruurta. Xadgudubyada halis ah waxa sidoo kale ka mid noqon kara ciqaabta jirka, la'aanta kormeerida, ama taabsho jireed ama galmo oo aan habboonayn.
- 2.2.45 "Isticmaalka Shukumaan Hal Mar Ah" waxaa loola jeedaa shukumaan maro ah oo loo isticmaalo hal (1) mar ilmo ama qof weyn uu hal mar ku meydho gacmaha. Kadib shukumaanka waxa lagu rida caag ama weel kale si loo mayro, ama isticmaalka hal shukumaan maro ayaa la siin karaa ilmo kasta ama qof weyn ayaa u isticmaali doono laba gacan meyrin. Kadib shukumaanka waxa lagu ridaa ee caaga ama weel kale si la mayro dhamaadka maalin kasta.
- 2.2.46 "Alaabaha La Adeegsado Hal Mar" waxaa loola jeedaa waxyaabaha loo isticmaalo si loo diyaariyo, lagu dhigo, ama lagu cuno cuntada ee la isticmaalo hal wakhti ka dibna la tuuro.
- 2.2.47 "Shaqaalaha" waxaa loola jeedaa qof kasta oo u shaqeeya ama FCCH u badalaya FCCP ahaan, Kaaliyaha Daryeelka ilmaha ee Qoyska, caawiyaha fasalka, ama tobabarte.
- 2.2.48 "Badel" waxaa loola jeedaa xubin shaqaale ah oo si ku meel gaar ah u buuxinaya jago FCCH ah sababo la xiriira maqnaanshaha xubinta shaqaalaha ee sida joogtada ah u shaqeeya.
- 2.2.49 "Kormeerka" (carruurta) waxaa loola jeedaa aqoonta iyo kala xisaabtanka ee dhaqdhaqaaqa iyo halka uu joogo ilmo kasto oo daryeelka ku jira iyo isku dhawaanshaha shaqaalaha iyo carruurta iyo iyadoo la hubinayo waxka qabashada degdegga ah ee shaqaalaha si ilmaha looga ilaaliyo dhib.
- 2.2.50 "Kormeerka" (shaqaalaha, shaqaalaha shuraakada iyo mutadawaciinta) waxay ka dhigan tahay fulinta, la socodka iyo qiimeynta shaqaalaha, shaqaalaha shuraakada iyo mutadawaciinta (sida loo baahanyay) taas waxa kamid ah indho-indheynta dhexgalka carruur, hirgelinta siyaasadaha, hababka iyo manhajka FCCH; nidaamka iyo manhajka, iyo u hogaansanaanta shuruudaha lagu aasaasay xeerarkan.
- 2.2.51 "Hakinta" waxaa loola jeedaa tallaabada rasmiga ah ee si degdeg ah uga xayubinta rukhsada ay ku hawlgalaan iyadoo ay sabab u tahay khatar ku sugnaanta degdega ah ee caafimaadka, ammaanka iyo/ama fayyo-qabka ilmaha ama carruurta jooga FCCH. Waxa laga yaabaa in FCCH aanay sii wadin inay shaqeyso wakhtiga lagu jiro tallaabada ganaaxa inta la sameynayo go'aanka racfaanka loo gudbiyay Guddiga Adeegyada Aadanaha ee la sugayo.
- 2.2.52 "Muddo" waxaa loola jeedaa shuruuda FCCP looga baahanyay inay sii wado waafaqsanaanta ilaa iyo inta ay shuruudu ku qoran tahay shahaadada rukhsada.
- 2.2.53 "Socod Baradka" waxaa loola jeedaa ilmaha u dhexeeya saddex iyo toban (13) ilaa shan iyo soddon (35) bilood jirka.

- 2.2.54 "Tobabarte" waxaa loola jeedaa xubin ka tirsan shaqaalaha bixiya adeegyada waxbarashada iyo daryeelka ilmaha ee tooska ah, waxaana laga yaabaa inuu ka caawiyo hirgelinta manhajka.
- 2.2.55 "Ka duwanaysiin" waxaa loola jeedaa ka reebitaanka ku meel gaar ah ee xeer uu bixiyay Guddoomiyaha ama qofka loo xilsaaray, ee xaaladaha marka uu talladiisu/talladeedu codsiga ama badelka degdega ah ee xeer uu dhalin doono dhibaato aan loo baahnayn oo ku imaada FCCP iyo ilmaha iyo qoyska; marka ujeedada xeerkaas lagu gaari karo siyaabo kale.
- 2.2.56 "Xadgudub" waxaa loola jeedaa jebinta ama khilaafida sharciga ama xeerka rukhsada.
- 2.2.57 "Mutadawac" waxaa loola jeedaa qof aan lasiin lacag oo caawiya caruurta iyaga oo ay og joogaan shaqaalahu.

2.3 Hanaanka iyo Nidaamka Rukhsad Siinta

2.3.1 Awooda baaritaan lagu sameyn karo

2.3.1.1 Shaqaalaha FCCP, FCCP ama FCCH-ta la filayo waa inay u ogolaadaan gelitaanka FCCH saacadaha macquulka ah wakiil kasta oo uu ammar siiyay Qeybtu, hay'adaha kale ee gobolka, ama dhisme kasta oo maxali ah, dab-damiska ama hay'ad caafimaad oo ujeedeedu tahay inay go'aamiyaan waafaqsanaanta qodobada kamidka ah xeerarka ee khuseeya. Wakiilka Qeybtu waa inuu sameeyo dadaal macquul ah in uu ku dhawaaqo joogitaankiisa iyo waa inuu is sheegaa kahor intaanuu gelin. Shaqaalaha FCCP, FCCP ama FCCH-ta la filayo waxa laga yaabaa inay ka codsadaan wakiilka inuu tuso aqoonsi sax ah.

2.3.1.2 Shaqaalaha FCCP, FCCP ama FCCH-ta la filayo waa inay ogolaadaan booqashooyinka, baaritaanada iyo imtixaamida FCCH, diiwaanadeeda, qalabka iyo waxyaabaha la xiriira go'aaminta waafaqsanaanta qodobada ay xeerarka ee saacadaha macquulka ah ee ay sameynayaan wakiilada Qeybtu. Wixii diiwaan ama warbixino ah ee loo baahdo nidaamyadan waa in loo dhiibaa wakiilka Qeybta. Wakiilka Qeybtu waa inuu sameeya dadaal macquul ah in uu ku dhawaaqo joogitaankooda iyo waa inuu is sheegaa kahor intaanuu gelin. FCCP-da la filayo, Shaqaalaha FCCP, FCCP ama FCCH-ta la filayo waxa laga yaabaa inay ka codsadaan wakiilka inuu tuso aqoonsi sax ah.

2.3.1.3 FCCP waa inay u ogolaadaan wakiilka Qeybta inuu wareysto xubnaha shaqaalaha si uu u weydiiyo macluumaadka la xiriira go'aaminta waafaqsanaanta nidaam sharciiyeyadan.

2.3.1.4 Marka la codsado, FCCP waa inay Qeybta siisaa liiska magacyada, cinwaanada iyo telefoonada qoysaska ay u adeegeen intii lagu jiray laba iyo tobankii (12) bilood ee lasoo dhaafay iyo taariikhaha iyo saacadaha imaanshaha ee ilmo kasta oo loo adeegay. Qeybtu waxay tan codsan karaan wakhtiga booqashada ama waxay FCCP kalasoo xiriiri karaan telefoonka ama waxay soo qori karaan qoraal ay ku codsanayaan tan.

- 2.3.1.5 FCCP waa in aanay faragelin, caqabadeyn, hor istaagin, siin macluumaad been ama sababin wax kale si ay u sameeyaan wax ka mid ah kuwa lasoo sheegnay, ama hab kasta oo caqabad ku noqon karta Waaxda ama wakiiladeeda marka ay sameynayaan baaritaan ama kormeer.
- 2.3.2 Bixinta Rukhsada
- 2.3.2.1 Si aad ugu qalanto rukhsad, ama cusboonaysiinta rukhsad, FCCP ama FCCP-da la filayo waa inay muujiyaan sida ay u baahantay Qeybtu in FCCH ay si buuxda u waafaqsantay nidaam sharciyeedyadan.
- 2.3.2.2 Rukhsada waa in la siyaa FCCP-da ugaga shaqeeyaan FCCH-ta codsiga loo sameeyey, looguna sameeyay goobta deganaanshaha sharciga ah ee FCCP.
- 2.3.2.3 Rukhsadu kaliya waxay ansax ku tahay goobta lagu qoray rukhsada.
- 2.3.2.4 Rukhsada waa in aan doono, la meelayn ama la iibin.
- 2.3.2.5 Inta lagu jiro saacadaha shaqada, FCCH kaliya waxaa loo isticmaali doonaa ujeedooyinka bixinta daryeelka ilmaha iyo adeegyada waxbarasho ama tobabar.
- 2.3.3 Soo Dhejinta Rukhsada
- FCCP waa inay guriga ku dhajisaa rukhsada hadda ay kaga shaqeeyaan FCCH iyo nuqul ka mid ah Nidaam Sharciyeedyada Rukhsad Siinta FCCH, halkaas oo ay si cad uga arki karaan waalidka, shaqaalaha iyo soo booqdayaashu. Rukhsad waxba kama jiraan ah ama rukhsad dhacday waa in si degdeg ah looga saaro.
- 2.3.4 Burinta Rukhsada
- 2.3.4.1 Marka FCCH la iibiyo, la kireeyo ama la joojiyo; hawlgalkuna u wareego meel cusub; ama rukhsada la buriyo, rukhsada haddu si deg deg ah ayay u noqon doontaa waxba kama jiraan.
- 2.3.4.2 Haddii FCCP ay doorato in si iskood ah ay xirto FCCH, waa mas'uuliyada FCCP inay u firfircoon ula xiriiraan Qeybta una dhiibaan rukhsada. Ilaa iyo inta ogeysiis rasmi ah ayaa loo gudbinayo Qeybta iyadoo loo marayo BFIS; ama ilaa iyo inta Qeybtu ay qaadayso tallaabo kama dambays in la joojiyo ama lala noqdo ama la diido cusboonaysiinta rukhsad; ama ilaa iyo inta liisanka uu dhacayo ee aan la helin codsiga cusboonaysiinta, FCCP waxa loo tixgelin doonaa sharci ahaan mid rukhsad heysata iyo ma'suul ka ah u hogaansanaanta nidaam sharciyeedyadan intay doonaanba ha ahaadaan carruurta ka diiwaan gashaniye.
- 2.3.5 Hanaanka Cabashada
- 2.3.5.1 Qeybtu waa inay sii wadaan awooda ay ku helaan iyo ay ugu jawaabaan cabashooyinka ka yimaada dadweynaha ee ku saabsan bixiyeyaasha daryeelka caruurta ee nidaamsan. Shaqaalaha Qeybta ayaa qiimeyn doonta xaalada cabasho kasta oo la helay si loo ogaado haddii ay la xiriiraan nidama sharciyeedyadan.

2.3.5.2 Baaritaanka Qeybta waa in la sameeyaa haddii la helo cabasho la xiriirta u hogaansanaata nidaam sharciyeedyadan. Qeybtu waa inay ogeysiisaa FCCP in cabasho la baarayo haddii macluumaadkaasi khatar gelin doono baaritaan ku xadgudub ilmaha ama dembi ee immika socda mooyee. Natiiyooyinka baaritaanka waxaa loo gudbin doonaa qoraal ahaan FCCP. Haddii cabashada la taaban karo ama haddii ay jiraan xadgudubyo kale waxaa la helay iyada oo ay sabab y tahay baadhitaanku, FCCP ah waxaa looga baahan doonaa inay qaataan tallaabo lagu saxayo si ay u gaadhaan si buuxda ugu hogaansanaanta sharciga gobolka iyo nidaam sharciyeedyadan. Macluumaadka aan kuwa sharciga gobolku uu ka dhigay qarsoodi eek u saabsan cabashooyinka si buuxda ugu hogaansanaanta waxa loosoo bandhigi doonaa dadweynaha marka ay codsadaan.

2.3.5.3 Cabashooyinka si gaar ah ula xidhiidha sharciyada, xeerarka, ama qaanuunada ee hay'adaha kale ee dawliga ah waa in loo gudbiyo awoodda ku haboon ee baadhitaan. Waqtiga gudbinta, Qeybta waxay codsan doontaa warbixin ku saabsan natiiyooyinka baaritaanka.

2.3.6 Noocyada Rukhsadaha

2.3.6.1 Rukhsad Buuxda:

2.3.6.1.1 Rukshada buuxda waxa la soo saaraa markii Qeybtu ay go'aamiso in FCCP si buuxda ama inka mida ugu hogaansantay qodobada khuseyso ee nidaam sharciyeedyadan.

2.3.6.1.2 Rukhsada buuxda waxay shaqeysaa saddex (3) sanno laga bilaabo taariikhda la bixiyay, haddii kuwan hoose la sameeyo mooyee:

- Isbadel la sameeyo oo laga dhigo rukhsad kumeel gaar ah,
- Lagala noqdo;
- Lasoo dhiibay ka hor taariikhda uu dhacayo, ama
- La hakiyo.

2.3.6.2 Rukhsada Ku Meelgaarka ah:

2.3.6.2.1 Rukhsada ku meelgaarka ah waxaa laga yaabaa in la soo saaro markii ay qeybtu go'aamiso in:

Aanay jirin wax khatar halis ku ah caafimaadka, ammaanka iyo fayyo-qabka carruurta, iyo

- Xaalad degdeg ah dhacdo taas saameynaysa ku awooda FCCP ay si buuxda ugu hogaansaanayso nidaam sharciyeedyadan.
- FCCP ay codsato ansixinta isbadel in lagu sameeyo ay rukhsadooda;
- FCCP ay codsato dib u cusboonaysiin ee aanay hogaansanayn qeyb kamid ah nidaam sharciyeedyadan; ama

- Shaqsi uu gubdiyo codsi cusub si loo rukhsadeeyo ama loo diiwaangeliniyo ee aan u hogaansanaanta buuxda la go'aamin.

2.3.6.2.2 Rukhsada ku meelgaarka ah waxay shaqeynaysaa muddada ay go'aamiso Qeybtu ee lagu sheegay rukhsada, oo aan ka badneyn hal (1) sanno oo ka bilaabanta maalinta la sameeyay, haddii kuwan hoose la sameeyo mooyee:

- Isbadel la sameeyo oo laga dhigo rukhsad buuxda,
- Lagala noqdo;
- Lasoo dhiibay ka hor taariikhda uu dhacayo, ama
- La hakiyo.

2.3.6.2.3 Inta lagu jiro muddada ku meel gaarka ah, FCCP waa in ay fuliso qorshaha u hogaansanaanta nidaamyada qoran kuwaas ee loo soo gudbiyay oo ay ansixisay Qeybtu.

2.3.6.2.4 Rukhsada ku meel gaarka ah waxa lagu badali karaa rukhsad buuxda marka Qeybtu ay go'aamiso in FCCP ay si buuxda ugu hogaansantay qodobada khuseeya ka hor taariikhda uu dhacayo rukhsada ku meel gaarka ahi.

2.3.6.2.5 Haddii FCCP ay awoodi weydo inay si buuxda si buuxda ama qeyb kamida ugu hogaansanato qodobada khuseyso ee xeerarkan ka hor taariikhda ay dhacayso rukhsada ku meel gaarka ahi, rukhsadu way dhacaysaa FCCP-na waa inay dib u codsataa oo ay buuxisaa dhamaan shuruudaha soo saarista rukhsad buuxda si ay u bixiyaan daryeelka carruurta ee in ka badan laba (2) qoys oo aan ahayn kooda.

2.3.7 Hanaanka Rukhsad Siinta Hore

2.3.7.1 Foomamka: FCCP-da la filayo waa inay codsataa rukhsad iyagoo buuxinaya foomamka la siiyay una samaynaya habab ay qoreen Qeybtu.

2.3.7.2 FCCP-da la filayo waa inay soo gudbisaa liiska dhamaan dadka ku nool guriga siin doonaa liiska dhammaan dadka degan guriga; liiska waa inuu ugu yaraan ka koobnaadaa magaca jinsiga, taariikhda dhalashada, lambarka amniga bulshada, iyo xidhiidhka ay la leeyihiin FCCP-da la filayo.

2.3.7.3 Shuruudaha Hubinta Taariikhda ee Rukhsada Hore

2.3.7.3.1 FCCP-da la filayo waa inay codsiga hore soo raaciyaan Foomka Oggolaanshaha Hubinta Diiwaanada Qeybta iyo waa inay usoo gudbiyaan faraha meesha ay qoondeeyeen Qeybtu kadib markay qeybtu ay helaan Shahaadada Oggolaanshaha Faraha.

- 2.3.7.3.2 FCCP-da la filayo waa in ay xaqiijiso in qof kasta oo ah lix iyo toban (16) sano ama ka weyn, oo ku nool FCCH uu qeybta usoo gudbiyo Foomka Oggolaanshaha Hubinta Diiwaanada.
- 2.3.7.3.3 FCCP-da la filayo waa in ay xaqiijiso in dadka degan guriga, kuwaas oo la siin doono lacag si ay u caawiyaan daryeelka iyo waxbarashada carruurta ama kuwa lagaga tagi doono carruurta ay sidoo kale usoo gudbiyaan faraha goobta ay qoondeeyeen Qeybtu kadib markay Qeybtu hesho Shahaahada Oggolaanshaha Faraha.
- 2.3.7.3.4 Qeybtu ikhtiyaarkeeda ayay u isticmaali kartaa natiijooyinka hubinta taariikhda ah ee ay heyso Qeybtu ee la buuxiyay shantii (5) sanno ee ugu dambaysay iyo halkii ay uga baahan lahayd hubin taariikheed oo cusub.
- 2.3.7.3.5 Ujeedooyinka qeybtan awgood, iyo qayb kasta oo kamida nidaam sharcieedyadan oo tixraacaya Foomka Oggolaanshaha Baarida Diiwaanada, foomkaa waa in loo tixgeliyaa inuu yahay mid buuxa marka marka la buuxiyo iyo waa inay ku jiraan ugu yaraan dhamaan waxyaabahani: Magaca buuxa ee qofka maraya hubinta diiwaanka; taariikhda dhalashada; lambarka amniga bulshada; lambarka telefoonka ee hadda; cinwaanka boostada guriga ee hadda; magaca iyo lambarka shahaadada rukhsada; magaca dhamaan gobolada uu ku noolaa; iyo saxiixa oggolaanaya in hubinta taariikhda la buuxiyo.
- 2.3.7.3.6 Ujeedooyinka qeybtan awgood, iyo qayb kasta oo kamida nidaam sharcieedyadan oo tixraacaya Shahaadada Oggolaanshaha Faraha foomkaa waa in loo tixgeliyaa inuu yahay mid buuxa marka marka la buuxiyo ee ay saxeeaan Qeybtu iyo waa inay ku jiraan dhamaan waxyaabahani: Magaca buuxa ee qofka maraya faraha; taariikhda iyo goobta dhalashada; lambarka amniga bulshada; lambarka telefoonka ee hadda; magaca dhamaan gobolada uu ku noolaa; iyo saxiixa qofka maraya faraha; magaca iyo cinwaanka Qeybta loo gudbin doono natiijooyinka faraha.
- 2.3.7.3.7 Qeybta waa inay buuxisaa oo ay ka baraandegtaa dhamaan hubinta taariikhda sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ah, laakiin waa in aanay ka badnaan shan iyo afartan (45) maalmood laga bilaabo maalinta Xarunta Macluumaadka Dembiyada ee Vermont uu helo dhamaan cadaymaha.
- 2.3.7.3.8 Iyada oo ku saleysan natiijooyinka hubinta taariikhda qofka lagu tilmaamay qaybtan dadka soo socda ayaa mamnuuc ah lama ogola inay ka shaqeeyaan, la shaqaaleysiyo, ama loo ogolaan inay keligood la joogaan carruurta joogta FCCH:

- Qofka looga baahan yahay inuu maro hubinta taariikhda ee diida ama isagoo og sameeya bayaan been ah oo la xiriira hubinta taariikhda;
- Qofka lagu helo musuqmaasuq;
- Qof lagu xukumay dembi ka kooban:
 - Dil,
 - Ku xadgudubka ama dayacida ilmo,
 - Dambi ka dhan ah ilmo, oo ay ku jiraan hawlaha galmada ama filimada xunxun ee ilmo,
 - Ku xadgudubka sayiga/xaaska,
 - Dambi ku lug leh kufsi ama faraxumayn,
 - Afduub,
 - Gubid/Dab qabadsiin,
 - Weerar jirka ah ama baytari, ama
 - Dembi la xiriira daroogada oo la sameeyay shantii (5) sano ee lasoo dhaafay;
- Qofka lagu helay dembi yar oo ka dhan ah ilmo ama qof kale oo ka kooban:
 - Dulmi,
 - Ku xadgudubka ama dayacida ilmo,
 - Khatar gelinta ilmo,
 - Ku xadgudub ama hawl galmo
 - Filimada xunxun ee ilmaha, ama
 - dhaawacyada kale ee jirka,
- Qofka ay maxkamadda ku heshay inuu ku xadgudubay, dayacay ama si xun ula dhaqmay ilmo, qof waayeel ama naafo ah, ama xayawaan.
- Qof weyn ama ilmo oo warbixiyay xadgudub ama dayacaad ka dhan ah isaga/iyada oo hoos timaada Cutubyada 49 iyo 69 ee Title 33 Qaanuunka Vermont ee Ku Qoran, ama
- Qofka ka diiwaangashan, ama looga baahan yahay inuu is diiwaangaliyo, oo ku jira diiwaanka dembiyada galmada ee Diiwaanka Qaranka Dembiilayaasha Galmada ee la aasaasay sida waafaqsan Xeerka Adam Walsh ee Ilaalada iyo Badbaadada Caruurta ee 2006.

2.3.7.3.9 Waaxda ayaa qof u go'aansan karta inuu yahay mamnuuc marka uu jiro macluumaad la garanayo oo sheegaya in ficilkiisa/ficilkeedu uu carruurta diiwaangashan gaadhsiin karo halis ama waxyeelo.

2.3.7.3.10 Qeybtu waa inay natiijada hubinta taariikhda siiyaan FCCP-da la filayo, ee sheegaysa haddii shakhsiga lagu sameeyay hubinta taariikhdu laga mamnuuco sida uu u baahanyay xeerka 2.3.7.3.8 ee qaanuunkan ama xeerka 2.3.7.3.9 ee nidaam sharciyeedyadan iyadoon daaha laga qaadayn waxa salka u ah go'aanka sida uu u baahanyay xeerka 2.3.7.3.12 ee nidaam sharciyeedyadan

iyo waa in la ogaado in qofka mamnuuca ahi uu xaq u leeyahay inuu codsado ka duwanaysiin.

2.3.7.3.11 Marka ay Qeybtu go'aamiyaan in shaqsi uu mamnuuc ka yahay sida uu u baahan yahay xeerka 2.3.7.3.8 ama xeerka 2.3.7.3.9 ee nidaam sharciyeedyadani, Qeybtu waa inay shakhsiga maray hubinta taariikhda siiyaan natiijada hubinta taariikhda; waxa salka u ahaa go'aanka; hanaanka uu shakhsigu mari karo haddii uu rabo inuu tartansiiyo saxsanaanta ama buuxsanaanta macluumaadka lagu saleeyay go'aanka iyo haddii uu shakhsigu xaq u leeyahay inuu codsado ka duwanaysiin.

2.3.7.3.12 Qeybtu waa in aanay wadaagin wax macluumaad ah oo la xiriira hubinta taariikhda cid aan ahayn cida uu u baahanyay xeerka 2.3.7.3.10 ama xeerka 2.3.7.3.11 ee nidaam sharciyeedyadani.

2.3.7.3.13 Kaliya dadka lagu mamnuucay xeerka 2.3.7.3.8 ee nidaam sharciyeedyadan ama 2.3.7.3.9 ee qaanuunadan ee sababahan soo socda ayaa xaq u leh inay codsadaan ka duwanaa:

- Xukun musuqmaasuq;
- Dembi la xiriira daroogo oo la sameeyay intuu lagu jiray shantii (5) sanno ee lasoo dhaafay,
- Xukumida dembi yar oo ka dhan ah qof kale kana kooban:
 - Dulmi;
 - Dhaawacyo kale oo jireed, ama
- Ama macluumaad kale ee loo sheego Waaxda.

Shakhsiyaadkan waxaa laga yaabaa inay ama laga shaqaaleysiiyo FCCH ah keliya marka FCCP-da la filayo iyo qof ku lug lehi, ay qoraal ka duwanaysiin ah ka helaan Gudoomiyaha ama qofka loo xilsaaray. FCCP-da la filayo iyo qofka ku lug leh waa inay codsadaa ka duwanaysiin iyagoo cadeynta ku haboonaanta ama kasoo kabashada u gudbinaya Gudoomiyaha ama qofka loo xilsaaray. Culayska cadeyntu wuxuu saaran yahay FCCP-da la filayo iyo qofka ku lug leh.

2.3.7.4 Aqoonta FCCP: Ka hor rukhsad siinta hore FCCP-da la filayo waa inay keentaa cadaynta waxbarashada, tababarka iyo waayo-aragnimada tayadiisa/tayadeeda iyo Akoontka Aqoonsiga ee BFIS. Cadayntani waa inay muujisa sida isaga/iyadu uu u buuxinayo shuruudaha ugu yar ee aqoonta lagu aasaasay xeerarka qaybta 7.3 ee nidaam sharciyeedyadan.

2.3.7.5 Ka Hortagga Sumowga Ledh: Haddii xarunta rukhsada la siinayo la dhisay ka hor 1978 oo aanuu baadhe rukhsad ka heysta Waaxda Caafimaadka ee Vermont aanuu go'aamin inay ka ammaan tahay ledh, FCCP-da la filayo waa inay u hogaansaataa waxyaabaha looga

baahanyay ee ku qoran 18 V.S.A Cutubka 38 ee Sharciga Ledh kadib intaan la siin rukhsad iyo waa inuu xaqiijiyaa in Dhaqanka Muhiimka ee Dayactirka (EMP) la sameeyay. Macluumaad ka socda EMP waa in lagu soo daraa codsiga hore si loo bixiyo rukhsad. Waxa laga yaabaa in la diido codsi iyadoo lagu saleynayo in carruurta ay gaadhi karto ledhtu iyadoo ah khatar caafimaad.

2.3.7.6 Daboolida Caymiska: FCCP waa inay qaadaa deynta caymiska ee qadar macquulka ah ee ilaanteedda iyo ilaalinta carruurta dhigata FCCH. Caddeynta caysanaanta caymiska waa in la siiyaa Qeybta. Caymiska gaadiidka, haddii ay khusaysayso waa inuu daboolaa waxyeelada hantida, dhaawaca jirka iyo deynta.

2.3.7.7 Baaritaanka Nidaamka Kuleylinta: habka kuleyliyaha FCCH waa inuu baaraa qof aqoon leh oo ogaadaa inuu si sax ah loo rakibay oo ay shaqeynayaan. Waa in Qeybta loosoo diraa cadeynta baaritaanka lagu qanci karo ee la sameeyay lixii (6) bilood ee ugu dambeeyay kahor codsiga hordhaca ah.

2.3.7.8 FCCP-da la filayo waa inay buuxiyaan dhamaan shuruudaha khuseeya ee Qeybta Badbaadada Dabka ee Vermont iyo Sharciga Dadka Mareykanka ee Naafada ah ee US.

2.3.7.9 FCCP-da rukshada heysataa waa inay xaqiijisaa in nidaamka biyaha iyo biyaha bulaacada ee ay isticmaalaan FCCP-da rukshada heysata, haddii uu u baahdo Xeerka Biyo Qeybinta iyo/ama Nidaamka Biyaha Bulaacada iyo Xeerarka Biyaha La Cabi Karo, sida ay go'aansatay Waaxda Ilaalinta Deegaanka, uu soo qaato ogolaanshaha loo baahanyay. Ogolaanshaha loo baahanyay ama cadaynta nidaam biyood la ansixiyay waa in lasoo raaciyaa codsiga hordhaca ah.

2.3.7.10 FCCP-da filayo waa inay xaqiijisaa in biyaha la cabo ay u hogaansan yihiin shuruudaha tijaabinta ee Xeerka Biyo Qeybinta ee Vermont iyo tijaabada ugu horeysaa waa inay noqotaa ledh ay falanqeeyaan Sheybaarka Biyaha La Cabo ee ay shahaadeysiiyeen Gobolka Vermont sida uu dhigayo 18 VSA §501b.

- Natijooyinka waa inay la kulmaan heerarka Vermont.
- Biyaha waxa laga yaabaa in la saxo oo dib loo baaro si loo hubiyo cabida haddii wax tijaabada/tijaabooyinka sare loo qaado.
- Biyaha cabista ee caagadaha waa in la bixiyaa ilaa iyo inta nidaamka biyaha la cabo ay la kulmayaan heerarka Vermont.
- Macluumaadka kasoo baxa tijaabada biyaha waa in lagu daraa codsiga hordhaca ah.

2.3.7.11 Haddii FCCH Rukhsada Heysata ee la filayo aan looga baahnayn inay haysato ogolaanshaha biyaha cabista ee la xiriira Xeerka Biyo Qeybinta ee Vermont sida uu sheegayo xeerka 2.3.7.9 ee nidaam sharciyeedkani, FCCH-ta rukhsada heysata ee la filayo waa inay xaqiijisaa in biyaha cabitaanka la dayactiray.

- Tijaabinta biyahu waa inay ku jiraan (jiritaanka/maqnaanshaha wadarta bakteeriyada koolifoom) iyo baaritaanka kiimikada (arsenic, uranium, nitrate, manganese, nitrate iyo fluoride). Tijaabadan waa inay falanqeeyaan Shaybaarka Biyaha La Cabo ee ay shahaadeysiyeen Gobolka Vermont sida uu dhigayo 18 VSA § 501b.
- Natiijooyinka waa inay la kulmaan heerarka Vermont. Biyaha waa in la saxo oo dib loo baaro si loo hubiyo cabida haddii wax tijaabada/tijaabooyinka sare loo qaado.
- Biyaha cabista ee caagadaha waa in la bixiyaa ilaa iyo inta nidaamka biyaha la cabo ay la kulmayaan heerarka Vermont.
- Saambalka waa inuu noqdaa saambal matala oo laga keenay qasabada wakhtiga badankiisa loo isticmaalo cabitaanka kadib daaweyn kasta (tusaale ahaan; nidaamka iftiinka UV, jilciye ama miiraha jaarkol).
- Macluumaadka kasoo baxa tijaabadan biyaha waa in lagu daraa codsiga hordhaca ah.

2.3.7.12 FCCP-da la filayo waa inay xaqiijisaa in nidaamka biyaha la cabo ee u adeego in ka yar shan iyo labaatan (25) qof maalin walba, si fiican u shaqeeya ama gu'ga, oo loo dayactiro nidaamka biyaha la cabo ee biyaha la cabo.

- Tijaabinta biyahu waa inay ku jiraan (jiritaanka/maqnaanshaha wadarta bakteeriyada koolifoom) oo ah bakteeriyada iyo baaritaanka kiimikada (arsenic, uranium, nitrate, manganese, nitrate and fluoride). Tijaabadan waa inay falanqeeyaan Shaybaarka Biyaha La Cabo ee ay shahaadeysiyeen Gobolka Vermont sida uu dhigayo 18 VSA § 501b.
- Natiijooyinka waa inay la kulmaan heerarka Vermont. Biyaha waa in la saxo oo dib loo baaro si loo hubiyo cabista haddii wax tijaabada/tijaabooyinka sare loo qaado.
- Biyaha cabista ee caagadaha waa in la bixiyaa ilaa iyo inta nidaamka biyaha la cabo ay la kulmayaan heerarka Vermont.
- Saambalka waa inuu noqdaa saambal matala oo laga keenay qasabada wakhtiga badankiisa loo isticmaalo cabitaanka kadib daaweyn kasta (tusaale ahaan; nidaamka iftiinka UV, jilciye ama miiraha jaarkol).
- Macluumaadka kasoo baxa tijaabadan biyaha waa in lagu daraa codsiga hordhaca ah.

2.3.7.13 Laga bilaabo taariikhda codsiga, FCCP-da la filayo waa inuu isaga/iyadu cadeeyaa inuu/inay u hogaansantay 32 VSA § 3113 isagoo/iyadoo leh taariikh fiican marka la eego ama si buuxda uu ugu hogaansanyay qorshe ay ansixiyeen Komishanka Cashuuraha inuu/inay bixiyo dhamaan wixii cashuur ah ee lagu leeyahay Gobolka Vermont.

2.3.7.14 Laga bilaabo taariikhda codsiga, FCCP-da filayo waa in uu isagu/iyadu cadeeyaa inuu u hogaansanyay 15 VSA § 795 isagoo/iyadoo leh taariikh fiican marka la eego ama si buuxda uu ugu hogaansanyay qorshe ay ansixiyeen Xafiiska Taageerada Ilmaha ee Vermont inuu bixiyo dhamaan wixii taageerada ilmaha ah ee lagu leeyahay Gobolka Vermont.

2.3.7.15 Xuduudeynta iyo Ansixinada FCCH-ta Rukhsada Heysata

2.3.7.15.1 FCCP-da la filayo ee Rukhsada Heysataa waa inay la kulantaa dhammaan shuruudaha ay ku dabaqi karaan xeerarka xuduudeynta ee degmadu.

2.3.7.15.2 Ansixinta xuduudeynta ee FCCH-ta Rukhsada Heysataa waa inay si fiican looga diiwaan geliyo xafiiska degmadu meesha FCCH-ta Rukhsada Heysataa ay degan tahay sidoo kale waa in nuqul loo diraa codsiga hore.

2.3.7.15.3 FCCP-da la filayo ee Rukhsada Heysataa waa inay xaqiijisaa in FCCH-ta Rukhsada Heysata la dhisay, la goglay, la dayactiray oo ay u qalabaysan si waafaqsan dhammaan shuruudaha lagu dabaqi karo ee ay aasaaseen Federaalka, Gobolka, hay'adaha maxalliga ah iyo kuwa degmadu.

2.3.7.16 Dib u eegida Qeybta iyo Jawaabta: Marka la helo codsiga dhameyskatiran, wakiilka Qeybtu waa inuu:

- Dib u eegaa codsiga, wada tashi la sameeyaa FCCP-da ee la filayo, wax weyddiyo iyo waxa laga yaabaa inuu kormeero goobaha si uu u go'aamiyo haddii FCCP-da la filayo si buuxda ama qeyb kamida ugu hogaansamay qodobada lagu dabaqi karo ee nidaam sharciyeedyadan;
- Sameeyo go'aan aan dib dhicin oo la xiriira soo saarista rukhsada; iyo
- Waa Inuu FCCP-da la filayo wargeliyo go'aanka.

2.3.7.17 Haddii Rukhsada lagu hawlgallayo la diido, Qeybta waxay ogeysiin doontaa FCCP-da la filayo iyagoo u qoraya sababta/sababaha diidmada iyo waxay u sheegi doonaan xuuqda FCCP-du ay racfaan kaga qaadan karto go'aanka.

2.3.8 Shuruudaha Rukhsad Siinta ee Sannadlaha ah

2.3.8.1 Lixdan (60) maalmood ka hor sannad guurada rukhsada hadda ee FCCH, Qeybtu waa inay qofka rukhsada heysta u diraan ogeysiis elektaroonik ah oo ku saabsan shuruudaha rukhsada sannadlaha ah.

2.3.8.2 FCCP waxay buuxin doontaa dhamaan shuruudaha rukhsada sanadlaha kahor taariikhda sannad guuradii rukhsada FCCH ee hadda.

2.3.8.3 FCCP waa inay xaqiijisa FCCP; dhammaan dadka ku nool guriga; shaqaalaha; iyo shakhsiyaadka carruurta lagaga tago ay la kulmeen shuruudaha hubinta taariikhda ee joogtada ah iyagoo ugu yaraan hal mar shan (5) sanno oo kasta gudbinaya Foomka Ogolaanshaha Hubinta Taariikhda una gudbinaya Qeybta iyo sida loo baahdo waa in lasoo gudbiyaa faraha.

2.3.8.4 FCCP waa in ay xaqiijiso in FCCP iyo dhamaan shaqaalaha ay la kulmeen shuruudaha joogtada ah ee horumarinta xirfada sida lagu qeexay xeerka 7.4 ee nidaam sharciyeedyadan.

2.3.8.5 Haddii goobta rukshada heysata la dhisay ka hor 1978 oo kormeere ay shahaadeysiisay Waaxda Caafimaadka ee Vermont aanuu aqoonsan haddii aanay ledh lahayn, FCCP waa inay u hogaansanaataa shuruudaha 18 VSA Cutubka 38 ee Sharciga Ledh ee Vermont iyo waa in la hubiyaa in la sameeyay oo la cadeeyay Dhaqanka Dayactirka Muhiimka ah (EMP).

2.3.8.6 FCCP waa inay ilaalisaa cadaynta goobta ee caymiska joogtada sida ku qeexan xeerka 2.3.7.6 of ee nidaam sharciyeedkan.

2.3.8.7 Haddii natiijooyinka tijaabada ledh ee biyaha la cabo ay lamid noqdeen ama ama ay ka badnaadeen xadka la aqbali karo waqtiga rukhsad siinta hore, FCCP waa in ay xaqiijiso in saambal la falanqeeyo hal mar 365 maalmoodba oo waa inuu sameeyaa Shaybaarka Biyaha La Cabo oo ay shahaadeysiisay Gobolku sida uu dhigay 18 VSA §501b. Cadaynta kasoo baxda tijaabada biyahan waa in lagu hayo goobta.

2.3.9 Hanaanka Dib u Cusbooneysiinta Rukhsada

2.3.9.1 Lixdan (60) maalmood ka hor dhicista rukhsada hadda ee FCCH, Qeybtu waa inay FCCP u dirtaa ogeysiiska elektaroonika ee ku saabsan shuruudaha dib u cusboonaysiinta rukshada iyadoo loo marayo BFIS.

2.3.9.2 Waa mas'uuliyada FCCP inay la socdaan taariikhda uu dhacayo rukhsadoodu oo ay sameeyaan codsiga cusboonaysiinta ku filan oon dib dhicin si ay u ilaaliyaan xaaladda rukhsadooda. Waxaa lagu talinayaa in FCCP ay Qeybta usoo gudbiyaan codsiga rukhsada cusboonaysiinta ugu yaraan afartan iyo shan (45) maalmood gudahood ka hor dhicista rukhsada hadda ee FCCH si loo hubiyo in dhammaan cadaymaha loo baahan yahay iyo xaqiijinta la dhamaystiro ka hor taariikhda uu dhacayo. Codsiyada cusboonaysiinta la helo shan iyo toban (15) maalmood gudahood kahor wakhtiga uu dhacayo ayaa laga yaabaa in aan laga baaraandegin isla markaba si loo hubiyo in codsiga ku filan ee dib u cusboonaysiinta.

2.3.9.3 Codsii dhameystiran iyo dhammaan qoraalada lagama maarmaanka ah iyo xaqiijinta waa in la soo gudbiyaa ka hor taariikhda ay dhacayso rukshada haddu.

2.3.9.4 Qeybtu ayaa sameyn doonta booqasho rukhsad siin ugu yaraan hal mar markasta oo ay dib u cusbooneysiinayso oo ay ku tagayaan FCCH kasta.

2.3.9.5 FCCP waa inay dib u cusboonaysiinta rukhsada ku codsataa foomamka la siiyay iyo habka ay sameeyeen Qeybtu. Shuruudaha dib u cusbooneysiinta waa inay ka koobnaadaan ugu yaraan:

2.3.9.5.1 Dhamaan shuruudaha rukhsad siinta sanadlaha ah, hubinta taariikhda, shahaadooyinka shaqaalaha iyo horumarinta xirfadeed ee sannadlaha ah, ka hortaga sunta ledh, caymiska, iyo tijaabada biyaha la cabo sida ku cad xeerarka qaybta 2.3.8 ee nidaam sharciyeedyadan; iyo

2.3.9.5.2 FCCP waxay xaqiijin doontaa in nidaamka kulaylinta FCCH uu kormeeray qof aqoon u leh oo la ogaaday inay si fiican u rakiban yihiin iyo ay si fiican u shaqeynayaan intii lagu jiray 730 maalmood ee la soo dhaafay. Caddeynta kormeer lagu qanci karo waa in loo diraa Qeybta kormeerka kastaba.

2.3.9.5.3 Haddii FCCH-da rukhsad heysata aan looga baahnayn inay heysato ogolaanshaha biyaha la cabo ee la xiriirta Sharciga Biyo Qeybinta ee Vermont sida ku qoran xeerka 2.3.7.9 nidaam sharcieedyadan, FCCP-da rukhsada heysata waa inay xaqiijiso in nidaamka biyaha la cabo si kimikaal ah looga tijaabiyay arsenic, uranium, nitrite, manganese , iyo fluoride hal mar lix (6) sano oo kasta. Tijaabadan waa inuu falanqeyyaa Shaybaarka Biyaha La Cabo oo uu Gobolka Vermont shahaadeysiiya sida uu dhigayo 18 VSA §501b.

- Natijoooyinka waa inay la kulmaan heerarka Vermont. Biyaha waa in la saxo oo dib loo baaro si loo hubiyo cabida haddii wax tijaabada/tijaabooyinka sare loo qaado.
- Biyaha cabista ee caagadaha waa in la bixiyo ilaa iyo inta nidaamka biyaha la cabo ay la kulmayaan heerarka Vermont.
- Saambalka waxay noqon doontaa saambal matala oo laga keenay qasabada wakhtiga badankiisa loo isticmaalo cabitaanka kadib daaweyn kasta (tusaale ahaan; nidaamka iftiinka UV, jilciye ama miiraha jaarkol).
- Macluumaadka kasoo baxa tijaabadan biyaha waa in lagu daraa codsiga hordhaca ah.

2.3.9.5.4 FCCP -da la filayo waa inay xaqiijisaa in nidaamka biyaha la cabo uu u adeego in ka yar shan iyo labaatan (25) qof maalin walba, si fiican u shaqeeya ama gu'ga, si kiimikaal ahaana looga baaro arsenic, uranium, nitrate, manganese, nitrate iyo fluoride. Tijaabadan waa inay falanqeyyaan Shaybaarka Biyaha La Cabo ee ay shahaadeysiiyeen Gobolka Vermont sida uu dhigayo 18 VSA § 501b.

- Natijoooyinka waa inay la kulmaan heerarka Vermont. Biyaha waa in la saxo oo dib loo baaro si loo hubiyo cabida haddii wax tijaabada/tijaabooyinka sare loo qaado.
- Biyaha cabista ee caagadaha waa in la bixiyo ilaa iyo inta nidaamka biyaha la cabo ay la kulmayaan heerarka Vermont.
- Saambalka waxay noqon doontaa saambal matala oo laga keenay qasabada wakhtiga badankiisa loo isticmaalo cabitaanka kadib daaweyn kasta (tusaale ahaan; nidaamka iftiinka UV, jilciye ama miiraha jaarkol).
- Macluumaadka kasoo baxa tijaabadan biyaha waa in lagu daraa codsiga hordhaca ah.

2.3.9.5.5 Leh taariikh fiican oo ah bixinta cashuurta lagu leeyahay Gobolka Vermont sida lagu xusay xeerka 2.3.7.13 ee nidaam sharcieedyadan ; iyo

2.3.9.5.6 Leh taariikh fiican oo ku saabsan bixinta waajibaadka taageerada ilmaha sida lagu xusay xeerka 2.3.7.14 ee nidaam sharcieedyadan.

2.3.9.6 Waqtiga dib u cusbooneysiinta FCCP waa in ay muujisaa sida ay Qeybtu ku qanacdo Qeybta in FCCH ay si buuxda ama qeyb kamida ugu hogaansantay nidaam sharciyeedyadan.

2.3.9.7 Marka FCCP ay sameyso codsi ku filan oo aan dib dhicin iyo codsiga ku filan ee dib u cusbooneysiinta, rukhsada jirtaa waa in aanay dhicin ilaa iyo inta ay Qeybtu go'aan ka qaadanayaan codsiga dib u cusbooneysiinta.

2.3.9.8 Haddii FCCP aanay keenin qalabka codsiga eek u filan iyo cadeynta u hogaansanaanta kahor taariikhda uu dhacayo rukhsada hadda, rukhsadu way dhacaysaa, FCCP-na waa inay soo gudbiyaan codsi rukhsadeed oo ay la kulmaan dhamaan shuruudaha soo saarista rukhsad buuxda si ay daryeel u siiyaan carruurta in ka badan laba (2) qoys oo aan ahayn kooda.

2.3.9.9 Dib u eegida Qeybta iyo Jawaabta: Marka la helo codsiga dhameyskatiran, wakiilka Qeybtu waa inuu:

- Dib u eegaa codsiga, wada tashi la sameeyaa FCCP-da la filayo, wax weydiyo iyo waxa laga yaabaa inuu kormeero goobaha si uu u go'aamiyo haddii FCCP-da la filayo ay si buuxda ama qeyb kamida ugu hogaansamay qodobada lagu dabaqi karo ee nidaam sharciyeedyadan;
- Sameeyaa go'aan aan dib dhicin oo la xiriira soo saarista rukhsada; iyo
- FCCP-da la filayo wargeliyo go'aanka.

2.3.9.10 Haddii Rukhsada lagu hawlgalayo la diido, Qeybta waxay ogeysiin doontaa FCCP-da la filayo iyagoo u qoraya sababta/sababaha diidmada iyo waxay u sheegin doonaan xuquuqda FCCP ay racfaan kaga qaadan karaan go'aanka. FCCP-da gudbinaysa racfaan aan dib dhicin waa ay sii wadi kartaa inay ku hawlgasho rukhsada ku meelgaarka ah marka lagu jiro racfaanka sida ay dhigayaan xeerarka qeybta 2.5 ee nidaam sharciyeedyadan.

2.3.10 Rukhsada

2.3.10.1 Rukhsada rasmiga ah ee lasoo dhajiyay waa inay ku jiraan oo ay bandhigtaa waxyaabahan soo socda:

- Xaalada rukhsada: buuxda ama ku meelgaarka ah,
- Taariikhda ay bilaabmayso rukhsadu;
- Taariikhda ay dhacayso rukhsadu;
- Nooca adeega nidaamka lagu dabaqi karo ee ogolaanshaha loo siiyay inay ku hawlgalaan;
- Shuruudaha iyo/ama xaaladaha lagu daray rukhsada; iyo
- Ansixinta ay ku diyaarin karaan kuna bixin karaan haddii loo ogolaaday.

2.3.10.1.1 Rukhsada rasmiga ah ee lasoo dhajiyay ee barnaamijka la rukhsadeeyay waa inay ku jiraan kuwan soo socdaa:

- Tirada ugu badan ee carruurta loo adeegi karo hal (1) mar; iyo
- Da'da carruurta loo adeegayo.

2.3.10.2 Waxa laga yaabaa inay qeybtu shuruudo iyo xaalado ku lifaaqdo rukhsada marka ay duruufaha gaarka ahi ay khasbaan. FCCP waa inay dhawrtaa u hogaansanaanta dhammaan shuruudaha iyo xaaladaha ku yaala shahaadada rukhsada.

2.3.10.3 FCCP waa in aanay doorin ama faraha la gelin rukhsada rasmiga ah ee lasoo dhajiyay ama aanay sameyn hab kale oo ay oo ay ku doorinayso ama faraha kula galayso rukhsada rasmiga ah ee lasoo dhajiyay.

2.3.10.4 FCCP ayaa masuul ka noqon doonta u hogaansanaanta xeerarkan iyo waa inay waa inay FCCH-ta ku hawlgeliyaan rukhsada rasmiga ah ee lasoo dhajiyay.

2.3.10.5 FCCP ayaa masuul ka noqon doonta u hogaansanaanta dhammaan xeerarka gobolka iyo federaalka ee lagu dabaqi karo xitaa marka ay ka adag yihiin nidaam sharciyeedyada FCCH.

2.3.10.6 FCCP waa in aanay soo bandhigin ama bixin aragti ah in FCCH iyo adeegyadeeda ay yihiin si ka duwan sida lagu qeexay shahaadada rukhsadu iyo xadeynta of qaanuunadan.

2.3.11 Isbedelada Saameyn Kara Rukhsad

FCCP waa inay la socodsiisaa Qeybta kahor intaanay sameyn wax kamida isbadeladan soo socda ee lagu sameynayo shaqada FCCH. Qeybta ayaa go'aansan doonta haddii ay suurogal tahay inay wax laga badalo rukhsada hadda, la ansixiyo ka duwanaysiin wakhti kooban ah ama haddii ay tahay in FCCP ay soo gudbiso codsi rukhsad cusub:

- Hoos udhigida, wax ku darida, ama isbedal la taaban karo oo lagu sameeyo goobta loo isticmaalo daryeelka carruurta FCCH;
- Badelka magaca FCCH;
- Badelka Lambarka Aqoonsiga Cashuur Bixinta ee FCCH;
- Badelka ku nooca rukhsada adeega nidaamka ee loo ogolaaday sida ku qeexan xeerarkan;
- Badelka tirada carruurta FCCH ay u adeegta hal (1) mar wakhtigiiba;
- Badelka da'da carruurta ay FCCH u adeegto,
- Badelka lagu sameeyo xubin ka noqoshada sida uu sheegayo xeerka 7.2.2 ee nidaam sharciyeedyadan ama.
- Haddii FCCP aanay awoodin inay bixiso daryeel toos ah oo lagama maarmaan ka dhigaya badel wakhti dheer ah.

2.4 Xadgudubyada iyo Tallaabada Sixitaanka

- 2.4.1 Marka laga ogaado in xadgudubyo ay jiraan, Qeybtu waxay FCCP siin doontaa fursada ay ku sameyn karaan qorshaha horumarinta barnaamijka kaas oo lagu sixi doono xadgudubyada muddada waqtiga ee ay si wadajir ugu heshiin karaan Qeybta iyo FCCP.
- 2.4.2 Marka xadgudubyadu ay soo bandhigaan khatar dhaw oo waxyeelo jirka, dareenka ama koritaanka ah ku keeni karta carruurta, ama ay muujiyaan u hoggaansanaan la'aan xiriir ah, ama FCCP ay ku guuldareysto inay u hoggaansamaan shuruudaha tallaabada sixitaanka; Waxa laga yaabaa inay qeybtu doortaan inay qaadaan tallaabo nidaam oo dheeraad ah.

2.5 Hakinta, Kala Noqoshada ama Diidmada Rukhsada

- 2.5.1 Haddii Qeybtu ay go'aamiso in caafimaadka, ammaanka ama fayyo-qabka carruurta dhigata FCCH ay khatar degdega oo dhab ah ay ku sugan yihiin, Waxa laga yaabaa in Qeybtu ay isla markiiba ay hakiyaan rukhsad marka ay diraan waraaq hakineed oo qoran. FCCP ma siin doonto daryeelka carruurta inka badan laba (2) qoys oo aan kooda ahayn marka rukhsada la hakiyo. Amarku waa inuu sheegaa sababta/sababaha iyo xaqiiqaha salka u ah hakinta. Amarku waa inuu ku jiraa xuquuqda ay FCCP racfaan kaga qaadan karaan go'aanka kuna codsan karaan dhagaysi.
- 2.5.2 Qeybtu way diidi karaan codsiga rukhsad siinta ama dib u cusboonaysiinta ama kala noqoshada rukhsada hadda ee FCCH sabab wanaagsan awgood, laakiin aan ku xaddidnayn kuwan soo socda:
 - 2.5.2.1 Ku guuldareysiga soo gudbinta warbixin ku filan si loo sameeyo go'aanka rukhsad siinta ama ka hor dhicista ee rukhsada;
 - 2.5.2.2 Ku guuldareysiga inay u hoggaansamaan qodobada lagu dabaqi karo ee sharciga gobolka ama federaalka ama xeerarkan;
 - 2.5.2.3 Ku xadgudubka shuruudaha ama xaaladaha rukhsadan;
 - 2.5.2.4 Hawlqabad, siyaasad, dhaqan ama wax kasta oo ay shaqaaluhu sameeyaan oo halis galinaysa caafimaadka, ammaanka ama fayyo-qabka carruurta dhigata FCCH ee ku jira khatar dhab ama soo socota ee Qeybtu u arkaan inay dhaawici karto caafimaadka, ammaanka, horumarinta ama fayyo-qabka carruurta;
 - 2.5.2.5 Bixinta macluumaad been ah, macluumaad aan dhameystirneyn ama si been ah u sheegida xaqiiqooyinka si loo helo, loo cusbooneysiyo rukhsad ama shaqada FCCH.
 - 2.5.2.6 Diidmada siinta Qeybta macluumaad, feylal, warbixino ama diiwaanada sida ay u baahan yihin xeerarkani;

- 2.5.2.7 Diidmada in loo ogolaado wakiilka rasmiga ee Qeybtu gelitaanka FCCH marka lagu jiro saacadaha macquulka ah sida looga baahanyay xeerarkan, ama
- 2.5.2.8 Anshax muujinaya diidmo soo noqnoqota ama awood la'aanta in si joogto ugu hogaansanaato xeerarkan.
- 2.5.3 Rabitaanka Qeybta ee kala noqoshada rukhsada waa in lagu gaadhsiiyo qoraal ahaan oo la sheego sababta/sababaha iyo xaqiiqaha salka u ahaa tallaabada la qaadayo. Ogeysiiskan waa inuu ku jiraa xuquuqda ay FCCP racfaan kaga qaadan karto go'aanka iyo ay ku codsan karto dhagaysi. Ogeysiis ku filan waa in la siiyaa FCCP si ay u gutaan xuquuqahaas.
- 2.5.4 Qeybtu waa inay tallaabadeeda ogeysiisa waalidka/waalidiinta carruurta ka diiwaangashan ama tallaabooyinka lasoo jeediyay marka rukhsada la hakiyo ay marayso kala noqoshada loogu talagalay.

2.6 Xuquuqda Aad Racfaan uga Dhiiban Karto Tallaabooyinka Nidaamka

- 2.6.1 Haddii ay Qeybta qaado mid ka mid ah tallaabooyinka soo socda ama tallaabooyinka la rabo in la qaado:
- Dib ula noqoto rukhsada buuxda ama ku meelgaarka ah ee ay ku shaqeeyaan,
 - Diido ansixinta rukhsada ku meelgaarka,
 - Diido ansixinta rukhsad buuxda;
 - Daliishato xadgudubka nidaam sharciyeedyada kadib warbixinta booqashada goobta;
 - Diido codsi ah ka duwanaysiin, ama
 - Ka dhigto ka duwanaysiinta waxba kama jiraan,
- Qaybta waa inay ogeysiiyaan FCCP iyagoo u qoraya ogeysiiska ku haboon, oo ay ku jiraan cadaynta dhabta ee Qeybtu aaminsan tahay inay dhalisay tallaabada ama tallaabada la rabo in la qaado iyo FCCP u sheegeen xuquuqda ay racfaan kaga qaadan karaan go'aanka iyo ay ku codsan karaan dhagaysi.
- 2.6.2 Haddii FCCP ay ka carooto tallaabada ama tallaabada la rabo in la qaado, waa in ay ku tilmaamaan qoraal ahaan soddon (30) maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda ay Qeybto ogeysiiso qoraal ahaan in isagu/iyadu doonayo inuu ka doodo tallaabada ama tallaabada la rabo in la qaado. Ogeysiiska qoraalka ee racfaanka, FCCP waa inay sheegtaa haddii isagu/iyadu uu codsanayo dib u eegista dhageysiga ee Gudoomiyaha ama racfaan toos loogu dirayo Guddiga Adeegyada Aadanaha. Haddii FCCP ay codsadaan racfaan toos loogu dirayo Guddiga Adeegyada Aadanaha, Qeybta waxay codsiga FCCP ogeysiin doontaa Guddiga Adeegyada Aadanaha.
- Racfaanada ku doodaya dib ula noqoshada rukhsad buuxda ama mid ku meelgaar ah si ay ugu shaqeeyaan, ama diidmada ka duwanaysiinta ma mari doonaan dib u eegista dhageysiga ee Gudoomiyaha laakiin waxa toos loogu diri doonaa Guddiga Adeegyada Aadanaha.
 - Dhamaan racfaanada kale waxay mari karaan dib u eegista dhageysiga ee Gudoomiyaha ama waxa si toos ah loogu diri doonaa Guddiga Adeegyada Aadanaha.

Go'aamada ka dhasha ee dib u eegista dhageysiga Gudoomiyaha waxay mari karaan racfaan dheeraad ah oo loogu diri karo Guddiga Adeegyada Aadanaha.

- 2.6.3 Haddii codsiga qoraalka ah ee Dib u Eegista dhagaesiga Gudoomiyaha ay helaan Qeybtu (30) maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda ogaysiiska tallaabada ama tallaabada la rabo in la qaado, Qeybtu waa in ay xaqiijiso in dhageysiga dib u eegista Gudoomiyaha la qabto soddon (30) maalmood oo shaqo gudahood laga bilaabo taariikhda codsiga qoraalka ah.
- 2.6.4 Qof uu xilsaaray Gudoomiyaha oo aan hore ugu lug lahayn arrinta keentay rafcaanku waa inuu qabtaa Dib u Eegista Gudoomiyaha.
- 2.6.5 Dib u Eegista dhageysiga Gudoomiyaha wuxuu FCCP siiyaa fursada lagu dhageysanayo arrinka la xiriira tallaabada ama tallaabada la rabo inla qaado. FCCP waxay jawaab qoraal ah u gudbin karaan ogeysiiska Qeybta, waxay qofka uu xilsaaray Gudoomiyuhu ee Waaxdu usoo bandhigi karaan booskeeda/booskiisa, ama iyadoo loo marayo qareen ama wakiil kale oo ay qoraal ugu xilsaartay FCCP. FCCP waxay keeni karaan markhaatiyaal, dhokumentiyoy ama cadaymo kale oo matalaya iyaga.
- 2.6.6 Hannaaka Dib u Eegista Gudoomiyaha waa inay ku jiraan dib u eegista cadaymaha dhabta ah ee ay keeneen Cutubka Rukhsad Siinta ee Qeybta, waxay wareysan doonaan shaqaalaha Cutubka Rukhsad Siinta, iyo waxaana laga yaabaa inay wareystaan wixii markhaatiyaal ah ee haya macluumaad la xiriira xaqiiqaha arrinka, oo ay ku jiraan laakiin aan ku koobnayn shaqaalaha barnaamijka iyo qoyska. Culayska cadeynta xaqiiqaha lagu eedeeyay, sida aasaaska u ah tallaabada nidaamka sharciiyeed, wuxuu saarnaan doonaa Waaxda.
- 2.6.7 Qeybta ayaa ogeysiin doonta FCCP iyadoo qoraal ugu diraya go'aanka kama dambaysta ah ee Waaxda iyadoo ah natiijada Dib u Eegista Gudoomiyaha iyo sababaha sii dhawraya ama joojinaya tallaabada ama tallaabada loogu talagalay.
- 2.6.8 Haddii FCCP aysan ku raacsaneyn natiijooyinka Dib u Eegista Gudoomiyaha, isaga/iyadu wuxuu sii wadi karaa racfaankiisa/racfaankeeda iyo waxay gudan karaan xuquuqda dhageysiga Guddiga Adeegyada Aadanaha hortooda. Haddii FCCP rabto inay sii wado racfaankeeda, isagu/iyadu waa inay soddon (30) maalmood gudahood ku ogeysiiyaan Guddiga Adeegyada Aadanaha laga bilaabo taariikhda warqada sheegaysa natiijooyinka Dib u Eegista Gudoomiyaha la helo.
- 2.6.9 Haddii FCCP ay codsato racfaan iyadoon dib dhicin, rukhsada jirtaa waxay ahaan doontaa mid shaqeysa ilaa iyo inta qoraalka rasmiga ay buriyaan Waaxdu, haddii ay dhacdo in Dib u Eegista Gudoomiyaha ama Guddiga Adeegyada Aadanaha haddii ay FCCP sii wado inay racfaanka u gudbiso Guddiga. Si kastaba ha ahaatee, Qeybtu waa inay awood u yeelato inay u hakiyaan rukhsada si dhakhso ah markasta oo ay rumaysan yihiin in caafimaadka, ammaanka ama fayyo-qabka carruurta dhigata FCCH ay ku jiraan khatar dhab ah ama mid dhow.
- 2.6.10 Haddii FCCP aanay sameyn codsi racfaan oo aan dib dhicin, tallaabada ama tallaabada la rabo in la qaado waxay dhaqangeli doontaa (30) maalmood kadib waqtiga soo saarida ogeysiiska asalka ah.

2.7 Ka Duwanaysiinta Xeerka

- 2.7.1 Gudoomiyaha, ama qofka loo xilsaaray, marka la codsado kiis shakhsi ah, ikhtiyaarkiisa/ikhtiyaarkeeda ayuu ku siin karaa ka duwanaysiinta xeerka. Ka duwanaysiin waxa la bixin kara marka ay jiraan xaalado gaar ah oo ka duwanaysiinta ee ku dabaqida caadiga ah ee xeerku uu dhibaato aan loo baahnayn ku keeni karo FCCP ama ilmaha iyo qoyska, oo ujeedadu xeerka lagu gaari karo iyada oo loo marayo hab kale.
- 2.7.2 FCCP waa inay qeybta ka codsato ka duwanaysiin iyadoo waraaq u qoraya kahor intaanay ka shaqeyiin hawl, siyaasad ama dhaqan kaas oo ku lid ah u hogaansanaanta buuxda ama ee qeyb kamid ah ee xeerarkan. FCCP waa inay aqoonsataa:
- Xeerka gaarka ah ee ay doonayaan in ay ka duwanaysiiyaan,
 - Gaar ahaanshaha codsiga ee la xiriira waqtiyo gaar ah ama in carruurta ama shaqaalaha shakhsiga ah;
 - Dhibaato gaarka ay abuurtay ku dabaqida tooska ah iyo
 - Qorshaha sida ujeedada nidaam sharciyeedka lagu gaadhi doono loona sii wadi doono.
- 2.7.3 Marka la helo codsiga loo buuxiyay ka duwanaysiinta, Qeybtu waa inay:
- Dib u eegaan codsiga, wada tashi la sameeyaan FCCP, ay wax weydiiyaan, baaritaan sameeyaan iyo waxa laga yaabaa inay amraan kormeerida barnaamijka iyo/ama goobta si ay u go'aansadaan haddii qorshaha lasoo gudbiyay uu gaari doono ujeedada nidaam sharciyeedka.
 - Sameeyaan go'aan aan dib dhicin oo la xiriira codsiga; iyo
 - Wargeliyaan FCCP go'aanka.
- 2.7.4 Go'aanka Qeybtu waa inuu noqdaa mid qoraal ah, waa in lagu qoraa sababaha go'aanka iyo waa in lagu daraa diiwaanka dadweynaha.
- 2.7.5 Haddii ay dhacdo in FCCP aysan sii wadin qorshaha la ogolaaday ee ujeedadu nidaam sharciyeedyadan sida lagu sheegay xeerarka 2.7.2 iyo 2.7.3 ee nidaam sharciyeedkan, Waxa laga yaabaa inay Qeybta ka duwanaysiinta u tixgeliyaan waxba kama jiraan.

2.8 Diiwaanka Dadweynaha ee Xadgudubyada

- 2.8.1 FCCP waa inay sida la faray soo dhajisaa, warbixinada booqashooyinka goobta, ogeysiisyada xadgudubyada, ama ogeysiisyada tallaabooyinka nidaamyada sharciyeed, in aan ka yareyn shan iyo toban (15) maalmood ka dib markii ay hesho FCCP waa inay ku dhajisaa meel uu macluumaadka si cad uga arki karaan waalidiinta.
- 2.8.2 Marka warqada ogeysiinta waalidka, ay sabab u tahay xadgudub halis ah ayaa loo baahan yahay, Wakiilka Qeybtu wuxuu FCCP si qoraal ah u wargelin doonaa shuruudan isagoo raacinaya sababaha iyo xaqiiqaha salka u ah xadgudubka iyo u nashqadeynteeda xadgudub halis ah. FCCP waa inay waalidka ilmo kasta oo ka diiwan gashan boostada ugu diraan PNL. Marka waalidka ilmuhu ay kala tageen ama ay isfureen waa in nuqul loo diraa waalid kasta haddii ay FCCP labada waalidba garanayaan. Xadgudubyada halista ah waxa lagu qeexay

xeerka 2.2.44 ee nidaam sharciyeedyadan maadaama xadgudubyada baaxada kooxda ama shuruudaha shaqaalaha, ama xadgudubyada si deg deg ah u khatar galiya caafimaadka, ammaanka ama fayyo-qabka carruurta. xadgudubyada halista ah sidoo kale waxa ka mid noqon kara ciqaabta jirka, la'aanta kormeerid, ama xiriir jireed ama galmo oo aan habboonayn.

- 2.8.3 Xadgudubyada waa in lagusoo dhejiyaa si fagaare ah barta internetka ee BFIS si ay waalidiinta u wargeliyaan xaalada nidaamka sharciyeed iyo taariikhda u hogaansanaanta ee FCCCH. Soo dhajinta xadgudubyada dadweynaha waxay ku ooli doonaan barta internetka ee BFIS ugu yaraan shan (5) sano. Haddii aanay ku celinta xadgudubyo gaar ah, FCCP waxay ka codsan kartaa Qeybta inay xadgudubyada dadweynaha laga saaro diiwaanka barta internetka ee BFIS ka dib wakhtigaa.

FCCH Qaybta 3 - Maamulka iyo Hawlgallada

3.1 Ogeysiiska Rukhsad Siinta Daryeelka ilmaha

- 3.1.1 Dhaawaca halista ah ama dhimashada ilmaha: FCCP waa inay warbixin aan dib dhicin u dirtaa Qeybta oo ku saabsan wixii dhaawac ama shil ah uu ku lug leeyahay ilmaha ku jira daryeelka oo keenaya inuu bukaan socod ama bukaan jiif caafimaad noqdo ama daaweynta ilkaha ama dhimasho. Haddii ay dhacdo dhimasho, warbixin afka ah waa in la sameeyo isla markiiba iyada oo ay raaci doonto warbixin qoraal ah afar iyo labaatan (24) saacadood gudahood. Haddii dhaawac ama shil uu keenay inuu noqdo bukaan jiif ama bukaan socod, warbixin afka ah ayaa la sameyn doonaa siddeed iyo afartan (48) saacadood gudahood iyo warbixinta qoran waa in la sameeyaa shan (5) maalmood oo shaqo gudahood.
- 3.1.2 FCCP waa inay isla markiiba soo sheegaan dhacdo kasta oo uu ilmaha qaniino xayawaan inta uu joogo FCCCH. Warbixin qoraal ah waa in la loo diraa Qeybta iyo Caafimaadka Dadweynaha Xoolaha ee Gobolka ee jooga Waaxda Caafimaadka ee Vermont afar iyo labaatan (24) saacadood gudahood kadib dhacdada.
- 3.1.3 FCCP waa inay u ogeysiyaan Qeybta si qoraal ahaan ah siddeed iyo afartan (48) saacadood gudahood wixii dab ah ee ka dhaca FCCCH kaas oo u baahda isticmaalka dab-bakhtiye a iyo/ama adeegyada waaxda dabka.
- 3.1.4 ilmo la waayay/maqan/lumay: Marka la ogaado in ilmo dhigta FCCCH uu ka maqan yahay barnaamijka, FCCP iyo/ama shaqaalaha waa inay isla markiiba wargeliyaan booliska, waalidka ilmaha iyo Qeybta. Warbixin qoraal ah waa in loo diraa Qeybta afar iyo labaatan (24) saacadood gudahood.
- 3.1.4.1 Marka ilmo qoran oo la filayo inuu yimaado - barnaamij kale ama qof kale oo aan ahayn waalidka - aanuu iman wakhtigii la qorsheeyay waalidkuna aanay FCCP wargelin maqnaanshaha ilmaha, waalidka ama qofka ammarka loo siiyay ilmuhu waa in loola xiriiro si degdeg ah.

- 3.1.5 Soo sheegida Xadgudubyada: Haddii dhacdo ama xaalad ay ka dhacdo FCCH halkaas oo ay caruurta joogaan waxa loo tixgelin karaa xadgudub halis ah sida ku qeexan xeerka 2.2.44 ee nidaam sharciyeedyadan, waa mas'uuliyada FCCP inay tan usoo sheegto Qeybta afar iyo labaatan (24) saacadood gudahood kadib dhacdada. Warbixin dhameystiran waxa ku jiri doona sharaxaad ku saabsan dhacdadan, waxa ay FCCP sameysay si ay u xaqiijiyaan waxa dhacay, iyo sida ay FCCP u qaaday tallaabo lagu saxayo si loo hubiyo ammaanka iyo fayo-qabka carruurta iyo ka hortaga xad-gudub halis ah mustaqbalka. Haddii warbixin noocan oo kale ah oo ana dib dhicin laga helo FCCP leh taariikh si joogto ah waafaqsan nidaam sharciyeedka, ilmo aanuu si halis ah u dhaawacmin ama aanay soo gaadhin waxyeelo ay sabab u tahay dhacdada ama xaaladu, iyo FCCP ay qaaday tallaabo si dhakhso loogu saxayo dhakhso ah oo haboon; Waxa laga yaabaa in Qeybta si ikhtiyaar ah u doortaan inay sameeyaan digniin, halkii ay ka sameyn lahaayeen xadgudub la xiriira dhacdada ama xaalada.
- 3.1.6 FCCP waxay Qeybta u gudbin doonaan Ogolaanshaha Hubinta Diiwaanka ee cusub hal (1) maalin oo shaqo kadib marka la ogeysiyo qofka, dhameystirtay lagu sameeyay hubinta taariikhda sida ay rabaan xeerarka ku qoran nidaam sharciyeedyadan, inay jireen isbadel xaaladeed taas oo sameeyn karta ansixinta hubinta taariikhdiisa/taariikhdeeda. FCCP waa inay xaqiijiso inuu qofku dhameystiray dhamaan tallaabooyinka loo baahan yahay, sida uu go'aamisay Qeybtu, oo waa inuu waafaqsanaadaa dhamaan sharciyada qaybta 7.2 ee nidaam sharciyeedkan, kuwaas la xiriira isbedelka xaalada qofka.
- 3.1.7 FCCP waxay gudbin doonaan, macluumaadka kku saabsan qofka cusub ee degan FCCH ama qof kasta oo cusub oo jooga inka badan shan (5) goor 365 maalmood inta lagu guda jiro saacadaha ay shaqeeyaan FCCH sida uu u baahan yahay xeerka 7.2.2 ee qaanuun sharciyeedkan.

3.2 Waajibaadka Sharciga ee Ku Saabsan Dayacida iyo Ku Xadgudubka Ilmaha

- 3.2.1 FCCP, shaqaalaha iyo shaqaalaha shuraakadu waa in la wargeliyo iyo waa inay si diyaar ah u heli karaan khadka ku xadgudubka ilmaha ee afar iyo labaatan (24) saac ee ay maamulaan Waaxdu.
- 3.2.2 FCCP, shaqaalaha iyo shaqaalaha shuraakadu ee la shaqeeya carruurta ayaa ah soo waramayaasha loo xilsaaray ku xadgudubka carruurta iyo dayacaada iyadoo la raacayo 33 VSA §4913 iyo waxa looga baahan yahay inay u soo sheegaan Khadka Ku Xadgudubka Ilmaha marka ay si macquul ah uga shakiyaan ku xadgudub ama dayacaad ilmo. Warbixintan waa in la sameeyaa afar iyo labaatan (24) saacadood gudahood marka ugu horeysa ee macluumaadka ku saabsan xad-gudubka ama dayacaada lagu tuhunsan yahay la helay ama la arkay.
- 3.2.3 Waa mas'uuliyada FCCP inay xaqiijiyaan in shaqaalaha iyo shaqaalaha shurkaada ee la shaqeynaya carruurta FCCH fahmaan in xadgudubka iyo/ama dayacaada caruurta ay sharciga kasoo horjeedo iyo in dhamaan shaqaalaha daryeelka caruurta si sharci ah looga baahan yahay inay soo sheegaan xadgudubka ilmo ama dayacid ay tuhmaan sida lagu sheegay 3.2.2 ee nimaam sharciyeedyadan.

3.2.4 Agaasimaha barnaamijka FCCH-da Rukhsada Heysata waa inuu sameeyaa oo hirgeliyaa siyaasada qoraalka ah ee FCCP-da Rukhsada Heysata, uga baahanaysa inay wixii xadgudub ama dayacaad ilmo ee ay tuhmaan u soo sheegaan Waaxda sida lagu sheegay 3.2.2 ee nimaam sharciyeedyadan.

3.2.5 FCCP-da Rukhsada Heysata iyo shaqaalaha waa inay u tobabaran yihiin ka hortagga, aqoonsiga iyo warbixinta waajibka ah ee xadgudubyada carruurta iyo dayacida.

3.2.6 FCCP-da rukhsada heysata iyo shaqaalaha waa inay u tobabaran yihiin ka hortagga xadgudubka galmada ilmaha; ee calaamadaha iyo astaamaha xadgudubka galmada, xadgudubyada galmada, hababka la saaxiibida; ee aqoonsiga khataraha ku xadgudubka galmada ilmaha ee gudaha ama u dhow guriga; iyo dabeecadaha xayawaanimada ah ee kale ee dembiilayaasha galmada.

3.2.7 FCCP-da rukshada heysata waa in aanay ka saarin, hoos u dhigin, wareejin, yareyn mushaharka, faa'iidooyinka ama mudnaanta shaqada, diyaarin qiimaynta waxqabadka shaqada oo taban ama inay qaadaan talaabo kasta oo kale oo dhaawici karta qof kasta, sababtoo ah isaga/iyada wuxuu warbixin niyad wanaag ah u gudbiyay Qeybtay ku saabsan tuhun la xiriira xadgudubka ama dayaca ilmaha.

3.3 Maamulida Barnaamijka iyo Diiwaan-Heynta

3.3.1 FCCP waa inay dhawraan hayaan diiwaanada loo baahan yahay, jadwalka, qalabka iyo qalabka loo isticmaalo in lagaga shaqeeyo ama FCCH hab fiican loogu socodsiiyo iyo goobaha ku haboon helitaanka maalin ilaa maalin.

3.3.2 Dhamaan siyaasada iyo habraacyada qoran waa in dib loo eego hal mar 365 maalmood oo kasta oo wax laga badalo marka loo baahdo.

3.3.3 FCCP waa inay aasaasaan nidaam lagu qorayo imaanshaha, oo ay ku jiraan warqadaha waqtiga marka ilmo kasta yimaado iyo uu tago FCCH. FCCP waa inay keydisaa dhamaan diiwaanada imaanshaha ee muujinaya saacadaha ay carruurta imaadeen ee ugu yaraan laba iyo toban (12) bilood laga bilaabo taariikhda daryeelka la siiyay.

3.3.4 Faylasha Carruurta

3.3.4.1 FCCP waa inay dhawrtaa faylka diiwaanka isqorista ee dhameyskatiran iyo cusboon ee ilmo kasta oo la qoray FCCH. Feylka dhameyskatirani waa inay ku jiraan ugu yaraan kuwan soo socda:

- Foomka oggolaanshaha ilmaha oo dhameystiran oo uu saxeexay taariikheeyayna waalidku taariikhdi ugu horeysay ee ilmaha la keenay FCCH iyo maalmaha iyo saacadaha si joogto loo qorsheeyay in la keeno FCCH;
- Magaca ilmaha, cinwaanka guriga ee hadda iyo lambarka telefoonka guriga ee hadda;
- Taariikhda dhalashada ee ilmaha;
- Magaca, cinwaanka iyo dhamaan lambarada telefoonka lagu dabaqi karo hadda ee waalidiinta;

- Magaca, cinwaanka iyo lambarada telefoonka ee khuseeya ee ugu yaraan laba (2) dad oo kale oo uu waalidku ugu talagalay in laga xiriiro wixii degdeg ah;
- Magacyada dhammaan dadka loo ogol yahay inay ilmaha ka qaadaan FCCH;
- Diiwaanka taariikhda jirka iyo caafimaadka ee sanadlaha ah sida looga baahan yahay xeerka 5.1.2 ee nidaam sharciyeedyadan taas oo ay ku jiraan magacyada iyo telefoonka daryeelka caafimaadka aasaasiga iyo daryeelka ilkaha ee ilmaha (haddii ilmuhu leeyahay bixiyaha daryeelka ilkaha);
- Sharaxaad ku saabsan wixii baahiyaha caafimaad, koritaan, dareen ama waxbarasho oo gaar ah ee ilmaha oo ay ka mid yihiin xasaasiyad, cudurada jira ama dhaawacyo, cuduradii hore ee halistaa ahaa ama dhaawyo iyo wixii daawo ah ee loo qoray oo ay ku jiraan kuwa xaaladaha degdegga ah,
- Ogolaansho qoraal ah oo ka socda waalidka oo FCCP u ogaalanaya inay u helaan daryeel caafimaad oo degdeg ah iyo gaadiid qaadis;
- Diiwaanka tallaalka ilmaha ama dhokumentiga ay Waaxda Caafimaadka ee Vermont ay kaga dhaafeen sida looga baahan yahay xeerarka qaybta 5.1.3 nidaam sharciyeedyadan;
- Ogolaansho qoran oo ka socda waalidiinta oo ogolanaaya in FCCP qaado ilmaha, haddii gaadiid qaadista la bixiyo, sida lagu rabo qaybta 5.1.3 ee nidaam sharciyeedkan.
- Ogolaansho qoran oo ka socda waalidiinta haddii ilmaha uu ka qayb qaadanayo hawlaha dabaasha, haddii hawlaha dabaashu ay kamid yihiin barnaamijka sida lagu sheegay xeerka 5.10.5.1 ee nidaam sharciyeedyadan;
- Haddii ay khuseyso, nuqulka ammarka maxkamadeed ee ku saabsan haynta iyo diyaarinta booqashada sida looga baahan yahay xeerka 3.5.4 ee nidaam sharciyeedkan; iyo
- Haddii ay khuseyso, wixii dhaawac cad ee la helay laguna qoray diiwaanka hubinta caafimaadka ee maalinlaha ah sida looga baahan yahay xeerka 5.3.2 nidaam sharciyeedkan.

3.3.4.2 Feylka ilmo kasta waa inuu dhamaystiran yahay oo ay ku jiraan dhammaan macluumaadka loo baahan yahay toddobaadka ugu horreeya ee uu ilmuhu bilaabo inuu imaado daryeelka. (caafimaadka) jirka sannadlaha ah ee loo baahan yahay waa in la helaa afartan iyo shan (45) maalmood gudahood kadib isqorista sida looga baahan yahay in xeerka 5.1.2 ee nidaam sharciyeedkan.

3.3.4.3 FCCP waa inay xaqiijisaa in dhammaan macluumaadka xiriirka degdegga ah ee waalidiinta uu yahay ka hadda iyo in macluumaadka kale ee ay bixiyeen waalidiintu si joogto ah loo cusbooneysiyo ugu yaraan hal mar 365 maalmood oo kasta.

3.3.4.4 Macluumaadka muhiimka ah ee feylka diiwanagelinta ilmaha waa inay heli karaan shaqaalaha ka mas'uulka ah ilmahaas.

3.3.4.5 Marka ilmuhu uu joojiyo imaanshaha daryeelka, taariikhda ugu dambaysa ee imaanshaha waa in lagu qoraa feylka diiwaangelinta ilmaha. Feylaha diiwaangelinta carruurta waa in la keydiyaa ugu yaraan 365 maalmood ka dib markii maalintii ugu danbeysay ee diiwaan ee imaanshaha ilmaha.

3.3.4.6 Dhamaan cadaymaha la xiriira ilmo gaar ah, ee ay u baahan yihiin xeerarkani, waa in la keydiyo 365 maalmood ka dib maalintii ugu danbeysay ee diiwaan gelinta iyo imaanshaha ee ilmaha. Dhamaan cadaymaha la xiriira ilmo gaar ah, ee ay u baahan yihiin xeerarkani, waa inay heli karaan waalidka/waalidiinta ilmuhu shan (5) maalmood oo shaqo gudahood laga bilaabo wakhtiga codsiga.

3.3.5 Feylasha Shaqaalaha

3.3.5.1 FCCP-da rukhsada heysata waa inay hayaan feylka dhameyskatiran ee cusboon ee shaqaalaha ka shaqeeya FCCH-ta rukshada heysata feyl dhameystiran waa inuu ka koobnaadaa ugu yaraan macluumaadkan soo socda:

- Magaca, taariikhda dhalashada, cinwaanka guriga iyo lambarka telefoonka,
- Nuqulada shahaadooyinka gargaarka degdegga ah iyo CPR ee hadda,
- Bayaanka saxeexan ee cadaynta fahamka shuruuda sharci ee ah inuu soo sheeg xadgudubka ama dayacaada ilmaha ee uu tuhmo;
- Warqadaha foomka Ogolaanshaha Hubinta Diiwaanada;
- Warqadaha akhrinta ama diyaar u ahaanshaha helida nuqulka hadda ee nidaam sharciyeedka hadda lagu dabaqayo ee daryeelka ilmaha;
- Shahaadada tobabarka daawo siinta (haddii ay khuseyso);
- Bayaan saxeexan oo cadaynta darajada shaqada iyo magaca kormeeraha;
- Codsiga shaqada oo ay ku jiraan tixraaca ama tixraacyada hubinta,
- Taariikhda bilowga shaqada;
- Warqadaha Tababarka Hagida ee u dhamaaday;
- Taariikhda dhamaadka shaqada iyo sababta uu uga tagay, haddii ay khuseyso;
- IPDP; iyo
- Dib u eegista waxqabadyada sanadlaha ah oo qoran.

3.3.5.2 FCCP-da rukhsada heysata waa inay hayaan feylasha dhamayskatiran iyo cusboon ee dhamaan shaqaalaha shuraakada ka shaqeeya FCCP-da rukhsada heysata taas oo ay ku jiraan ugu yaraan macluumaadka soo socda:

- Magaca, taariikhda dhalashada, cinwaanka guriga, iyo lambarka telefoonka,
- Bayaanka saxeexan ee cadeynta fahamka shuruuda sharci ee ah inuu soo sheego xadgudubka ama dayacaada ilmaha ee uu tuhmo; iyo
- Sharaxaad ku saabsan kaalintooda ay kaga jiraan barnaamijka.

3.3.6 Diiwaanada Kale ee Maamulka

3.3.6.1 FCCP waa inay heysaa taariikhda daadgureyn kasta oo tijaabo ah sida looga baahan yahay xeerarka qaybta 3.6.2 ee nidaam sharciyeedyadan taas oo ay ku jiraan tirada carruurta, shaqaalaha la daadgureeyay, wakhtigay ku qaadatay daadgureynta, iyo qormada tijaabada la sameeyay markii ay carruurta hurdeen ama ay nasanayeen. diiwaanka Qaxidda waa in la hayaan muddo laba (2) sanno ah.

3.3.6.2 FCCP waa inay heysaa diiwaanada la xiriira shilalka iyo dhaawacyada ay ku lug leeyihiin carruurta sida looga baahan yahay xeerka 5.8.3 nidaam sharciyeedkan. Kuwan waxa lagu hayn karaa feylasha carruurta ama waxa lagu dari buuga diiwaanka dhaawacyada oo kale. Warbixinada dhacdooyinka ee la xiriira

shilalka iyo dhaawacyada waa in la hayaa ugu yaraan afar iyo labaatan (24) bilood laga bilaabo taariikhda ay dhacdadu dhacday.

3.3.6.3 FCCP waa inay heysaa macluumaad ku saabsan dhammaan daawooyinka la siiyay carruurta sida looga baahan yahay xeerka 5.6.8 ee nidaam sharciyeedkan. Kuwaas waxa lagu hayn karaa feylasha carruurta ama buuga diiwanka dawooyinka. Diiwaanka daawada waa in la hayo ugu yaraan 365 maalmood laga bilaabo taariikhda daawada la siiyey.

3.3.6.4 FCCP waa inay qortaa dhamaan sunta cayayaanka la isticmaalay sida looga baahan yahay xeerka 5.10.1.9.1 nidaam sharciyeedyadan. Diiwaanada waa inay kamid yihiin: magaca alaabta suntan cayayaanka, Lambarka Diiwaangelinta EPA, xaddiga la isticmaalay, taariikhaha codsiga, meesha loo isticmaalay iyo cayayaanka loo isticmaalay. Diiwaanadan waa in la hayaa muddo laba (2) sano ka dib taariikhda la isticmaalay cayayaan dilaha iyo waa in loo diyaariyaa kormeerka wakiilka Qeybta iyo waalidiinta.

<p>3.3.6.5 Jadwalka Shaqaalaha: <u>FCCP-da rukhsada heysata</u> waa inay ugu yaraan 365 maalmood hayaan diiwaanka qoraalka ah ee jadwalka ee dhammaan shaqaalaha oo ay ku jiraan maalmaha saxda ah iyo saacadaha la shaqeeyay.</p>
--

3.3.7 Nidaamka Macluumaadka ee Mustaqbalka Dhalaalaya (BFIS)

3.3.7.1 FCCP waa inay bixiyaan warbixino qoran sida looga baahanyay xeerarka qaybta 3.1 ee nidaam sharciyeedyadan, si elektaroonig ah iyadoo la isticmaalayo BFIS.

3.3.7.2 Qeybtu waa inay FCCP siiyaan ogeysiisyada rukhsad siinta, dhokumentiyoy iyo macluumaad si elektaroonig ah iyadoo la isticmaalayo BFIS.

3.3.7.3 Lix (6) bilood gudahood laga bilaabo taariikhda hore ee shaqaaleysiinta, ka FCCP iyo dhamaan shaqaalaha waa inay sii wadaan Akoontka Tayada iyo Aqoonsiga ee BFIS oo cusboon. Cadaymaha, xaqijinta shahaadooyinka, iyo dhamaan hawlaha horumarinta xirfadeed ee sanadlaha ah sida lagu sheegay qaybaha 7.3 xeerarka iyo 7.4 ee nidaam sharciyeedyadan waa in loo gudbiyaa NLCDC si loo xaqiijiyo looguna hayo BFIS.

3.3.7.4 FCCP waa inay macluumaad ku saabsan barnaamijka oo cusboon ku bixisaa akoontka barnaamijka ee BFIS.

3.3.7.5 FCCP waa inay haysaa liiska shaqaalaha hadda, dadka ku nool FCCH, iyo mutadawaaciinta aan waalidka ahayn, sida lagu dabaqi karo BFIS. Wixii isbadel ah waa in lagusoo gudbiyaa BFIS shan maalmood (5) oo shaqo gudahood kadib markuu isbadelka dhaco.

3.4 Diiwaangelinta Aan Takoorka Lahayn

FCCP uma diidi karto ilmo gelitaanka barnaamijka iyadoo ay sabab u tahay jinsiyada, caqiidada, midabka, asalka qaranka, diinta, naafonimada, jinsiga (lab/dhedig) ama xaalada guurka ee waalidka ama ama aqoonsiga jinsiga.

3.5 Sii Deynta Carruurta ee Badbaadada Leh

3.5.1 FCCP iyo shaqaalahu waa inay kaliya ilmaha usii daayaan qof ammar ka heysta waalidka sida lagu sheegay xeerarka 3.3.4.1 iyo 5.10.6.6.1.2 ee nidaam sharciyeedkan. Marka loo ogolaaday inuu qaado ilmaha aanay garanayn FCCP iyo shaqaalahu, isaga/iyada waa in aqoonsigiisa la xaqiijiyo ka hor intaan loosii deyn ilmaha.

3.5.2 FCCP iyo/ama shaqaalaha carruurta guriga geynaya waa inuu carruurta geeyaa cinwaanka au bixiyeen waalidku iyo/ama dadka ay waalidiintu u ogalaadeen sida lagu sheegay xeerka 5.10.6.6.1.1 ee nidaam sharciyeedyadan.

3.5.3 Haddii ay dhacdo in codsi deg deg ah uu waalidka sameeyo oo uu sheegayo inuu ilmaha soo qaado qof aan hore ammar u heysan, FCCP waa inay xaqiijisaa in nidaam lagu xaqiijinayo aqoonsiga qofka loo ogolaaday inuu qaado ilmaha la garanayo oo la adeegsado. FCCP waa in ay xaqiijiso in wicitaanada degdega ah ee sidaas oo kale ah la qoro si loogu daro macluumaadka ku saabsan aqoonsiga qofka qaadi doona ilmaha haddii ay dhacdo xaalad degdeg tan oo kale ahi.

3.5.4 FCCP waa inay u dhiibtaa ilmaha mid kamid ah labada waalid haddii aanuu jirin ammar maxkamadeed ku jirin feylka diiwaan gelinta ilmaha oo mamnuucaya u dhiibida ilmaha mid kamid ah labada waalid.

3.6 U Diyaarsanaanta Xaaladaha Degdega ah

3.6.1 Qorsheynta Xaaladaha Degdega ah

3.6.1.1 FCCP waa inay sameysaa oo ay heysaa Qorshaha Falcelinta Xaaladaha Degdega ah oo qoran si ay uga falceliso xaaladaha degdega ee kala duwan kuwa dabiiciga ah iyo kuwa dadku sameeyaan. Qorshaha dhameyskatirani waa inuu ka koobnaadaa sida FCCP ay wax uga qaban doonto oo ay u maamuli doonto xaaladahan iyo mas'uuliyadahan soo socda:

- Daadgureynta ama xaaladaha kale ee sida ka tagista goobta iyo xaaladaha cakiran,
- Walaacyada gaarka ah ee la xiriira goobta uu barnaamijku ku yaalo, sida u dhawaanshaha xarunta curinta nukliyeerka, meel u nugul daadadka ama dabku ka go'o;
- Wargelinta dawladda hoose xaaladaha degdega ah,
- Nidaam waalidka ogaysiiya xaaladaha degdega ah;
- Wargelinta gudigga qorsheynta xaaladaha degdega ah ee maxaliga ah goobta ay ku taalo FCCP iyo u isticmaalida guddiga isha qorsheynta xaaladaha degdega ah ee barnaamijka;
- Nidaamka aqoonsashada caruurta iyo shaqaalaha jooga wakhtiga xaaladaha degdega ah iyo iyo heynta ogaanshaha halka ay ku sugan yihiin;
- Nidaamka heynta dhallaanka, socod baradka, iyo caruurta baahiyaha gaarka ah leh;

- Goob daadgureyn oo la aasaasay oo lagu kulmo oo masaafad loo socon karo u jirta FCCH;
- Nidaamka lagu xisaabin karo dhamaan carruurta iyo shaqaalaha joogta goobta kullanka daadgureynta;
- Hanaan dib u dejineed haddii loo baahdo oo ay ku jiraan gaadiid qaadis badbaado leh,
- Nidaamka degida hoy haddii FCCP iyo carruurta ay u baahan yihiin inay sii joogaan FCCH muddo dheer, iyo
- Silsilada ammarka ee shaqaalaha iyo doorarka iyo mas'uuliyadaha shaqaalaha shaqsi (haddii ay khuseyso) inta lagu jiro xaaladaha degdegga ah.

3.6.1.2 FCCP waa inay xaqiijisaa in shaqaalaha ay u tobabaran yihiin Qorshaha Falcelinta Xaaladda Degdegga ah iyo meesha FCCH laga helo qorshahaas oo qoraal ah.

3.6.1.3 FCCP waa inay xaqiijisaa in Qorshaha Falcelinta Xaaladda Degdegga ah dib loo eegay oo la cusboonaysiiyay ugu yaraan hal mar 365 maalmood oo kasta.

3.6.1.4 FCCP waa inay xaqiijiyaan in waalidku ay ka warqabaan Qorshaha Falcelinta Xaaladda Degdegga ah, gaar ahaan meelaha carruurta loo qaadi doono haddii laga daadgureeyo FCCH.

3.6.2 Dhisida Daadgureyn

3.6.2.1 FCCP waa inay leedahay sawirka daadgureynta oo qoran kaaso oo leh jidadka daadguraynta kaaso oo lagu dhajiyay guriga ay carruurta isticmaalaan.

3.6.2.2 FCCP waa inay xaqiijisaa in tijaabooyinka daadgureynta la sameeyo ugu yaraan bishii hal mar, iyo in carruurta iyo shaqaalaha la daadgureeyo in ka yar saddex (3) daqiiqo.

3.6.2.3 Waa in la sameeyaa ugu yaraan hal (1) layli 365 maalmood oo kasta marka ay carruurta hurdaan ama nasanayaan.

3.6.3 Tababarka diyaarsanaanta Xaaladaha Degdegga ah: 365 maalmood gudahood marka la furo FCCH, FCCP waa inay dhigtaan tababarka u diyaarsanaanta xaaladaha degdegga ah, taas oo ay ku jiri doonto mawduucyo gaar ahaan la xiriira degida hoy haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah, taas oo FCCP iyo carruurta ay muujiyaan baahida loo baqo joogo in ay sii joogaan FCCH muddo la dheereeyay.

3.7 Qarsoodiga

Shaqaalaha FCCP, iyo shaqaalaha shuraakadu waa in aanay daaha ka qaadin ama aanay ogolaan isticmaalka macluumaad kasta oo ku saabsan ilmo shaqsi ah ama qoys macluumaadkaas oo laga helay dhexgelka ilmaha iyo qoyska iyadoo loo marayo FCCH, ama diiwaanka FCCH, feylasha, fiidiyowga, duubida cajalad, sawirid, qiimaynta ama nooca kasta oo cadayn ah haddii aan si gaar ah loo siin ogolaanshaha waalidka, marka laga reebo in Qeybta ama hay'adaha kale ee leh awooda sharci ee arrimaha la xiriira caafimaadka, ammaanka, iyo ilaalinta carruurta.

3.8 Barnaamijka Qiimeynta ee Sannadlaha ah

FCCP-da FCCP waa inay qiimayn dhamaystiran ku sameysaa barnaamijka taasoo ay ku jirto tallada shaqaalaha iyo waalidiinta ugu yaraan hal mar 365 maalmood oo kasta.

FCCH Qaybta 4 – Hawlgelinta Waalidka/Qoyska ee Daryeelka Carruurtooda

4.1 Booqashada Ka Horeysa Isqorida iyo Jiheynta

4.1.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in waalidka loosoo bandhigo fursado booqasho iyo indho-indheyn oo ay kaga fiirsaneysa omau qoraan ilmahooda.

4.1.2 FCCP waa inay aasaastaa hanaanka u jihataynta carruurta iyo waalidka dhanka FCCH waalidka usoo bandhigta hagid iyo si tartiib ah ugu darida carruurta barnaamijka.

4.2 Booqashada iyo Helitaanka Carruurta

FCCP waa inay xaqiijisaa inay waalidku ay geli karaan FCCH iyo ay heli karaan carruurtooda iyadoo aan dib dhacayn mar kasta oo ay carruurta joogaan iyagoon haysan ogolaansho hore. Tani FCCP kama hor istaagayso inay albaabadooda xirtaan ujeedooyin ammaanka la xiriira awgood ama hubinta aqoonsiga waalidka.

4.3 Shirarka Waalidka

4.3.1 FCCP waa inay soo bandhigtaa shirar rasmi ah iyo kuwo aan rasmi ahayn ugu yaraan laba (2) jeer 365 maalmood oo kasta si ay ugala hadlaan waxbarashada carruurta, koritaanka, iyo isdhexgalka FCCH. Waalidka waxaa la siin doonaa fursad ay ku wadaagaan macluumaadka ku saabsan ilmaha jawigiisa/jawigeeda guriga iyo si oo talooyin uga bixiyaan jawiga FCCH.

4.3.2 Waalidiinta waxay codsan karaan kulan rasmi ah ama aan rasmi ahayn oo ay la yeeshaan FCCP kuna saabsan ilmahooda wakhtigay doonaan iyo codsiyada sidaasa waa in la qaabilo muddo toban (10) maalmood oo shaqo laga bilaabo maalinta codsiga.

4.4 La Xiriirka Waalidka

4.4.1 FCCP waa inay si joogto ah ula xiriiraan waalidka oo ku saabsan hawlaha maalinlaha ah ee ilmahooda iyo dhaqanka; carruurta ka yar afar iyo labaatan (24) bilood jirka waa inay ku jiraan quudinta, xafaayadda u xirida, hurdada, iyo horumarka koriinka.

4.4.2 FCCP waa inay dhiirigelisaa, isla markaasna ay fudaydiso wada-xiriir laba dhinac ah oo ka dhaxeeya FCCH iyo waalidiinta. FCCP waa inay si joogto ah waalidiinta ugala xiriirtaa wax ku saabsan hawlaha FCCH iyo siyaasadaha barnaamijka, khayraadka bulshada iyo waa inay waalidka u ogolaadaan fursado badan oo loogu talagalay inay waalidiinta ku bixiyaan macluumaad, ku aqoonsadaan waxay doorbidayaan, su'aalo ay ku weydiiyaan, iyo ay ku wadaagaan walaacyda.

4.4.3 FCCP waa inay fasax qoran waalid ka heshaa ka hor inta aanay la xiriirin ama aanay sameyn gudbinta xirfadeed. Ogolaanshahan qoran waa in lagu hayaa feylka ilmo kasta.

4.5 Hawlaha Dhiirigelinta Ka Qeybqaadashada Waalidka

FCCP waa inay waalidka siisaa fursado looga qeybqaadashiinayo sida soo bandhigida fursado ay ku mutadawacaan inta lagu guda jiro ama taageeraya FCCH iyo soo bandhigaya waxbarasho iyo/ama hawlaha bulshada ee waalidiinta iyo carruurta.

4.6 Taageerida Naas-Nuujinta

FCCP waa inay hooyooyinka naas-nuujiya ilmahooda siisaa qaabiloodo raax leh saacadaha uu ilmuho joogo FCCH.

4.7 Soo Gudbinta Siyaasadaha iyo Nidaamka FCCH

FCCP waa inay aasaastaa siyaasado iyo nidaamyada qoraal ah. Macluumaadka qoraalka ah waa in la siiyo waalidka dhamaan carruurta ka diiwaangashan FCCH waa inay ku jiraan, ugu yaraan:

- Hubinta in waalidka ay geli karaan FCCH iyo ay arki ilmaha (carruurta) iyaga oo aan ogeysiis hore sameyn iyo inay heli karaan xogta ay carruurta sida looga baahan yahay xeerka 3.3.4.6 ee nidaam sharciyeedyadan;
- Sharaxaada macluumaadka looga baahan yahay waalidiinta ee faylka diiwaangelinta ilmaha sida looga baahan yahay xeerka qaybta 3.3.4.1 ee nidaam sharciyeedyadan;
- Jadwalka maalinlaha ee caadiga ah ee hawlaha;
- Warbixin ku saabsan lacagta iyo siyaasadaha lacagta,
- Warbixin ku saabsan saacadaha ay shaqeeyaan iyo saacadaha ay xidhan yihiin,
- Nidaamyada saxaada ee keenista iyo qaadista carruurta;
- Nidaamyada xaaladaha degdegga ah sida looga baahan yahay xeerarka qaybta 3.6 ee nidaam sharciyeedyadan;
- Warbixin ku saabsan nafaqada, cuntada iyo cunto diyaarinta FCCH ah;
- Siyaasadaha hurdada ammaanka ah, sida lagu dabaqi karo;
- Siyaasada mamnuucida sigaarka;
- Warbixin ku saabsan natijada tijaabada ledh-ta ku jirta biyaha la cabo iyo qorshe kasta oo dib u celineed;
- Siyaasadaha FCCH ee safarada, hawlaha kale ee ka baxsan goobta iyo gaadiidka,
- Siyaasadaha caafimaadka FCCH oo ay ku jiraan ka reebida xanuunka, daawo siinta, iyo tallaalada;
- Siyaasadaha iyo dhaqanka FCCH ee ku saabsan hagida iyo maamulida akhlaaqda wanaagsan;
- Hubinta in sirta macluumaadka qoyska iyo ilmaha la hayo;
- Macluumaad ku saabsan shuruuda inla soo sheego ku xudgudubka ilmaha iyo/ama dayacida ee lagu tuhunsan yahay sida looga baahan yahay xeerarka qaybta 3.2 ee nidaam sharciyeedkan;
- Hubinta takoorid la'aanta iyo ixtiraamka dhaqanka qoyska ilmo walba la hayo;

- Habka FCCH ee hubinta koritaanka guud iyo waayo-aragnimada koboca wanaagsan ee carruurta diiwaangashan;
- Siyaasadaha FCCH ee la xiriira kudarista carruurta leh baahida gaarka ah iyo naafada ah;
- Sharaxaada hawlaha diinta, haddii ay jiraan;
- Macluumaad ku saabsan sida interneetka looga helo nidaam sharciyeedyada FCCH iyo macluumaad kale oo ku saabsan horumarka ilmaha;
- Macluumaadka ku saabsan nidaamayada cabashada;
- Warbixin ku saabsan Laynka Macmiisha Daryeelka Carruurta, oo ay ku jiraan lambarka telefoonka (1-800-649-2642); iyo
- Siyaasadaha iyo nidaamyada FCCH ee la xidhiidha ceyrinta/eryida carruurta.

FCCH Qaybta 5 - Caafimaadka, Ammaanka iyo Nafaqada

5.1 Kor u Qaadida Caafimadka iyo illaalinta Carruurta

5.1.1 FCCP waa in ay xaqiijisaa in jawiga FCCH iyo dhaqanadu ay taageeraan yihiin ammaanka iyo caafimaadka carruurta.

5.1.2 Baaritaanada Caafimaadka Guud:

Shan iyo afartan (45) maalmood gudahood kadib isqorista FCCP waa inay waalidka ka heshaa warqadaha cadaynta da' da ku habboon imtixaanka daryeelka fiican. Warqadaha waxaa ka mid ah wixii warbixin ku saabsan xaaladda caafimaad iyo dawooyinka laga yaabaa in saameeyaan daryeelka ilmaha.

5.1.3 Tallaalada:

FCCP waa inay feylka ku haysaa waraaqaha xaalada tallaalka hadda ee ilmo kasta.

- Diiwaanka tallaalka waa inuu kamid noqdaa tallalada la siiyo iyo taariikhda tallaalka kasta. diiwaanka tallaalka waa in la cusboonaysiiyaa marka tallaalo kasta oo dheeraad ah la helay.
- Haddii ilmo qoran uu ku jirii hanaanka u hogaansanaanta shuruudaha tallaalka ee waafaqsan jadwalka tallaalada lagu taliyay ee Vermont lagu taliyey, warqadaha faylka ilmaha waa inay ku jiraan foomka Waaxda Caafimaadka Vermont ee loo baahan yahay.
- Haddii ilmo aanuu helin tallaalada loo baahan yahay iyada oo ay sabab u tahay ka dhaafitaan la ogolyay, warqadaha faylka ilmaha waa inay ku jiraan foomka Waaxda Caafimaadka Vermont ee loo baahan yahay.

5.1.4 FCCP waa inay Warbixinta Tallaalka Daryeelka Carruurta ee Vermont ugu yaraan hal mar 365 maalmood oo kasta u gudbisaa Waaxda Caafimaadka Vermont, Xafiiska Tallaalka sida looga baahanyay 18 VSA §§ 1120 - 1129.

5.2 Dhaqanada Caafimaadka ee Joogtada ah

5.2.1 Gacmo-dhaqashada

5.2.1.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in dadka waaweyn iyo caruurta ay gacmahooda dhaqaan:

- Marka ay yimaadaan FCCH;
- Ka hor inta ay cunin, diyaarin ama aanay taaban cunto;
- Ka hor iyo ka dib taabashada hilib cayriin,
- Ka hor carruur quudinta;
- Ka dib markii musqusha la geeyo (carruurta) ama xafaayadda laga badalo,
- Ka dib nadiifinta;
- Ka dib qaadida qashinka,
- Ka dib taabashada xayawaan; iyo
- Ka dib ciyaarta dibadda.

5.2.1.2 FCCP inay sidoo kale xaqiijiyaan in dadka waaweyn ay sidoo kale dhaqaan farahooda:

- Ka hor iyo ka dib daawo siinta,
- Ka hor iyo ka dib daryeelida ilmaha dhaawacma ama xanuunsanaya,
- Ka hor xafaayadd u xidhida, iyo
- Ka dib taabashada dhiig, saxaro, kaadi, mataga, dheecaanka sanko ama dheecaannada kale ee jidhka.

5.2.1.3 FCCP waa inay hubiso u nidaamka gacmo-dhaqashada ay kamid yihiin tallaabooyinka soo socda sida ay isugu xigaan:

- Istimaal ka biyo socda oo diiran iyo saabuun dareere ah,
- Ku qoynta gacmaha biyo, isticmaalaya saabuun, oo ku dhaqaya gacmaha ugu yaraan labaatan (20) ilbidhiqsi,
- Ku mayrida gacmaha biyo socda,
- Qalajinta gacmaha shukumaan ama shukumaan waraaq ah oo hal mar la isticmaalayo; ka dibna
- Tuuraya shukumaanka.

5.2.1.4 Markii gacmo-dhaqistu aan la sameyn Karin iyadoo ay sabab u tahay dibad joogida ama ka maqnaanshaha goobta, gacmahuna aanay ciid lahayn, waxa laga yaabaa inay gacmo nadiifiye isticmaalaan FCCP, shaqaalaha, dadka kale ee waaweyn, iyo carruurta halkii ay ka isticmaali lahaayeen saabuun iyo biyo diiran. Shaqaalaha waa inay xaqiijiyaan in carruurta isticmaasha gacan nadiifiye ay isku xoqaan gacmahooda ilaa nadiifiyuhu uu qalalayo. Kaliya nadiifiyaha gacanta ee aan alkoole ka sameysnayn ayay isticmaali karaan carruurta ka yar afar iyo labaatan (24) bilood jirku.

5.2.1.5 Saxanka loo isticmaalo gacmo-dhaqashada waa inuu leeyahay biyo kulul iyo qabow socda oo ka timaada hal qasaba. Biyaha kulul waa in aanay ka badnaan 120 ° F.

5.2.1.6 Saabuunta iyo waraaqaha lagu tirtirto ama shukumaanka hal mar la isticmaali karo waa inay carruurta ka heli karaan saxanka gacanta lagu dhaqo.

5.2.1.7 Haddii saxanka gacanta lagu dhaqo aanay ahayn dhererka carruurta, waa in la heli karaa jaraanjaro.

- 5.2.1.8 FCCP iyo/ama shaqaalahu waa inay dhaqaan gacmaha carruurta aan awoodin inay dhaqaan gacmahooda oo ay siiyaan hagd iyo kormeer ku haboon koboca si ay uga caawiyaan carruurta inay bartaan oo ku dhaqmaan gacan-dhaqista caafimaadka leh.
- 5.2.2 Dharka carruurta
- 5.2.2.1 FCCP waa inay xaqiijiso in dhar dheeraad ah ay heli karaan carruurta iyagoo si toos ah u siinaya tiro ku filan ama waalidka uga baahanaya inay keenaan una hayaan dhar nadiif ah ilmo walba.
- 5.2.2.2 FCCP waa inay xaqiijiyaan in dharka carruurta laga badelo marka ay qoyaan ama wasakhoobaan.
- 5.2.2.3 Dharka qoyan ama wasakhoobay waa in lagu ridaa weel weel ama bac caag ah oo afka laga xidhay laguna qoray magaca ilmaha waana in loo dhiibaa waalidka ilmaha dhamaadka maalinta. FCCP waxay dooran kartaa inay dharka qoyan ama wasakheysan ku dhaqaan isla goobta.
- 5.2.2.4 Qalabka shakhsiga ee carruurta, oo ay ku jiraan shanlooyinka iyo burushyada, waa inaan lala wadaagin carruurta kale iyo waa in si gooni gooni ah loogu keydiyaa alaabta gaarka ah ee ilmaha kasta.
- 5.2.3 Xafaayadd u Gelinta
- 5.2.3.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in xafaayadda carruurta laga badalo marka ay qoyan ama wasakhoobaan.
- 5.2.3.2 FCCP waa inay leedahay nidaamka hubinta xafaayadda oo joogto ah oo ay ku jiraan baarista eegida xafaayadda carruurta ugu yaraan laba (2) saacadood ee kasta.
- 5.2.3.3 FCCP waa inay la socotaa sahayda xafaayaddaha ee ilmo kasta oo ay hubisaa in ay si joogto loo buuxiyay.
- 5.2.3.4 FCCP waa inay xaqiijiso inay jirto meel si fiican u dhisan oo loogu talagalay labiska xafaayadda oo dusheedu nadiif tahay, la dhaqi karo iyo leh dul wax nuugi karta. Aagga xafaayadda waa in aan loo badalin jikada ama meel kasta oo cuntada lagu kaydiyo, lagu diyaariyo ama lagu qeybiyo.
- 5.2.3.5 Haddii saxanka gacan-dhaqidaha ee loo isticmaalo musqusha iyo xafaayadda u gelinta sidoo kalena loo isticmaalo cunto diyaarinta, qasabada biyaha iyo saxanka waa in la nadiifiyaa ka hor inta aan loo isticmaalin cunto diyaarinta.
- 5.2.3.6 FCCP waa inay xaqiijisaa in xafaayadaha la tuuro lagu rido bac ama weel aan liijin taas oo la dhaqi karo lehna dabool adag oo ku haboon.
- 5.2.3.7 Weelka loo isticmaalo xafaayadaha waa in la dhigaa meel carruurta ka fog.

5.2.3.8 Weelka lagu rido xafaayadaha waa in la madhiyaa, la nadiifiyaa iyo jeermiskana laga dilaa maalin kasta.

5.2.3.9 Haddii xafaayaddaha dharka la isticmaalo, FCCP waa inay xaqiijisaa in xafaayadda qoyan ama wasakheysan lagu rido bac balaastig ah ama weel kali ah oo la afka laga xidhi karo lagana illaaliyo inay carruurta helaan.

5.2.3.10 Xafaayadda dharka ah waa in si joogta ah guriga loogu diraa marka ilmaha la dirayo maalin walba. FCCP waxay dooran kartaa inay maalin kasta dhaqaan xafaayaddaha dharka ah.

5.2.3.11 Nidaamka xafaayad ka badalis kasta waa inay kamid yihiin:

- Diyaarinta: isku ururinta sahayda, xubinta shaqaalaha ah ayaa gacanmaha dhaqaya, diyaarinaya dusha lagaga badalayo ee la tuuri karo ama hubinaya in dhawaan dusha la dhaqay oo jeermiska laga dilay kadib wuxuu ilmaha iyo xafaayadda keenaya goobta.
- Wajiga Wasakhda: ka saar xafaayadda wasakheysan ilmaha oo nadiifi aaga xafaayadda ilmaha.
- Wajiga Nadiifinta: u xidh xafaayadda nadiifta ah, u labis ilmaha, iyo dhaq gacmaha ilmaha.
- Nadiifi: nadiif oo jeermiska ka dil dusha xafaayada badalista, tuur xafaayadda, kadib xubinta ka tirsan shaqaalaha waa inuu dhaqaa gacmahiisa.
- Diiwaanka ku qor ka badalista xafaayada.

5.2.3.12 FCCP waa inay leedahay nidaam xafaayad ka badalid oo qoran taas oo ay heli karaan shaqaalahu.

5.2.3.13 FCCP-da rukhsada heysataa waa inay hanaanka ka badelida xafaayada ku dhajiyaan aaga ka badalista xafaayad kasta.

5.2.3.14 Marka lagu daro gacmo-dhaqashada, waa in la xidhaa gacmo gashi aanuu qoyaanku ka dhex bixi karin oo la tuuri karo marka lagu guda jiro xafaayad ka badalista marka:

- Qofka shaqaalaha ahi uu leeyahay meel jaran, xanuunaysa ama maqaar dilaacsan,
- Ilmaha uu ku leeyahay meel jaran ama xanuunaysa maqaarkiisa/maqaarkeeda; ama
- Ilmaha uu leeyahay caabuuq la og yahay uu ku faafaa saxarada.

5.2.4 Musqul Gelida iyo Barashada/Tobabarka Musqusha

5.2.4.1 Carruurta waa in loo qaabilaa hab aan dib dhicin marka ay u baahan yihiin in ay isticmaalaan musqusha.

5.2.4.2 FCCP iyo shaqaalahu waa inay bixiyaan hagida wanaagsan ee musqul galida ammaanka iyo nadiifta ah. Carruurta waa in laga taageero horumarinta xirfadaha musqul gelida ee ku habboon da'dooda iyo kartidooda.

5.2.4.3 FCCP waa inay xaqiijisaa in dhamaan barashada/tobabarka la sameeyo ogolaanshaha iyo ogaanshaha. Hababka tobabarka musqusha waa inay waafaqsan yihiin

hababka tababarka musqusha ee waalidka marka ay kuwani koritaan ahaan ku haboon yihiin ee aanay xadgudub ku ahayn nidaam sharciyeedyadan. Horumarka ilmaha iyo guusha musqul gelida waa in si joogto ah loo gaadhsiiyo waalidka/waalidiinta ilmaha.

5.2.4.4 Qalabka ammaanka ah iyo la nadiifin karo ee barashada/tababarka musqusha sida musqulaha xajmiga ilmaha ah, qalabka tallaabada, kuraasta musqusha ilmaha oo wax laga badalay ama wax la geliyay si ay si toos u leekaadaan dusha musqusha waa in la siiyaa carruuta baranaya sida loo isticmaalo musqusha.

5.2.5 Dhaqanada Caadiga ah ee Gaadhista Dheecaannada Jidhka

Shaqaalahu waa inay isticmaalaan tallaabooyinla taxadarka ee caadiga ah marka ay gaadhaan dhiig ama dheecaanada jidhka ee dhiiga ka kooban. Taxadarka caadiga ah waxaa ka mid ah:

- Isticmaalka gacmo gashi la tuuri karo oo aanuu ka dhex bixi karin dareere si loo nadiifiyo dhiiga ama dheecaanka haddii aanu qalabka loo isticmaalayo in lagu nadiifiyo ay si fudud ugu jiri karo dheecaan,
- Nadiifi oo jeermiska ka dil dusha wasakheysan,
- Tuur qalabka wasakhaysan oo ku keydi alaabta la dhaqi karo baco si ammaan leh oo xidhay, iyo
- U dhaq gacmaha si fiican sida looga baahan yahay xeerka 5.2.1.3 nidaam sharciyeedkan.

5.2.6 Nadiifinta, Fayo-dhawrka iyo Jeermis dilista (fiiri qaybta 2.2 ee nidaam sharciyeedkan, si aad u aragto qeexida ereyadan)

5.2.6.1 Nadiifinta waa inay dhacdaa kahor faya-dhawrka iyo jeermis dillista haddii aanu soo saaruhu si kale ku tallin.

5.2.6.2 Dhamaan waxyaabaha loo adeegsanayo fayodhawrka iyo jeermis dillista waa inay yihiin kuwo ka diiwangashan EPA oo loo isticmaalo si waafaqsan tilmaamaha soo saaraha.

5.2.6.3 Jaafeerka guriga ayaa loo isticmaali karaa fayodhawrka iyo jeermis dillista labadaba nadiifiyo labadaba. Marka jaafeer loo isticmaalayo ujeedooyinkan, jaafeer cusub waa in la qasaa maalin kasta.

5.2.6.4 Nadiifinta waxyaabahan soo socda waa in la sameeyaa iyadoo la raacayo jadwalkan soo socda:

Ka dib isticmaal kasta:

- Alaabta carruurta ku ciyaarto ee balaastiga ka sameysan;
- Miisas badalida dharka, iyo
- Sarriirta carruurta, xoolka, salliga, iyo go'a, haddii ay isticmaalaan carruur kala duwani.

Marka ay taabato dul kale:

- Mujuruca

Todobaad kasta:

- Sarriirta carruurta, xoolka, salliga, iyo go'a, haddii ay isticmaalaan carruur kala duwani.

Bil kasta:

- Alaabta ay carruurto ku ciyaarto ee mishiinka ah ee lagu dhaqi karo;
- Dharka la xidho oo ay ku jiraan koofiyadahu,
- Xarumaha hawlaha ciyaarta; iyo
- Qaboojiyaha.

5.2.6.5 Faya-dhawrka waxyaabahan soo socda waa in la sameeyaa iyadoo la raacayo jadwalka soo socda:

Ka hor iyo ka dib isticmaal kasta:

- Dulaha cuntada lagu diyaariyo, iyo
- Miisaska cuntada iyo miisaska cuntada ee carruurta

Ka dib isticmaal kasta:

- Maacuunta iyo suxuunta wax lagu cuno

Dhamaadka maalin kasta:

- Qalabka cuntada lagu diyaariyo,
- Qalabka carruurto ku ciyaarto ee balaastiga ka sameysan; iyo
- Mujurucyada.

5.2.6.6 Waxyaabaha soo socda waa in jeemiska laga dilaa dhamaadka maalin kasta:

- Gacanta albaabada;
- Saxanada gacanta lagu dhaqo iyo qasabadaha,
- Miisaska kijinka;
- Musqulaha iyo qalabka barashada musqusha;
- Meelaha xafaayada la tuuray lagu rido; iyo
- Qasabadaha biyaha laga cabo.

5.3 Maareynta Cudurada Faafa

5.3.1 FCCP waa inay sameysaa oo ay hirgalisaa qorshe lagu maareeyo cudurka faafa ee FCCH oo ay ka mid yihiin kuwa soo socda:

- Magacaabida iyo garashada calaamadaha cudurrada taas oo sababi doonta in ilmaha laga saaro ama guriga loo diro;
- Aqoonsashada cudurada faafa taas oo sababi doonta in ilmaha aan loo ogalaan doono inuu imaado FCCH iyadoon bayaan qoran laga heysan bixiyaha daryeelka; iyo
- Ogeysiis qoraal ah oo loo diro waalidka marka laga yaabo in caruurta loo soo bandhigay cudur faafa oo la sheegi karo.

5.3.2 Hubinta Caafimaadka ee Maalinlaha ah

Marka ay yimaadaan, shaqaalaha FCCH waa inay ilmaha ka baadhaan calaamadaha cudurada faafa iyo calaamado dhaawac. Wixii dhaawacyo ah ee cad waa in la qoraaa iyadoo ay la socdaan wixii faallo ay waalidku bixiyaan ee ku saabsan xaalada ilmaha. Waraaqdan waa in lagu hayaa feylka ilmaha ugu yaraan 365 maalmood.

5.3.3 Ka Saarida Carruurta Daryeelka

5.3.3.1 FCCP waa inay raacdaa siyaasadaha ka saarid sida ku xusan Shaxda Astaamaha iyo Calaamadaha Xanuunka (fiiri Lifaaqa A).

5.3.3.2 Dhokumentiga Shaxada Calaamadaha iyo Astaamaha Xanuunka waa inay heli karaan shaqaalaha iyo waalidiinta si ay u akhriyaan.

5.3.3.3 Ilmo waxa laga saari karaa daryeelka haddii, ra'yiga FCCP ah uu isaga/iyada aad u xanuunsanayo si uu uga qayb qaato hawlaha maalinlaha ah ee caadiga ah.

5.3.4 Wax Ka Qabashada Carruurta Noqda Ill

5.3.4.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in meel bannaan oo raaxo leh oo ka gaar ah carruurta kale loo abuurri karo carruurta muujinaya astaamo xanuun ilaa iyo Inta uu waalidkood soo gaarayo si uu u qaado. Meesha gaarka ah waa inay si haboon u qalabeysan tahay si ay ilmaha ugu ogalaato inuu seexo ama nasto, waa in aanay noqon kijinka ama aaga musqusha.

5.3.4.2 Dhammaan waxyaabaha uu isticmaalay ilmaha xanuunsanayaa waa in la nadiifiyaa oo jeermiska laga dilaa kahor intaanuu isticmaalin ilmo kale.

5.3.4.3 Shaqaalahu waa inay hubiyaan in ilmaha xanuunsanaya la kormeero.

5.4 **Qaabilaadaha Hurdada iyo Nasashada**

5.4.1 Qodobada Guud ee Hurdada iyo Nasashada oo ay ku jiraan Shuruudaha Sariirta Carruurta

5.4.1.1 FCCP waa inay xaqiijiyaan in ilmo kasta, marka laga reebo carruurta da'da dugsiga ah, uu leeyahay sariirta carruurta oo gaar ah, xool, sariir la qaadi karo, salli, ama sariir ammaan u ah da'da ilmaha iyo horumarka, dayactir wanaagsan leh, uuna maalintiiba isticmaalo hal ilmo. ilmaha waa inaanuu seexan dhulka ama qalab aan loogu talogalin in lagu seexo. Sariiraha carruurta ama xoolalka waa inuu loo isticmaalaa carruurta ka yar da'da laba iyo toban (12) bilood. Carruurta waa in aanay seexan sariiraha carruurta ama xoolalaka haddii ay jir ahaan awoodaan inay kasoo dhacaan iyagoon aanay cidi caawinin.

5.4.1.2 FCCP waa inay xaqiijisaa in dhammaan sariiraha carruurta iyo xoolalka loo isticmaalo carruurta ee FCCP ay la kulmeen Guddiga Badbaadada Alaabta 16 CFR qaybta 1220 (fiiri Lifaaqa B). FCCP waa inay haysaa waraaqda in sariir caruureed kasta ay waafaqsantay waajibaadkan.

5.4.1.3 FCCP waa in ay xaqiijiso in sariir caruureed kasta oo aan la kulmin 16 CFR § 1220 laga saaro meelaha guriga halkaas oo carruurta lagu daryeelo.

5.4.1.4 Sariirta la qaadi karo, salliyada, iyo furaashayadu waa inay noqdaan kuwo aanuu dareeruhu ka dhex bixi karin ama leh gal aanuu dareeruhu ka dhex bixi karin. Ilmo kasta waa in la siiyaa go' nadiif ah oo u gaar ah isaga/iyada, iyadoo ay bixinayso FCCP

ama looga baahanayo waalidku inay bixiyaan. ilmaana waa inaanuu seexan meel ay dareerayaashu ka dhex bixi karaan.

- 5.4.1.5 Carruurta waa inay kormeeraan FCCP iyo/ama shaqaalahu marka ay hurdaan ama ay nasanayaan, FCCP iyo/ama shaqaaluhu waa inay si toos u indho-indheeyaan ilmo hurda ugu yaraan (15) daqiiqo oo kasta si loo hubiyo wajiga ilmaha, loo eego midabka maqaarka ilmaha, iyo loo hubiyo neefsashada ilmaha.
- 5.4.1.6 Laydh suurogalinaya in la sameeyo kormeerka ku haboon waa in la galiyaa meelaha la seexdo halka ay carruurta hurdaan ama ku nasanayaan. Taas macnaheedu waa in FCCP iyo/ama shaqaalahu ay arki karaan wajiga ilmaha, u aragto midabka maqaarka ilmaha, iyo ay u hubiyaan neefsashada ilmaha.
- 5.4.1.7 Sariiraha la qaado, sariiraha carruurta, sallyada iyo gogosha qoyan waa in si dhakhso ah loo badalaa oo lagu lagu kaydiyaa bac balaastig ah oo la xidhay ama weel ilaa iyo inta la dhaqayo.
- 5.4.1.8 Gogosha uu isticmaalo ilmo waa in lagu kaydiyaa hab ka hortagaysa inay istaabtaan gogol ay isticmaaleen carruurta kale.
- 5.4.2 Dhaqanada Hurdada Ammaanka ah ee Dhallaanka ka yar toban (12) bilood jir
 - 5.4.2.1 Dhallaanka waa in loo ogoolaadaa inay seexdaan markay daalaan.
 - 5.4.2.2 Dhallaanka waa in mar walba loo jiiifiyaa dhabarkooda si ay u seexdaan.
 - 5.4.2.3 FCCP iyo shaqaalahu waa inay hubiyaan in dhallaanku ay ku seexdaan sariiraha carruurta ama xoolasha. Ilmaha waa in aan si ay u seexdaan la jiiifin meelaha jilicsan sida fadhiga, birkimada, kubeertada, hargaha idaha ama bustayaasha. Ilmaha waa in aan la dhigin kuraasta baabuurta, leexooyinka, kuraasta dhaadheer, kuraasta booda ama qalab la mid ah si ay u seexdaan. Ilmaha ku seexda qalabka noocan ah waa in si tartiib ah loo wareejiyay sariirta carruurta ama xoolka sida ugu dhakhsaha badan ee macquulka ah.
 - 5.4.2.4 Sariir caruureed iyo xool kastaa waa inuu leeyahay furaash si fiican ugu dhegan oo lagu daboolay go' si fiican u leeg.
 - 5.4.2.5 Walxaha jilicsan, alaabta carruurta ay ku ciyaarto ama gogosha dabacsan waa inaan loo isticmaalin goobaha ay seexdaan dhallaanku. gogosha jilicsan ama dabacsan waxaa ka mid ah: buushashka, barkimooyinka, kubeertada, durxada, hargaha idaha, bustayaasha, go'yaasha guri, xafaayaddaha dharka, iyo dharka uu ilmuhu wax ku cuno. Ilmaha waa inaan la duuduubin si uu u seexdo..
 - 5.4.2.6 Kiishashka dharka ka sameysan ama dhar kale oo la mid ah oo loogu talagalay hurdo ammaan ah ayaa la isticmaali karaa. Dharka ay carruurta wax ku cunaan, silsiladaha qoorta, iyo dharka leh xadhko ama funaanadaha waa in ilmaha laga bixiyaa kahor intaan ilmaha la jiiifin sariirta carruurta ama xoolka.

- 5.4.2.7 Waa in aan la isticmaalin qalabka qaabeynta haddii bixiyaha daryeelka caafimaadka ee ilmaha uu u baahanyay mooyee. Tilmaamaha isticmaalka qalabkas waa in lagu hayaa feylka ilmaha iyadoo ah qoraal ka yimid bixiyaha daryeelka caafimaadka ee ilmaha.
- 5.4.2.8 Dhallaanka waa in aan la dhigin sariiraha carruurta ama xoolasha leh quruurado. Mujurucyada waa la ogolyay inay ku dhex jiraan sariiraha carruurta iyo xoolasha marka la helo fasax waalid. Waxa laga yaabaa in mujurucyada aanay yeelan xadhigyo ama biinan khatar cuno qabasho u keeni kara.
- 5.4.3 Dhaqanada Nasashada ee Carruurta ka Weyn Laba iyo Toban (12) bilood jir
- 5.4.3.1 FCCP waa inay nashaqadeysaa jadwalka FCCH si loo xaqiijiyo in ilmo kasta oo ka yar da'da dugsigaa ee jooga muddo shan (5) saacadood ama in ka badan uu helo fursadaha hurdada ama nasashada. Carruurta ka weyn laba iyo toban (12) bilood jirku waxay ku seexan/nasan karaan bustayaal, barkimooyin iyo qalabka carruurta ku ciyaarto ee jilicsan.
- 5.4.3.2 Carruurta waa inaan looga baahan inay seexdaan. Carruurta aan seexan waa in la siiyaa meel iyo qalab ay xasiloon ugu ciyaaraan.

5.5 Caafimaadka Afka

- 5.5.1 Haddii carruurta ilkhooda ku nadiifiyaan (cadaydaan) FCCH, ilmo kastaa waa inuu leeyahay burush u gaar oo uu isticmaalo kaliya ilmahaasi.
- 5.5.2 Burushyada (caday-yada) lagu waa in loo keydiyaa hab ogolaanayso inay hawadu qalajiso iyo ka hortagaysa in burushku taabto walxaha kale sida burushyada, shukumaanada ama koobabka cabitaanka.

5.6 Daawo Siinta

- 5.6.1 FCCP waa inay sameysaa si joogto ahna u hirgelisaa siyaasad iyo qorshe qoran oo la xidhiidha daawo siinta carruurta.
- 5.6.2 FCCP waa inay xaqiijisaa in shaqaale dhameeyay koorsada tobabarku, oo ay ansixiyeen Qeybtu uu daawada ka bixiyo FCCH.
- 5.6.3 FCCP waa inay xaqiijisaa in daawo ama daawo dhireed/daawada guriga la siin ilmaha haddii aanay FCCH ogolaansho qoraal ah ka helin waalidka ilmaha daawo kasta oo la siiyey.
- 5.6.4 FCCP waa inay xaqiijiso in waalidka la ogeysiiyo haddii badelka aan loo ansixin inuu dawo siiyo.
- 5.6.5 FCCP waa inay xaqiijisaa in ogolaanshaha qoraalka ah ee waalidka ee daawo siinta ay ku jiraan dhamaan macluumaadkan soo socda ee daawo qoritaan kasta iyo daawooyinka aan la qorin ee la siiyo carruurta:
- Magaca ilmaha;

- Taariikhda dhalashada ilmaha;
 - Wax daawo ah oo uu ka xasaasiyoodo;
 - Magaca daawada;
 - Xadiga daawada la siinayo;
 - Xilliga daawada la siinayo;
 - Marinka daawada laga siinayo (afka, dhagaha, sanko, neef ahaan loo qaadanayo);
 - Sababta daaweynta;
 - Xilliyada bilowga iyo dhamaadka daaweynta; iyo
 - Wixii tilmaamo gaar ah la farayo.
- 5.6.6 FCCP waa inay hubisaa in dhamaan daawooyinka loo qoray ay ku jiraan kartooneedii asalka ahaa, si haboon loogu suntay ilmaha, iyo in la siinayo ka hor taariikhda daawadu dhacayso ee ku qoran kartooneka dushiisa.
- 5.6.7 FCCP waa inay xaqiijisaa in dhamaan wixii aan ahayn daawada loo qoray lagu calaamadiyay magaca ilmaha iyo inay ku jirto kartooneedii asalka ahaa, kuna dhigan tahay sida loo isticmaalayo. Waa in la isticmaalo ka hor taariikhda ay daawadu dhacayso ee ku qoran kartooneka korkiisa. Wixii ka duwan tilmaamaha isticmaalka daawada ee kartooneka korkiisa ku qoran waa inuu daryeel bixiyaha ilmahu qoraal ahaan ku sheegaa.
- 5.6.8 FCCP waa inay xaqiijisaa in uu jiro warbixin tilmaamaysa dhamaan daaweynta oo ku jirto xadiga daawada la siiyay, wakhtiga la daaweeyay, magaca shaqaalaha fuliyay iyo wixii dhib uu arkay. Warbixintaas waa in la hayaa muddo 365 maalmood ah oo ka bilaabmaysa taariikhda daaweynta la bilaabay, iyo in warbixintaas lagu kaydin karo feylka ilmaha ama buuga maamulka daawo siinta.
- 5.6.9 FCCP waa inay xaqiijisaa in daawada aan la isticmaalin loo celiyay waalidka marka aanuu ilmuhu wax baahi ah oo dambe u qabin.
- 5.6.10 Waxyaabaha cayayaanka erya, cadceeda celiya iyo dhiiqooyinka xafaayadaha looma tixgelinayo daawo ahaan. FCCP waa inay xaqiijisaa in ogolaansho qoraal ah laga helay waalidka ka hor intii aan la isticmaalin dulindilaha, cadceed celiyaha iyo dhiiqooyinka xafaayadaha. Ogolaanshaha waalidka waa inay ku cadahay nooca agabka laakiin waa suuragal in ay u ogolaadaan isticmaalka hadba sida baahidu tahay in muddo ah. Ogolaanshaha waa in la cusboonaysiiyaa ugu yaraan hal mar 365 maalmood ee kasta iyo waa in lagu hayo ogolaanshaha ilma kasta feylkiisa. Carruurta aan gaadhin da'ada dugsiga looma marinayo waxyaabahaas si madaxbanaan haba yaraatee. Caruurta gaadhay da'ada dugsiga si madaxbanaan ayay isu marin karaan iyadoo lagu kormeerayo.
- 5.6.11 FCCP waa inay hubisaa in dhamaan daawooyinka iyo kuwa aan daawada ahayn ee lagu sharaxay qodobka 5.6.10 ee nidaam sharciyeedkan in si taxadir leh loo kaydiyo iyo in aan caruurta gaadhi karin.

- 5.6.12 Daawooyinka la xidhiidha samata-bixinta, sida samata-bixinta neefsashada, epinephrine (epi) pen, iyo daawooyinka xanuunada ku soo boodada ah, waa in la dhigaa goob si sahlan loo gaadhi karo si loogu isticmaalo marka xaalad degdeg ahi timaado.

5.7 **Agabka Gargaarka Degdega ah**

5.7.1 FCCP waa inay yeelataa agabka gargaarka degdega ah oo lagu diyaarinayo goob ay si sahlan uga heli karaan waayeelka FCCH, laakiin carruurta aanay gaadhi karin. Agabka gargaarka degdega ahi wuxuu ka kooban yahay waxyaabahan:

- Hagaha gargaarka degdega ah;
- Shorooto xabag leh;
- Baandhayjo;
- Goosyo la jeermis tiray;
- Duubab goosy ah;
- Dhaymaha indhaha;
- Gacma-galayaal hal mar la isticmaalo oo aan dareeruhu ka dhex bixi karin;
- Maqasyo;
- Qabtayaal (caawiyayaal);
- Xumad-cabire aan quraarad lahayn, merkarina ku jirin; iyo
- Baraf-haye

5.7.2 Agabka gargaarka degdega ah waa in lasoo dhameystiraa mar kasta oo la isticmaalo ama mudadda isticmaalkoodu uu dhamaado (dhaco).

5.7.3 FCCP waa inay xaqiijisaa in agabka gargaarka degdega ah, sida uu farayo qodobka 5.7.1 ee nidaam sharciyeedyadani, in la qaato marka loo baxayo safarada shaqo ee ku soo gabagaboobaya laba (2) saacadood ama ka badan. Marka laga yimaado agabka ku taxan qodobka kore, waxa kale oo agabka ka mid noqonaya:

- Biyo iyo saabuun dareere ah ama jeermis tirayaal;
- Daawo kasta oo uu u baahan yahay ilmo qaba aleerji ama baahiyo gaar ah oo caafimaad;
- Liiska lambarada telefoonada xaaladaha degdega ah sida uu farayo qodobka 5.10.1.13.2 ee nidaam sharciyeedkani; iyo
- Nuqul ka mid ah ogolaanshaha waalidka ee daryeelka ilmaha xaaladaha degdega ah sida uu farayo qodobka 3.3.4.1 ee nidaam sharciyeedkani.

5.8 **Waxka Qabashada Shilalka, Dhaawacyada, iyo Xaaladaha Degdega ah ee Caafimaad**

5.8.1 FCCP waa inay sameysaa oo ay hirgelisaa habraac qoraal ah oo lagu dhaqmayo haddii ay timaado shilal ama dhaawacyo iyo qorshaynta helidda adeegyo caafimaad xaaladaha degdega ah. Qorshahaas waa inay ka mid noqoto:

- Habraac la marayo haddii uu yimaado shil, dhaawac ama xaalad caafimaad degdeg ah, taas oo ay ka mid tahay habka loo qaadayo bukaanka iyo wargelinta waalidiinta; iyo
- Habraac la adeegsanayo haddii uu yimaado shil, dhaawac ama xaalad caafimaad degdeg ah marka aan waalidiinta la gaadhi Karin.

- 5.8.2 FCCP waa inay xaqiijisaa haddii shil ama dhaawac soo gaadhay inta uu ilmuhu joogo, talaabo degdega ah in la qaaday si looga hortago in ilmaha dhibaato kale soo gaadho iyo in waalidiintiisa loo wargeliyay sida ugu dhakhso badan ee suurtagal ah.
- 5.8.3 FCCP waa inay abuurtaa oo ay qortaa warbixinta shil kasta, dhaawac ama xaalad caafimaad degdeg ah ee reebay raad muuqda ama gargaarka degdega ah ee lagula tacaalay, xataa haddii aan daawayn caafimaad loo baahan. Warbixinta shilka waxa ka mid noqonaya magaca ilmaha, waayeelka goob-jooga ahaa, gargaarka degdega ah ee la siiyay iyo daryeelka caafimaad ee lagamamaarmaanka ah. Waalidka ilmaha waa in la siiyaa nuqulka ka mid ah warbixinta isla maalintaas. Dhaawacyada culus, qaniinyada xayawaanka iyo dhimashada waa in la wargeliyaa Qaybta sida lagu qeexay qodobka 3.1 ee xeerkan.

5.9 Caruurta Leh Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka ee Gaarka ah iyo Naafoyin

- 5.9.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in dhamaan caruurta ay ka qayb qaataan dhamaan hawlaha intii suurtagal ah haddii aanay jirin duruufo caafimaad oo gaar ah oo taa u diidayaa.
- 5.9.2 FCCP waa inay qorsheysaa kudarista buuxda iyo guusha leh ee caruurta qabta baahiyaha caafimaad ee gaarka ah iyo naafadu. Qorshaha ilma kasta waxa wada diyaarinaya waalidiintiisa iyo shaqaalaha (haddii ay khuseyso). Qorshahaasi waa inuu waxka qabtaa baahiyaha caafimaadka iyo baahi kasta oo ilmuhu qabo.
- 5.9.3 FCCP waa inay xaqiijisaa in laqabsashada iyo qaabilaadaha loo samaynayo hawlaha kala duwan, isdhexgalka waayeelka-ilmaha, istaratiiyyada iyo agabka wax-barista markii loo baahdo si loo kaalmeeyo baahiyahiisa gaarka ah iyo horumarinta togan ee carruurta baahiyaha gaarka ah qabta iyo naafada.

5.10 Jawi Dhismeedka iyo Amm Badbaadada

- 5.10.1 Badbaadada Guud ee Dhismaha iyo Dhulka
 - 5.10.1.1 Badbaadada Guud: FCCP waa inay xaqiijisaa in dhismayaasha iyo kaabayaasha FCCH, dhulka ay ku yaalaan, qalabka, iyo agab-ciyaareedku aanay halis ku ahayn caafimaadka, badbaadada iyo fayyo-qabka carruurta.
 - 5.10.1.1.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in carruurta laga xafiday meelaha korontadu ka baxdo, sida in lagu shaqlay wax korontada daboolo, maayad-celiye lagu xidho meelaha korontadu ka baxdo, ama qalab kale oo loo sameeyay ujeedadaas.
 - 5.10.1.1.2 FCCP waa inay xaqiijisaa in caruurta laga xafiday halista maayadda-korontada ee ka iman karta xadhdaha korontada ee kor saaran shaqalka daaqadaha, korontada ama qalabka elektorooniga ama xadhdaha telefoonada.

5.10.1.1.3 FCCP waa inay xaqiijisaa in firnijarka iyo qalabku ay adag yihiin. Firnijarka iyo qalabka ciiraya ama liicaya ee halis keeni kara waa la hubsanaya xaaladooda.

5.10.1.1.4 FCCP waa inay xaqiijisaa in albaabada musqulaha iyo meelaha kale ee la xidhi karo ay leeyihiin fure oo si sahlan loo gaadhi karo. Furaha ama qufulka albaabka korkiisa ayaa lagu samaynayaa haddii uu xanibayo in laga fakan karo marka halisi jirto.

5.10.1.1.5 FCCP waa inay xaqiijisaa in caruurta da'doodu ka yar tahay saddex (3) sano aan loo ogolaan iyadoo aan la kormeerayn inay u dhawaadaan qalabka yaryar ee ay carruurto ku ciyaarto iyo qalabka kale ee leh halis koronto, ee Komishanka badbaadada isticmaalka qalabku (CPSC) u aqoonsadeen qalab ka yar cabirka halista (1.25 hiish dhexroorka iyo 2.25 hiish dhererka)

5.10.1.1.6 FCCP waa inay xaqiijisaa in waxyaalaha caarada dhuuban ee wax mudi kara laga fogeeyo caruurta haddii aan loo isticmaalayn hawl qorshaysan taas oo si dhaw u kormeerayo qof waayeel ahi.

5.10.1.3 Badbaadada Dabka

5.10.1.2.1 FCCP-da rukhsada heysata waa inay xaqiijisaa in FCCH-ta rukhsada heysata ay waafaqsan tahay mar kasta xeerarka Qeybta Badbaadada dabka ee Vermont. Taas waxa ka mid ah inkastoo aanay intan ku koobnayn

- Inay waafaqsan tahay warbixinaha baadhista Qeybta Badbaadada dabka ee Vermont;
- Inay leedahay hab dab-demis joogta ah oo la hubiyay oo ay weheliso xad-gudubyo la xaqiijiyay xilligii baadhista kuwaas oo la qoray in la saxay; iyo
- Inuu leeyahay dab-demiye gacmeedyo ay ku dhegsan tahay sumadda baadhista oo sax ah.

5.10.1.2.2 FCCP waa inay daryeelka caruurta ku xadidaa dabaqa hoose (dhulka) ee guriga haddii aanu dabaqa sare aanu lahayn laba (2) marin oo dibadda guriga loogu bixi karo. Haddii la isticmaalayo dabaqa labaad waa inuu jiraa qorshe badbaado oo lagaga daadgurayn karo dabaqa labaad.

5.10.1.2.3 Marka laga hadlayo qol-hoosaadka guriga, ugu yaraan waa inuu jiraa hal (1) marin oo si toos ah guriga looga bixi karo. Way reeban tahay in nooca albaabada kor loo qaado loo isticmaalo marin-bixid ahaan. Haddii qol-hoosaadka guriga loo isticmaalayo marin bixid, hal (1) marin-bixid wuxuu noqon karaa daaqad bi shardi waa in daaqadu aanay afartan iyo afar (44) hiish ka badan u dhaxayn daaqada iyo dhulka iyo in ugu yaraan balaceedu yahay labaat (20) hiish dhererkeeduna afar iyo labaat (24) hiish. Daaqada waa inay gaadhi karaan caruurta iyo shaqaaluhu iyo si sahlan loo furi karo.

5.10.1.2.4 FCCP waxay hubinaysaa in dabaq kasta oo guriga ah, iyo marinka guriga laga galo ee dhismaha guryaha is kor saran, uu leeyahay

qiiq-dareeme shaqaynaya sidoo kale qiiq-dareemeyaal ku rakiban yihiin agagaarka meesha caruurto seexato. FCCP waxay hubinaysaa in kaarboon monogsaydh cabireyaal ku rakiban yihiin banaanka qolalka caruurto seexato.

5.10.1.2.4.1 FCCP-da rukhsada heysataa waa inay hubisaa in in dabaq kasta oo guriga ka mid ahi, iyo marinka guriga laga soo galo dhismayaasha guryaha is kor saran, uu leeyahay qiiq-dareeme shaqaynaya iyo waliba qiiq-dareemeyaal ku rakiban dhamaan qolalka caruurto seexato. FCCP rukhsada lihi wuxuu hubinayaa in kaarboon monogsaydh cabirayaashu la dhigay banaanka qolalka caruurto seexato.

5.10.1.2.5 Waa in ugu yaraan halkaas yaalaan hal (1) si sahlan loo gaadhi karo oo dab-demiye kiimikada qalalan ah kaas oo ugu yaraan leh nooca 2-A: 10BC. Dab-demiyahaas waa in la joogteeyaa inuu yahay mid shaqaynaya. Waa inuu wato sumad rasmi ah, oo si haboon loo saxeeexay, taas caddaynaysa xaaladiisa shaqo ee hadda.

5.10.1.2.6 Dab-damiyaha waxa lagu rakibayaa meel muuqata oo ka mid ah gidaarka marinka bixista

5.10.1.2.7 FCCP iyo dhamaan shaqaalahu (siday hadba u waafaqdo) waa inay sii yaqaanaan isticmaalka iyo adeegsiga dab-demiyaha.

5.10.1.2.8 FCCP iyo shaqaaluhu (siday hadba u waafaqdo) waa inay jidh ahaan awoodi karaan kaalmaynta banana u saarista dhamaan caruurta joogta hal (1) wakhti hadiiba dab kaco.

5.10.1.3 Tuubooyinka, Biyaha iyo Bulaacadaha

5.10.1.3.1 FCCP waxay hubinaysaa in tuubooyinka (qasabadaha) FCCH lagu ilaaliyo inay si wanaagsan u shaqaynayaan

5.10.1.3.1 FCCP-da rukhsada heysataa waa inay xaqiijisaa in FCCH-ta rukhsada heysataa ay buuxisay dhamaan shuruudaha laga rabo ee tuubooyinka (qasabadaha) sida ay dejisay Qeybta Badbaadada Dabka ee Vermont

5.10.1.3.2 FCCP-da rukhsada heysataa waa inay xaqiijisaa in FCCH-ta rukhsada heysata ay u hogaansantay xeerarka khuseeya ee ay soo saareen Waaxda Daryeelka Degaanka mar kasta.

5.10.1.3.3 FCCP waa inay xaqiijisaa in biyaha la cabayaa yihiin kuwo nadiif ah oo buuxinaya heerarka Vermont mar kasta ama waxay keenaysa biyaha caagadaha ee cabsita loo diyaariyey.

5.10.1.4 Qashinka, Qashin Dibu-hawlgelinta iyo Caro-nafaqaynta

5.10.1.4.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in qashinka iyo carro-nafaynta lagu hayo weel si haboon u daboolan.

- 5.10.1.4.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in caruurto gaadhi karto qashinka nafaqaynta carada keliya marka ay shaqaalahu si toos ah u kormeerayaan.
- 5.10.1.4.2 FCCP waa inay xaqiijisaa in qashinka dib-loo-isticmaal gelinayo la nadiifiyay loona xareeyay hab aan soo jiidanayn cayayaanka, dulinka, ama xasharaadka halista ku ah amaanka ama caafimaadka caruurta.
- 5.10.1.4.3 FCCP waa inay xaqiijisaa in alaabooyinka dib-loo-isticmaal gelinayo ee amaanka caruurta halista ku ah sida daasadaha sharaabka aan la dhigin meel caruurto gaadhi karto.
- 5.10.1.4.4 FCCP waa inay xaqiijisaa in qashinka, alaabta dib-loo-isticmaal gelinayo, qashinka lagu nafaqaynayo carada aan la ogolaan xaddi ka badan inta uu weelka qashin ururintu qaadi karo iyo in laga qaado qolalka ay isticmaalaan caruurto ugu yaraan marka weelku buuxsamo, uu keen our, ama uu keeno wax kale oo halis ku ah amaanka ama caafimaadka.
- 5.10.1.4.5 FCCP waa inay xaqiijisaa in qashinka iyo qashinka dib-loo-isticmaal gelinayo laga qaado dhismayaasha si joogta ah oo aan ka yarayn hal mar afar iyo tobankii (14) maalmood ee kasta.
- 5.10.1.4.6 FCCP waa inay xaqiijisaa in qashinka nafaqaynta carada laga qaado dhismayaasha si joogta ah oo aan ka yarayn hal mar todobadii (7) maalmood ee kasta; haddii aan goob xafidan oo u gaar ah banaanka laga dhisin, taas oo ka durugsan meelaha caruurto ku ciyaarto, iyo in loo joogteeyo hab aan waxba u dhimayn amaanka ama caafimaadka caruurta.
- 5.10.1.5 Marinada Hawada, Diirinta iyo Qaboojinta
 - 5.10.1.5.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in qol kasta oo ku yaala FCCH oo ay caruurto isticmaasho lagu ilaaliyo ugu yaraan heer-kul 65°F iyo ugu badnaan 85°F oo hal (1) fuudh ka sareeya sagxadda iyo agagaarka ay isticmaalaan caruurta caano-nuuga ahi in lagu ilaaliyo ugu yaraan 68°F heerka sagxadda.
 - 5.10.1.5.2 Hawo-mareeno ku filan waa in loo sameeyo gudaha xiliyada kulaylaha. Dhamaan qolalka ay degan yihiin caruurto waa yeeshaan ugu yaraan hal (1) daaqad oo furmaysa iyo in si haboon muraayad loo galiyay, haddii aan hawo-dhaliye sanaaci ah la isticmaalayn.
 - 5.10.1.5.3 Daaqad furmaysa iyo in si haboon loola socon karo ama marawaxad koronto ku shaqaynaysa oo xamaam (musqul) kasta siisa hawada banaanka.
 - 5.10.1.5.4 Istimalka kuleyl-dhaliyaha ku shaqeeya gaasta ee aan hawo-mareen lahayn waa mabnuuc.
 - 5.10.1.5.5 FCCP waa inay xaqiijisaa in dhamaan qalabka kuleylinta-dhaliya iyo kuwa qaboojiya si haboon loo rakibay to looga hortago in dhaawac caruurta soo gaadho iyo in isticmaalkooda ay ogolaatay Qaybta Badbaadada Dabka ee Vermont.

- 5.10.1.5.6 FCCP waa inay xaqiijisaa in muraayadaha dhamaan daaqadaha, albaabada ama meelaha kale ee u furan banaanka ay si wanaagsan u dayactiran yihiin. Albaabada banaanka u furan, marka laga reebo alaabada dabka, waa in ay leeyihiin muraayado.
- 5.10.1.5.7 FCCP waa inay xaqiijisaa in qaboojiyayaasha, marawaxada iyo diirimaad-dhaliyayaasha korontada ku shaqeeya, oo ay ku jiraan dhamaan marawaxadaha sagxadda ama daaqaduhu ay yihiin kuwo aan caruurto gaadhi Karin haddii ay halis galinayso caafimaadkooda ama fayo-qabkooda. Haddii ay ku yaalaan gudaha ama banaanka waa in si habsiimo leh loo rakibo.
- 5.10.1.6 Iftiin-siinta
- 5.10.1.6.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in FCCH ay hesho iftiin dabiici ah iyo mid sanaaci ah oo ku filan dhamaan goobaha xanaanada iyo waxbarashada caruurta loogu sameeyo si ay caruurto si fiican wax ugu arki karaan, taas oo yaraynaysa halista in dhaawac soo gaadho iyo in FCCP iyo shaqaaluhu ay si muuqaal ah u kormeeri karaan.
- 5.10.1.6.2 FCCP waa inay xaqiijisaa in goobaha baabuurta la dhigto ee wadada, halka ay maraan dadka lugaynaya, iyo meelaha kale ee dhismayaasha banaankooda ee ay isticmaalaan caruurta, waalidka iyo xubnaha shaqaaluhu xiliyada mugdiga ah ay iftiin leeyihiin.
- 5.10.1.7 Hadhaaga Gabagabayn-Shaqo iyo Oogada Halista leh
FCCP waa inay xaqiijisaa in oogada iyo hadhaaga shaqo-gabagabowday ee FCCH iyo dhismayaasha ay amaan yihiin iyo inaanay halis keeni karin.
- 5.10.1.8 Ka Hortaga Sumowga Ladh
FCCP waa inay u hogaansanaataa shuruudaha ku xusan 18 V.S.A. Cutubka 38 Vermont Lead Law iyo waa inay xaqiijisaa in Dhaqanada Dayactirka ee Aasaasiga ah (EMP) la fuliyay. Kuwaas waxa ka mid ah inkastoo aanay intan ku koobnayn in caruurta laga xafido dildilaacyada ama qolof-dhaca rinjiga, iyo habaas biiray oo ka dhashay is-xoqidda dhaqdhaqaaqa albaabada ama daaqadaha.
- 5.10.1.9 Isticmaalka Sunta Cayayaanka
- 5.10.1.9.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in suntan cayayaanka la isticmaali karo oo keliya marka waxyaalaha dulinka lagula dagaalamo ama talaabooyinka lagu xakameeyaa guul-daraystaan. Sunta dulinka waa in aan loo isticmaalin in lagu xakameeyo dulinka sababo muuqaalkooda oo keliya. Mar kasta oo ay suurtagal tahay FCCH waxay isticmaalaysaa dulin-dilaha halista yar. Keliya dulin-dilaha ka diiwaan-gashan Waaxda Vermont ee Beeraha, Cuntada iyo Suuqyada ayaa la isticmaalaya, iyo in lagu qoro diiwaanada maamulka sida lagu waajibiyay qodobka 3.3.6.4 ee xeerkan.
- 5.10.1.9.2 FCCP waa inay xaqiijisaa in dhamaan qandaraasyada dulin-buufinta la adeegsan doono oo keliya dulin-buufiyayaasha ganacsiga ah ee ay ansixisay Waaxda Vermont ee Beeraha, Cuntada iyo Suuqyada.

5.10.1.9.3 FCCP waa inay xaqiijisaa in waalidiinta carruurta iyo shaqaalaha qoraal ahaan lagu wargeliyay shan (5) maalmood ka hor qorshe kasta oo la xidhiidha isticmaalka cayayaan dilaha. Wargelinta waxa ka mid noqonaya qoobta qorshaysan in la buufiyo, dulinka laga raysanayo, iyo sunta lagu isticmaalayo.

5.10.1.9.4 FCCP waa inay xaqiijisaa in buufinta dulinka la sameeyo kaliya marka caruurta ay maqan yihiin, si loo helo wakhti ku filan oo hawadu soo gasho gudaha meelaha la buufiyay, iyo in oogada sare ee caruurta afka ama gacanta ku taaban karaan buufinta ka dib iyadoo aan la daawayn ama aan si xooga loo nadiifin. Haddii meelaha debedda la buufiyo iyadoo caruurta joogto, waa in aan caruurta loo ogolaan agagaarka goobahaas ilaa inta laga helayo tilmaamaha soo-saaraha dulin-dilaha ama/iyo tilmaamaha buufiyaha, waa haddii buufiyuhu yahay xirfadle ku xeeldheer xakamaynta dulinka.

5.10.1.9.5 FCCP waa inay xaqiijisaa in dabinada cayayaanku aan la isticmaalin haddii aanay ahayn kuwa ku jira sanduuqyada dabinka. Sanduuqyada dabinka waa in aanay carruurta gaadhin.

5.10.1.10 Maaraynta Walxaha Sunta ah

5.10.1.10.1 Dhamaan weelalka suntan leh ama walxaha halista ahi ku jiraan ee FCCH waa in korkooda lagu muujiyaa haybtooda iyo habka keliya ee loo isticmaali karo iyo shuruudaheeda in aanay sadhaynayn cuntada ama ku abuurayn halis caruurta ama shaqaalaha.

5.10.1.10.2 Keydinta dareerayaasha iyo neefaha holca looma ogola FCCH marka laga reebo ogolaanshaha Qaybta Badbaadada Dabka ee Vermont.

5.10.1.10.3 Dhamaan walxaha wax-sadheeya ama suntan leh waa in aanay gaadhin caruurta.

5.10.1.10.4 Qalabka hawada ku afuufa ama ka nuuga kimikada sida gogosha lidka-xanuunka, ozone soo saaraha, hawo carfiyaha korontada ku shaqeeya, cidiyo-midabeeyaha, masaxa cidiyo-midabeeyaha, iyo biif-baafta laguma isticmaali karo gudaha FCCH iyadoo caruurta joogto.

5.10.1.10.5 Dhirta ay caruurta gaadhi karto (gudaha iyo dibeda) waa in aan la sumayn.

5.10.1.10.6 Ka Xafidida Caruurta Tarniiga:

Ka hor inta aan la dayactirin ama dib-loo-hagaajin FCCH ama haddii la duminayo, la dayactirayo, ama xaalado kale FCCH dhexdiisa la arko dareemo in qalabka dhismuhu laga yaabo inuu ku tarniig laga shaki qabo ama ka muuqdo, FCCP waa inay xaqiijisaa in baadhis uu ku sameeyo qof ay soo ansixisay Waaxda Caafimaadka ee Vermont taas oo waafaqsan shuruudaha xeerka iyo sharciga 18 V.S.A. Cutubka 26 iyo

Nidaam Sharciyeedyada Waaxda Caafimaadka ee Vermont ee Xakamaynta Tarniiga. FCCP waxay hubinaysaa in mid kasta iyo dhamaan soo jeedimaha la sameeyay baadhista ka dib la raaco. Nuqul ka mid ah baadhista, oo ay ku jirto soo jeedimihii iyo warbixin waafaqsan ee la gaadhay, ayaa loo gudbinayaa Qaybta. Waxa suuragal ah in talaabo laga qaado taas oo ku salaysan heerka ay gaadhsiisan tahay caruurta tarniiga loo bandhigay ee halista caafimaad.

5.10.1.11 Isticmaalka Tubaakada, Khamriga iyo Doroogoyinka sharci-darada ah

5.10.1.11.1 FCCP waa inay xaqiijisaa isticmaalka tubaakada iyo tubaako-dhigeed (oo uu ka mid yahay sigaarka elektoroniga ah), Khamriga iyo doroogooyinka sharci-darada ah ay ka reeban yihiin FCCH (gudaha iyo degaanka dibedda ee ay caruurta isticmaasho) marka ay caruurta joogto iyo waliba gaadiid kasta oo loo isticmaalo qaadista caruurta barnaamijkooda dardardar.

5.10.1.11.2 Haddii sigaar lagu qiiyiyo gudaha FCCH iyadoo carruurta aanay joogin, FCCP waxay waalidiinta ku wargelinaysaa in ilmahoodu uu la kulmayo degaan dhexdiisa lagu isticmaalay tubaako ama tubaako-dhigeed, ama labadaba ka hor inta aanu waalidku ilmihiiisa qorin FCCH.

5.10.1.11.3 Qof ka shaqaynaya ama mutadawac ka ah gudaha FCCH midkoodna looma ogola isticmaalka ama dhiirigalinta khamrada ama doroogooyinka iyadoo ay caruurta joogto FCCH. Daawo dhakhtar qoray ama taala rakada daawada korkeeda taas oo dhibaataynayn awooda FCCP iyo shaqaaluhu u leeyihiin inay si dhamaystiran u kormeeraan una daryeelaan caruurta waa suuragal in la qaato.

5.10.1.12 Bunduqyada iyo Noocyada Kale ee Hubka

FCCP waa inay xaqiijisaa in dhamaan qoryaha qarxa iyo noocyada kale ee hubka, oo ay ku jiraan inkastoo aanay ku koobnayn midiyaha ugaadhsiga, qalabka leebka iyo qaanasada iyo wixii hub la-hal-maala sida rasaasta, lagu qafilo goob FCCH ka mid ah. Rasaasta waxa lagu qafilayaa laguna xafidayaa meel ka gaar ah halka hubka.

5.10.1.13 Telefoonada

5.10.1.13.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in FCCH leedahay qof u qaybsan telefoonada kaas oo ay tahay inuu joogo adeegana fuliyo dhamaan xiliyada ay caruurta joogto. Lamabarka telefoonka waxa la siinayaa Qaybta iyo waalidiinta caruurtoodu dhigato. Haddii la isticmaalayo makiinada telefoonka ka jawaabta, FCCP waxay shirabaysa shan iyo tobankii (15) daqiiqaba mar si ay u habsato in waalidiinta la xidhiidhi karaan FCCP maalinta gudaheeda oo dhan.

5.10.1.13.2 FCCP waa inay xaqiijisaa in liiska lambarada telefoonada soo socda la dhigay telefoonka agtiisa iyo waliba u dhaw 911 iyo awaamiirta ku socota FCCH:

- Bilayska;
- Dab-damiska;
- Ambalaaska/Kooxda samata-bixinta;
- Xarunta Sunta (1-800-222-1222);
- Qaybta korinta Ilmaha; iyo
- Ku-Xad-gudubka Ilmaha Khadka tooska ah 800 lambar

Xogta gaarka ah ee Ilmaha:

- Cinwaanada Waalidka;
- Cinwaanada xaalada degdega ah; iyo
- Xogta cinwaanka dhakhtarka.

5.10.1.14 Xayawaanada la rabaysto

5.10.1.14.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in xayawaanada jooga FCCH aanay u keenayn khatar ama halis caafimaad caruurta iyo shaqaalaha.

5.10.1.14.2 FCCP waxay hubinaysaa in xayawaan ama rabaayad kasta oo joogta ama la keenay gudaha FCCH ay talaalan yihiin sida sharcigu tilmaamayo, iyadoo waraaqahoodana lagu xafidayo FCCH.

5.10.1.14.3 Xayawaanada jooga FCCH waxa waa in loo ilaaliyaa loona daryeelayaa si amaan iyo nadaafad leh oo aan u keenayn halis caafimaad caruurta iyo shaqaalaha.

5.10.1.14.4 Xayawaanada waa in aan loo ogolaan oogada meelaha cuntada ama cabitaanka lagu diyaariyo ama lagu qaybiyo. Xayawaanada six or ah isaga wareega looma ogolaanayo agagaarka caruurta cuntaynaysa.

5.10.1.15 Qalqaalinimada ama Dabeecada khatarta ah

FCCP waa inay mamnuucdaa qof kasta, oo ay ku jiraan inkastoo aanay ku koobnayn xubnaha qoyska, waalidiinta, shaqaalaha, ama mutadawiciinta, ka socda FCCH iyo hantida marka joogistiisa/teedu ama dabeecaddu rabshayso barnaamijka, ka carqaladaynayso shaqaalaha gudashada waajibaadkooda, cabsi-galinayso ama ku abuurayso baqdin caruurta dhexdooda ama/iyo shaqaalaha, ama marka ay jirto sabab la rumaysan karo in ficilkeeda/kiiisu ama dabeecadu keenayso halis waxyeelaynaysa caruurta joogta.

5.10.2 Jikada

5.10.2.1 Qodobada Guud ee Jikada

5.10.2.1.1 FCCP-da rukhsada heysataa waa inay xaqiijisaa in dhamaan goobta cuntada lagu diyaariyaa ay hesho ansixinta Qaybta. Goobta lagu diyaariyo cuntada fudud oo keliya ayaan u baahnayn ansixinta Qaybta

5.10.2.1.2 Oogada goobta cuntada lagu diyaariyo waa in aan loo isticmaalin hawlo kale marka cunto ama cabitaan lagu diyaariyay ama lagu qaybiyay.

5.10.2.1.3 Jikada iyo dhamaan goobta cuntada lagu diyaariyo, lagu keydiyo, iyo goobta cuntada lagu cuno, iyo weelka waa in ay ahaato nadiif, fayodhawran, iyo inay ka madhan tahay cayayaan, dulin, habaas iyo kuwa kale wax sadheeya.

5.10.2.1.4 Jikadu waxay yeelanaysaa ugu yaraan hal (1) sixni-faraxal oo leh xeedho keliya oo leh biyo socda oo qabow iyo kulaylba leh.

5.10.2.2 Qalabka, Weel-maydhista iyo Oogadooda

5.10.2.2.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in dhamaan saxniyada, koobabka iyo fiyaanada ay caruurta isticmaalayso yihiin kuwa ka madhan dilaac, jajab, iyo wax iin ah oo kale.

5.10.2.2.2 Jikadu waa inay leedahay qalabka lagama maarmanka u ah shaqada si ay u diyaariso, kaydiso, qaybiso iyo dhaqidda dhamaan cuntada iyo cuntada fudud ee caruurta iyo waayeelkaba. Dhamaan makiinadaha iyo qalabka waa in loo rakibaa loona habeeya si ay u sahlanaato nadiifintooda iyo dayactirkoodu.

5.10.2.2.3 Haddii FCCP ay isticmaalayso makiinada weelka dhaqda, weel-dhaqaha waxa loo rakibayaa looguna shaqaynayaa si waafaqsan talooyinka cida makinada samaysay.

5.10.2.2.4 Marka makiinada weel-dhaqahu aanu jirin, ee aan cuntada loo adeegsanayn weelka loogu talagalay in hal mar la isticmaalo, FCCP waxay hubinaysaa in uu jiro saddex (3) qabaal oo leh biyo shub loo habeeyay in weelka lagu dhaqo. Afar (4) jaranjaro ayaa ka mid ah weel-dhaqista, radin, nadiifin iyo hawo-ku-qalajin dhamaan saxniyada iyo weelka.

- Weelka waa in lagu dhaqaa biyo nadiifa oo kulul oo saabuun leh
- Weelka waa in lagu dhex ridaa biyo kulul oo nadiif ah
- Inta ka dib, weelka waa in la radiyaa ugu yaraan toban (10) sikin jeermis-dile. Jeermis-diluhu wuxuu noqon karaa EPA diiwaangashan ama jaafeel la badhxay iyo biyo. Haddii la isticmaalayo jaafeel, FCCP waxay raacaysaa talooyinka cida samaysay jaafeelka marka ujeedadas laysugu qasayo.
- Weelka waa in lagu qalajiyaa laydha.

5.10.2.2.5 Dhamaan oogada loo isticmaalo diyaarinta cuntada waa inay aahaadaan kuwo si sahlan loo nadiifin akro iyo inaanay ahayn kuwo dareeruhu ka dhex bixi karo.

5.10.2.2.6 Dhamaan walxaha halka mar la isticmaalo ee ay ku jiraan koobabka, saxniyada, qaadooyinka, farageetada iyo weelka kale ee hal mar la isticmaalo waa in hal maruun la adeegsado.

5.10.2.3 Kaydinta

5.10.2.3.1 FCCP waa inay yeelataa talaajad si ay ugu ilaaliso cuntooyinka xumaanaya 40°F ama ka sii qabow iyo baraf-dhaliye si ay ugu hayso cuntada la barafeeyay 0°F ama ka sii qabow. Cuntada lagu kaydiyay talaajad, oo ay a mid yihiin sanduuq-qadeed, waxa loo kaydinaaya hab u ogolaanaya in hawada qaboobi si xor u dhex wareegto. Dhamaan cuntooyinka talaajada la geliyay waa in ay daboolaaadaan.

5.10.2.3.2 Dhamaan cuntada waa in lagu xareeyaa weel gaar ah oo leh taariikh. Cuntooyinka ay isticmaalayaan ama loogu talagalay caruur gaar ah waa in si muuqata loo calaamadiyaa.

5.10.2.3.3 Dhamaan weelka, qalabka iyo cuntada waa in lagu xareeyaa meel nadiif ah, qalalan oo aan lahayn cayayaan, dulin, habaas iyo sadheeyayaasha kale iyo iyo in habkan loo maamulo si looga hortago inay sadhawdo.

- Haddii loo keydiyo si furan, dhamaan weelka waa in lagu xareeyaa meel sided iyo toban (18) hiish ka saraysa sagxadda;
- Sixniyada waa in lagu xareeyaa meel xidhan;
- Distiyada waa in la daboolaa ama la foorariyaa marka aan la isticmaalayn; iyo
- Weelka halka mar la isticmaalo waa la soo iibsanaaya laguna xaraynayaa kartoono nadiif ah.

5.10.2.3.4 Noocyada cuntada isku meel lagulama xaraynayo alaabta wax lagu nadiifiyo.

5.10.2.4 Ammaanka Cuntada

5.10.2.4.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in shakhsiyaadka leh nabaro furan ee aan la dabooli karayn aanay qaadi Karin ama diyaarin Karin cuntada.

5.10.2.4.2 Cuntooyinka waa in lagu kariyaa heerkul ku haboon waxana loo qaybinayaa isla wakhtigaa diyaarinteeda ka dib. Dhamaan cuntada dib loo kululaynayo waxa lagu karinayaa ugu yaraan heerkul 165°F, cuntooyinka kulul waxa lagu haynayaa heerkul aan ka yarayn 135°F, cuntooyinka qabow waxa lagu haynaya heerkul aan ka badnayn 41°F.

5.10.2.4.3 Dhamaan cuntooyinka khaa'isaya laguma hayn karo heerkulka qolka muddo ka badan hal (1) saac marka la diyaariyey ama la qaybiyey. Cuntooyinka khaa'isaya waxa lagu xaraynayaa talaajad iyadoo lagu duubay shay khafiifa.

5.10.2.4.4 Cuntooyinka la barafeeyay (fadhiisiyay) waxa barafka lagaga yaraynaya talaajadda, ayadoo la hoos dhigayo biyo qabow oo socda, ama waxa barafka lagaga dhalaalinayaa moofada gudaheeda.

5.10.2.4.5 Dhamaan cuntada aan xafidnayn, sadhawday waa la daadinayaa markiiba. Qasacadaha cuntada ama sharaabka ee bararay, daxalaystay, dhaawacan, neefsaday/dalooshamay lama isticmaalayo.

5.10.2.4.6 Khudrada iyo midhaha darayga ah waa in si aad ah loo dhaqaa inta aan la siin dadka.

5.10.2.4.7 Cuntada la siiyay ilmaha ama waayeelka ee waa in qashinka lagu daraa haddii aanu cunin. Kol haddii cunto qaybiyo, dib looma isticmaali karo, ilma kalena lama siin karo ama lama kaydsan karo, marka laga reebo in loo isticmaalo nafaqaynta carada.

5.10.3 Barxad-ciyaareed Dibedda ah

5.10.3.1 Qodobada Guud ee barxad-ciyaareedka dibedda

5.10.3.1.1 Waa inay jirta barxad-ciyaareed dibedda ah oo balaciisu ku filan yahay si uu fursado u siiyo ciyaar caqiibo iyo dhaqdhaqaaq muruq-daalis balaadhan leh aaga dhismayaasha ama FCCH dhexdiisa goob amaan oo loo lugayn karo kaas oo ay ansixisay Qaybtu.

5.10.3.1.1.1 FCCP-da rukhsada heysataa waa inay heysaa ama gaadhi karraa barxad-ciyaareed dibedda ah oo amaan ah oo ugu yaraan todobaatan iyo shan (75) fuudh oo laba-jibaaran ilma kasta si uu u helo fursado ciyaar tamar badan iyo dhaqdhaqaaq muruq-daalis balaadhan leh aaga dhismayaasha ama FCCH dhexdiisa meel loo lugayn karo oo amaan ah kaas oo ay ansixisay Qaybtu.

5.10.3.1.2 Barxad-ciyaareedka banaanku waxa ka mid noqonaya in la hadheeyo.

5.10.3.1.3 Barxad-ciyaareedka banaanku waa in la xayndaabaa/dayraa ama haddii kale laga xafidaa dhex-marista iyo wixii halis ah ee kale. Xayndaabista ama xayirayaasha dabiiciga ah, sida ijaarka ama madaha dhulka banaan, waxay caruurta ka hor-joogsanaysaa bixidda waxayna saamaxaysaa in si amaan loola socdo barxada ciyaarta.

5.10.3.1.4 Haddii xayndaab la isticmaalo, waa inay noqoto mid adag, amaan ah iyo aan jabayn si ay u taagerto, waxa loo dhisay in aan lagu dhiiran koritaan, iyo in aanay FCCP and/ama shaqaalaha ka xayirin muuqaalka la socodka caruurta.

5.10.3.1.5 Xayndaabka la dhisayo ka dib marka nidaam sharciyeedkani dhaqan galo wuxuu noqonaya sidan:

- Ugu yaraan afar (4) fuudh dhererka oo leh daldaloolo aan balacoodu ka waynayn 3.5 hiish;
- Lagu qalabeeyay ganjeelooyin leh haiyo b iskood isu-xidhaya iskood-isu furaya; iyo
- Waxa ka mid noqonaya ugu yaraan laba (2) iridood oo midi (1) aanay kuu hagayn gudaha FCCH.

5.10.3.1.6 Barxad-ciyaareedka banaanku waa inay ka madhan tahay qashin-qub, daasado qashin aan daboolayn, waxyaabaha sida sahlan u olola, taangiyada biyaha eek or u taagan iyo wixii kale ee halis ah. FCCP waxay hubinaysaa barxad-ciyaareedka banaanka ka hor inta aanay caruurta bilaabin inay ku ciyaaraan si ay u xaqiijiso inaan wax halis ahi goobta jirin sida, inkastoo aanay ku dhamayn, digada xayawaanka, qashin, qalab-gacmeedka waayeelka, ama waxyaabo kale oo ilmaha dhaawici kara.

5.10.3.2 Qalabka Lagu Ciyaaro iyo Kuwa la Kaxeeyo

5.10.3.2.1 Dhamaan qalabka lagu ciyaaro dibedda waa inay xoogan yihiin, amaan yihiin, nadiif yihiin kana madhan yihiin cidhifyo aan isku sinayn, dacalo fiifiqan, meelo kala dhaadher, kala jeedjeeda iyo boolal soo baxsan,

- Si looga hortago suryooyin, waa inaysan daloolo qalabka waxay ahaanayaan inta u dhaxaysa 3.5 iyo sagaal (9) hiish;
- Silsiladaha ku xidhan leexooyinku waa inay leeyihiin daboolo xafida iyo kuraasida leexadu waa inay ka samaysan yihiin alaab dabacsan oo aysan lahayn cidhifyo fiifiqan.

5.10.3.2.2 Qalabka waa in la habeeyo si caruurta ku hal (1) shay oo qalabka ah aanay u faragelin caruurta ku ciyaaraysa shay kale oo qalabka ka mid ah, marka laga reebo hoy-ciyaareedka la diyaariyay ee shaqooyinka badan.

5.10.3.2.3 FCCP waxay hubinaysaa qalab-ciyaareedka waawayn si hubsiimo leh loo rakibo si waafaqsan talooyinka cidii samaysay, in aan la dhigin oogada shubka ama daamurka iyo in la dhigay si loo fuliyo talooyinka sameeyaha qalabka ee aaga lagu isticmaalayo.

5.10.3.2.4 Burciida caruurta ku ciyaarto waa in loo ilaaliyo si amaan iyo nadaafadi ku jirto.

5.10.3.2.5 Baaskiilka, saddex-luglayda, iyo waxyaabaha kale ee la kexeeyo waa inay yihiin cabirka saxda ah ee ilmaha isticmaalaya, baaskiiladaas waa in lagu ilaaliyo xaalad wanaagsan.

- Saddex-luglayda waa in aanay lahayn bir-qoolaab, iyo saddex-luglayda iyo baaskiilada silsilada leh waa inay leeyihiin silsilad ilaashe.
- FCCP waxay hubinaysaa in dhamaan caruurta gashan yihiin koofiyada amaanka marka ay kaxaynayaan baaskiiladaha.

5.10.3.3 Isticmaalka Aagaga badbaadsan

Dhamaan qalabka ciyaarta ee dhulka ka sareeya soddon (30) hiish iyo ka badan, kuwaas oo ay ku jiraan kuwa la koro, kuwa wareega, leexooyinka iyo kuwa kale ee la hal-maala, FCCP waa inay xaqiijisaa in sagxada hoose iyo agagaarka qalabka oo ka mid ah goobaha isticmaalkooda la ogol yahay, ay tahay meel dabacsan oo aan ilaalinaysa caruurta haddii ay dhacaan.

- Alaabta goobta la isticmaalayaa waa inay ka kooban tahay loox furfuran, caleemo, dhoobo, shariirad-loox la farsameeyay, camuud, gogol amaankeeda la tijaabiyay ama rabadhka oo kale ah ama darmooyin rabadh ah oo loo qaabeeyay sida barkin badbaado;
- Alaabta goobta la isticmaalayaa waa inay raacdo talooyinka ku taxan faafinta ugu dambaysay ee Komishanka Maraykanka ee Badbaadada Alaabta la Isticmaalo ee Buuga Badbaadada Garoonada Dadweynaha ee ku saabsan heerka khatarta

alaabooyinka la tijaabiyay tilmaameen dhererka ugu dheer sagxadda la korayo ee qalabka;

- Alaabta goobta lagu isticmaalayo waa in loo rakibo loona ilaaliyo si waafaqsan awaamiirta iyo talooyinka cidda qalabka samaysay;
- Haddii walxaha dabacsan sida ciida, dhoobada, ama rabadh goglan lagu isticmaalayo goobta, FCCP waxay hubinaysaa in alaabtaas si joogto ah laysu ururiyo loona buuxiyo si loo ilaaliyo heerka qotada iyo dabacsanaanta alaabta; iyo
- Haddii alaabta dabacsan ee goobta la isticmaalayaa barafowdo FCCP waxay hubinaysaa in caruurta aanay ku ciyaarin qalabka ilaa inta ay alaabta dabacsan barafku ka dhalaalayo ee dib u soo noqonayso dabacsanaantii.

5.10.4 Barxadda Gudaha ah

5.10.4.1 Helidda Barxad Caruurta Isticmaali Karto

FCCP waxay hubinaysaa inay jirto goob gudaha ah oo loogu talagalay in caruurta isticmaasho marka FCCH uu hawlgal ku jiro, inay ku filan tahay, iyo inay habaysan tahay si ilmo kasta u helo in ku filan oo uu si xor ah u dhaqdhaqaaqi karo una ciyaari karo

5.10.4.1.1 FCCH-ta rukhsada heystaa, inay jirto ugu yaraan soddon iyo shan (35) fuudh oo laba jibaaran oo barxad amaan ah oo ilmihiiaba isticmaali karo, ilmo kasta waa inuu helo barxad ku filan oo uu si madax-banaan ugu ciyaaro. Cabiradu wuxuu ahaanaya gidaar ilaa gidaar gudaha aqalka. Qalabka xayiraya dhaqdhaqaaqa xorta ah iyo ciyaarta caruurta waxa loo aqoonsanayaa mid ka go'an cabirka fuudhka laba-jibaaran, musqulaha, barxadaha wax lagu xareeyo, qolwaynaha, qolalka moofada iyo barxadaha kale ee caruurta aanay u isticmaalin hurdada ama ciyaarta si joogto ah laguma xisaabinayo cabirka barxadda la isticmaali karo.

5.10.4.2 Marin-bixid: Jaranjarooyinka, barxad-gudeedka, daaqadaha, iyo albaabada qolalaka ay caruurta isticmaalaan waa inay banaan yihiin oo aan lagu xanibin marnaba alaabo la dhigo, qoqobayaal aan nuuxsanayn, qalab-ciyaareed, iyo waxyaabo kale.

5.10.4.3 Salaanada iyo Jaranjarooyinka

5.10.4.3.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in jaranjarooyinka ka badan saddex (3) talaabo, gudaha iyo dibedda, ay lahaadaan xayndaab rakiban iyo iftiin ku filan.

5.10.4.3.2 FCCP waa inay xaqiijisaa in ganjeelooyin adag oo amaan ah loo isticmaalo jaranjarooyinka, oo caruurta isticmaali karaan, wakhti kasta marka caruurta ka yar soddon lix (36) bilood ay joogaan.

5.10.4.4 Musqulaha/Xamaamada

5.10.4.4.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in FCCH ay leedahay ugu yaraan hal (1) xamaam oo ku qalabaysan hal (1) musqul si fiican u shaqaynaysa iyo saxanka fara-dhaqa.

5.10.4.4.2 FCCP waa inay xaqiijisaa in musqushu ku qalabaysan tahay saxan-faradhaq oo si wanaagsan u shaqaynaya oo buuxinaya shuruudaha ku xusan 5.2.1.5 ee xeerkan.

5.10.4.4.3 Musqulaha ay caruurto isticmaalayaan waa inay yaalaan waraaqaha musqusha oo diyaarsan si haboonna loo digay.

5.10.4.5 Nadiifnimada, Hagaajinta iyo Badbaadada

5.10.4.5.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in FCCH, qalabkeeda, iyo agab-ciyaareedku loo hayo si nadiif ah oo habaysan.

5.10.4.5.2 Dhamaan gidaarada gudaha iyo dibedda, saqafka, qiiq-saaraha, sagxadda, albaabada, siliigga, daaqadaha, daaqad-saqafka, biyo-shubyada, iyo barandayaasha waa in lagu ilaaliyaa dayactir wanaagsan.

5.10.4.5.3 FCCP waa inay xaqiijisaa in FCCH lagu hayo inay ka madhan tahay dulin iyo cayayaan soo duulay.

5.10.4.5.4 Meelaha xanaanada iyo waxbarashada lagu bixiyo sagxadooda waa inay nadiif ahaato.

- Sagxadaha aan goglanayn waa in maalin kasta la xaadho, iyo
- Sagxadaha goglan waa in habaas-nuugaa todobaadkii.

5.10.4.5.5 Oogada adag ee carruurta u furan waa in ay isku siman tahay, oo anuu dareeruhu ka dhex bixin, si sahlana loo nadiifin karaa. Fiiri sharciga ku xusan qaybta 5.2.6 ee xeerkan ee ku saabsan jadwalka nadiifinta, jeermis-tirka iyo fayodhawrida sagxadaha iyo walxaha gaarka ah.

5.10.4.5.6 Kaabadaha dibedda, marinada la lugeeyo, janjeedhada iyo barandayaasha waa in laga nadiifiyaa barafka iyo waxyaalaha kale halista degaanka ee xanibi kara marinada.

5.10.4.5.7 FCCP waa inay xaqiijisaa in qalab-ciyaareedka ka duwan ee caruurto isticmaalaan uu yahay mid xoogan oo ka madhan hali ay kamid yihiin laakiinse aan ku koobnayn - dactalada aan sinayn, daldaloolada, iyo goobo burbursan, googosan, boolal soo baxsan, kuwo yaryar oon gijisnayn, meelo keeni kara dabin, iyo inay ka madhan yihiin jaleecidda Komishanka Maraynka ee Badbaadada Qalabka La Icticmaalo.

5.10.4.5.8 Baaskiilka caruurta ee socda lama isticmaali karo haddii aanay jirin baahi caafimaad oo lagamamaarmaan oo uu faray dhakhtar aqoon u leh.

5.10.4.5.9 Shiraaca lagu boodboodo waa la isticmaali karaa haddii cabirkiisu soddon iyo lix (36) hiish ama ka yar yahay cabir ahaan.

5.10.4.5.10 FCCP waa inay xaqiijisaa in dhamaan walxaha sawir-gacmeedka iyo ciyaartu aanay sun ahayn.

5.10.5 Dabaalashada iyo Helitaanka biyo iyo barkad-dabaaleed

5.10.5.1 Ogolaansho qoraal ah waa in laga helaa ilma kasta waalidkiisa ka hor inta aan ilmaha la jeclaysiin dabaalashada iyo hawlaha biyo ku dhex socodka. Ogolaanshahaas waxa lagu haynayaa ilma kasta faylkiisa.

5.10.5.2 Barkad-Dabaaleedka/Biyo Xayndaabka

5.10.5.2.1 Xayndaab loogama baahna barkad-dabaaleedka biyaha laga buuxiyey

5.10.5.2.2 Barkad-dabaaleedyada hoos u qodan ama dhulka ka sareeya ama dabiiciga ah ama dadku sameeyay ee biyo galaan kuna yaala barxad-ciyaareedka dibedda, FCCP waxay hubinaysaa in ay xayndaab lagu xidhay si aan ilmaha fursad ugu helin iyadoo aanay helin ansixinta, kormeerka iyo la-socodka FCCP iyo/ama shaqaalaha. Xayndaabka ku wareegsan barkad-dabaaleedyada waa inuusan ka yaraan afar (4) fuudh dherer ahaan iyo ugu badnaan qoton 3.5 hiish xaga hoose. Ganjeelooyinku waa inay u furmaan xagga dibedda iyagoo wata aalad iskood u xidhaysa una furaysa taas oo ku rakiban meel ka mid ah dacalka sare ee ganjeelka ugu yaraanna ka hoosaysa saddex (3) hiish una jeeda dhinaca biyaha/barkad-dabaaleedka xigta. Ganjeelooyinka waa in la xidho marka aan la isticmaalayn.

5.10.5.3 Dhaqanada Fayo-dhawrka Barkad-dabaaleedka/Biyaha

5.10.5.3.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in barkad-dabaaleedyada la nadiifiyay iyo jeermis-tiray maalin kasta marka la isticmaalayo, iyo in biyo cusub laga buuxiyay ugu yaraan maalin kasta. Barkad-dabaaleedyada waa in biyaha laga madhiyaa lana qalajiyaa marka aan la isticmaalayn.

5.10.5.3.2 Barkad-dabaaleedyada hoos u qodan iyo kuwa dhulka ka sareeya FCCP waa inay xaqiijisaa in biyaha la miiray iyo in loo ilaaliyay si waafaqsan talooyinka sameeyayaasha barkad-dabaaleedka/biyo-miiraha. Barkad-dabaaleedyada waxa loo ilaalinayaa si waafaqsan hab-dhaqanka caafimaadka iyo badbaadada suuban.

5.10.5.3.3 Biyo-qabadyada dabiiciga ah ama dadku sameeyay ee ku yaala barxad-ciyaareedka dibedda, FCCP waxay muuqaal ahaan baadhitaan ku samaynaysaa barxadda ka hor inta aan la isticmaalin si ay u xaqiijiso inaysan lahayn halis sida garuurad, saxaro xayawaan ama wax kale oo caafimaadka iyo amaanka halis ku ah.

5.10.5.4 Kormeeridda Barkad-dabaaleedka/Biyaha/Waxyaabaha Mamnuuca ah

5.10.5.4.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in marka caruurta isticmaalayaan barkad-dabaaleedyada, FCCP iyo/ama shaqaalaha haysta shahaado dhaqangal ah oo la xidhiidha caano-nuug/ilmaha CPR inuu/inay goob-joog yihiin iyo inay qof-ahaan iyo muuqaal ahaan kormeerayaan dhamaan caruurta wakhti kasta.

5.10.5.4.2 FCCP waa inay xaqiijisaa in marka caruurta ku dabaalanayaan ama ku ciyaarayaan barkad-dabaaleedyada hoos u qodan ama kuwa dhulka korkiisa ama kuwa dabiiciga ah ama kuwa dadku sameeyay, FCCP waxay hubinaysaa in FCCP iyo/ama shaqaalaha dabaalashadooda ku kalsoon ee haysta shahaado dhaqangal ah (sharci ah) oo la xidhiidha caano-nuug/ilmaha CPR uu/ay goob-joog yihiin iyo inay qof-ahaan iyo muuqaal ahaanba kormeerayaan dhamaan caruurta wakhti kasta.

5.10.5.4.3 FCCP waa inay xaqiijisaa in marka carruurta xanaanada ku jirta ay ku dabaalanayaan ama ku ciyaarayaan barkad-dabaaleedyada hoos u qodan ama kuwa dhulka korkiisa ama kuwa dabiiciga ah ama kuwa dadku sameeyay, FCCP waxay hubinaysa in ilaalo-badbaado ay joogaan ama waa in la joogteeyo saamiga shaqaale/Ilmo ee soo socda:

- Hal (1) waayeel: laba (2) caruur ah oo caano-nuug/ilmo iyo caruurta da' da madarasada ka yar;
- Hal (1) waayeel: lix (6) caruurta da'ada dugsiga.

5.10.5.4.4 ilaalada-badbaadadu waa inay yeeshaan gargaarka degdega ah, CPR iyo damaanad-qaadka YMCA, Laanqayrta Cas ee Maraykanka (ARC), Dhalinta Iskootka ee Maraykanka (BSA), Allis & Associates ama mid kale oo qaran ahaan la aqoonsan yahay oo bixin kara damaanad-qaad u dhigma.

5.10.5.4.5 Marka ilaalada-badbaadadu ay ku jiraan shaqada kormeeridda agagaarka dabaalashada, looma xisaabinayo saamiga shaqaale/ilmo ee soo socda. Saamiga ugu yar ee shaqaale/ilmo ee caruurta ka qaybgalaysa dabaasha ee ay kormeerayaan ilaalo-badbaado la ansixiyay wuxuu noqonayaa:

- Hal (1): toban (10) carruur da'doodu sided (8) jir tahay ama ka wayn tahay;
- Hal (1): sided (8) carruur da'doodu tahay lix (6) iyo todoba (7);
- Hal (1): lix (6) caruur da'doodu tahay saddex (3) - shan (5); iyo
- Hal (1): saddex (3) carruur da'adoodu ka yar tahay saddex (3) sano.

5.10.5.4.6 Dabaalashada/isticmaalka Barkad-dabaaleedyada/Biyo-qabatinada waa mabnuuc saacadaha mugdiga dhexdooda.

5.10.5.4.7 Muquurashadu waa ka mamnuuc carruurta qoran.

5.10.6 Gaadiid qaadista

5.10.6.1 Amaanka Gaadhiga

5.10.6.1.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in gaadhi kasta oo loo isticmaalayo qaadista caruurta uu diiwaangashan yahay, la shirabay iyo caymisan yahay si waafaqsan sharciga dawladda.

5.10.6.1.2 FCCP waa inay hubisaa in gaadhi kasta oo loo isticmaalayo qaadista caruurta uu ku qalabaysan yahay gargaarka degdega ah iyo waxyaabo kale oo dheeraad xaaladda degdega ah sida lagu qeexay qodobka 5.7.3 ee xeerkan.

5.10.6.1.3 FCCP waa inay xaqiijisaa in gaadhi kasta, oo aanay lahayn FCCH, uu buuxiyo shuruudaha ku qoran qodobka 5.10.6.1.1 – 5.10.6.1.2 ee xeerkan. Dhokomentiyadaas waxa lagu haynayaa fayl yaala FCCH muddo 365 maalmood ah.

5.10.6.1.4 FCCP waa inay xaqiijisaa in darawalna aanu qaadin dad badan, oo ay ku jiraan caruur iyo waayeel, oo ka badan inta gaadhiga qaadkiisa ah.

5.10.6.2 Kuraasidda Gaadhiga iyo Suunka Amaanka

5.10.6.2.1 Dhamaan carruurta da'doodu ka yar tahay sided (8) sano waa in si haboon loo sugaa

habka ismaamulka ilmaha ee heer federal la ansixiyay kaas oo ku haboon miisaankooda iyo dhumucdooda haddii aanay jirin xaalad caafimaad oo khasbaysa in ilmuhu isticmaalo kursi gaar ah.

5.10.6.2 Dhamaan caruurta da'doodu ka wayn tahay sidded (8) sano, darawalka, iyo qof kasta oo waayeel ah waa inuu si haboon isu maamulaa asagoo isticmaalaya habka ismaamulka ilmaha ama suunka amaanka oo si fiican u shaqaynaya wakhti kasta.

5.10.6.3 Heer-kulka Gudaha Gaadhiga

Dhamaan gaadiidku waa in ay leeyihiin diiriye iyo hawo-qaboojiye shaqaynaya. Heerkul raaxo leh waa in la joogteeyaa gaadhiga gudahiisa marka caruurta la sido. Basaska aan ku qalabaysnayn hawo-qaboojiyaha waa suuragal in la isticmaalo marka heer-kulka baska gudahiisu aanu dhaafsiisnayn 85°F digrii.

5.10.6.4 Dayactirka Gaadhiga

FCCP waa inay xaqiijisaa in gaadhi kasta oo loo isticmaalayo qaadista caruurta uu yahay amaan si wanaagsanna u dayactiran tahay.

5.10.6.5 Aqoonta iyo ku Dhaqanka Badbaadada ee Darawalka

5.10.6.5.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in darawalka gaadhi kasta oo caruur qaadayaa uu haysto rukhsadda darawalnimada oo waafaqsan gaadhigaas. Haddii toban iyo lix (16) qof ama ka badan, oo ku jiro darawalku, la qaado hal (1) mar, darawalku waa inuu haystaa rukhsada darawalnimada gaadiidka ganacsiga oo shaqaynaysa oo waliba wadata taageerada rakaabka.

5.10.6.5.2 FCCP waxay hubinaysaa in darawalku u hogaansamo dhamaan shuruucda taraafikada.

5.10.6.5.3 FCCP waa inay xaqiijisaa in darawalku aanu isticmaalin telefoonka gacanta ama fariin qorin isagoo gaadhiga wada. Haddii isgaarsiintu lagamamaarmaan noqoto, darawalku gaadhiga wuu joojinayaa goobta la dhigo ka hor inta aanu adeegsan nooc kasta oo gacanta lagu qabto.

5.10.6.6 Badbaadada iyo ilaalinta Carruurta La Sido

5.10.6.6.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in ogolaansho qoraal ah laga helo waalidiinta ka hor inta aan loo diyaagarroobin qaadista caruurta. Waalidiinta waala la wargelin doonaa marka qof aanu shaqaaleyn barnaamijku laga yaabo inuu qaado caruurtooda. Ogolaanshaha qoraalka ah waxa lagu hayn doonaa ilma kasta faylkiisa.

5.10.6.6.1.1 Ogolaanshaha qoraalka ah ee awood u siinaya FCCH inay carruurta u qaado guriga waa

cinwaanka carruurta lagu fasaxi doono iyo in ilmaha la fasaxi karo iyadoo aanu goob-joog ahayn awood-bixiyuhu

5.10.6.6.1.2 Ogolaanshaha qoraalka ah ee FCCH awooda u siinaya inay u fasaxdo ilmo adeega qaadista oo aan hoos iman maamulka FCCH waa in arrinta lagu xusa ogolaanshaha qoraalka ah dhexdiisa.

5.10.6.6.2 Sinaba ilmo lagagama tegi karo gaadhi dhexdii iyadoo aan la wehelin ama aan la kormeerayn marnaba.

5.10.6.6.3 Saamiga shaqaale/ilmo ee lagu aqoonsadey sharciga qaybtiisa 6.2 ee nidama sharcieedyadan waa in la joogteeyo mar kastaba mar haddii caruurta la qaadayo.

5.10.6.6.4 FCCP waa inay xaqiijisaa in marka saddex (3) ama ka badan oo caruur aan awoodin socod gaadhiga ku dhex jiraan, waa inay ugu yaraan laba (2) xubnood oo shaqaale ahi joogaan. Marka caruur aan awoodin socod oo lix (6) ka badan gaadhiga ku dhex jiraan halkii (1): saamiga afar (4) shaqaale/ilmo ayaa lagu dhaqmayaa marka lagu daro darawalka.

5.10.6.6.5 FCCP waa inay aasaastaa oo hirgelisaa hanaan lagu tirakoobaya dhamaan caruurta la qaaday. Hanaankaas ugu yaraan waxa ku jiraya:

- Diiwaangelinta xogta dhamaan socdaaladii oo ay ka mid yihiin taariikhda, wakhtiga darawalka, gaadhiga iyo caruurta la qaaday;
- Diiwaangelinta waayeelka loo fasaxay ilmo haddii aanay ahayn FCCP;
- Diiwaangelinta cinwaanka ilmaha loo fasaxay haddii aanay ahayn qof awood loo siiyay ama FCCP iyo/ama shaqaale; iyo
- Hab lagu xaqiijinayo in ilmo kasta ka bixistiisa gaadhiga ka dib socdaal kasta.

5.10.6.7 FCCP waxay hubinaysaa marka FCCH diyaarinayso gaadiidka, xadiga wakhtiga ugu badan ee ilmo laga soo qaadi karo/lagu gayn karo guriga, FCCH, ama dugsi ma dhaafin karo muddo shan iyo afartan (45) daqiiqo ah halkii (1) jiho.

5.10.7 Socdaalada Goob-hawleedka

5.10.7.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in ogolaansho qoraal ah laga helay waalidka ka hor dhamaan socdaalada goob-hawleedyada iyo inay ku jirto nooca gaadiidka, iyo haddii socdaalku yahay socdaal-goob-hawleed gaar ah aanu dhaafsiisnayn afartan iyo shan (45) daqiiqo xadaynta hal (1) jiho. Ogolaanshahaas qoraalka ah waxa lagu haynayaa ilma kasta feylkiisa.

5.10.7.2 FCCP waxay hubinaysaa in ogolaansho qoraal ah la helay ka hor dhamaan socdaalada la lugaynayo sida lagu waajibiyay qodobka 5.10.7.1 ee nidaam sharcieedyadan.

5.10.7.3 Caafimaadka iyo ammaanka caruurta waa in la ilaaliyaa wakhti kasta marka lagu jiro socdaalka goob-hawleedyada ama u lugaynta goob-hawleedyada.

5.10.7.4 Garoomada ciyaarta iyo qalabka garoonada ee ay caruurtu u isticmaalaan socdaalada goob-hawleedyada ama u lugaynta goob-hawleedyada waa inay buuxiso ama dhaafto shuruudaha ku yaal sharciga qaybta 5.10.3 ee Xeerkan kuwaas oo la xidhiidha barxadaha ciyaarta ee dibedda.

5.10.7.5 FCCP waa inay xaqiijisaa in dhamaan saamiga shaqaale/ilmo ee lagu abuuray sharciga qaybta 6.2 ee nidaam sharciyeedyadan la ilaaliyo socdaalada goob-hawleedyada iyo u lugaynta goob-hawleedyada.

5.10.7.6 Carruurta qof ahaan iyo muuqaal ahaanba waa inay la socoto FCCP iyo/ama shaqaaluhu wakhti walba markay ku guda jiraan socdaalada goob-hawleedyada ama socdaalka u lugaynta goob-hawleedyada

5.10.7.7 Marka socdaal goob-hawleedyada ku jirto helidda barkad-dabaaleedyo ama biyo-qabatino dabiici ah ama dad sameeyay, FCCP iyo shaqaaluhu waa inay:

- Muuqaal ahaan baadhaan barxadda ka hor inta aan la isticmaalin inay ka madhan tahay wax caafimaadka iyo amaanka halis ku ah sida quraarad jaban, saxaro xayawaan, maayado xoogan, digniino caafimaad oo ku dhegan;
- Hubiyo in dhamaan sharciyada la xidhiidha ilaalinta Biyaha/mabnuucaadka ku qoran qaybta 5.10.5.4 ee xeerkan si aan leexleexasho lahayn loo fuliyay; iyo
- Hubiyo in caruurta loo diiday meelaha biyaha qotodoodu ka hoosayso dhexda haddii aan la shirabin awooda dabaalashada ee ilmaha.

5.11 Cuntada iyo Nafaqada

5.11.1 Cunto-xiliyeedka iyo Cuntooyinka Fudud

5.11.1.1 FCCP waa inay sameysaa oo ay iyo fulisaa siyaasad qoran oo ku saabsan cuntaynta-xiliyaysan iyo cuntooyinka yar yare e dhextaalka ah. Siyaasadaas waxa la siinayaa dhamaan waalidiinta wakhtiga qorista caruurta sida lagu waajibiyay qodobka 4.7 ee xeerkan. Waxa ka mid noqonaya:

- Faahfaahin ku saabsan dhamaan adeega cuntooyinka la diyaariyey;
- Wakhtiyada caadiga ah ee cuntooyinka fudud iyo cuntayn-xiliyeedka;
- Siyaasadaha iyo hanaanka la xidhiidha xassasiyada cuntada, shuruudaha cuntooyinka diimaha ku lug leh iyo baahiyaha kale ee gaarka ah; iyo
- Siyaasadaha iyo hanaanka ku saabsan dabeecadaha cuntaynta si badbaado leh.

5.11.1.2 FCCP waa inay xaqiijisaa in shakhsiyaadka ka masuulka ah diyaarinta cuntadu leeyihiin aqoonta shuruudaha nafaqaynta, nadaafada diyaarinta cuntada, kaydinta iyo nadiifinta iyo u dhaganuglaanta siyaasadaha FCCP ee la xidhiidha ilaalinta cuntada iyo cuntada iyo nafaqada.

5.11.1.3 FCCP waa inay xaqiijisaa in liiska noocyada cuntada marka horeba la qorsheeyay, la cayimay taariikhda iyo la dhejiyay markaa si aan mugdi lahayn ayay u arkayaan waalidiintu. Isbedelka oo ku yimaada liiska la dhejiyay

waa in qoraa. Liiska cunto-xiliyeedka iyo cuntooyinka fudud ee lida (6) todobaad ee la soo dhaafay waa in lagu hayo faylka.

5.11.1.4 FCCP waa inay bilowdaa noocyo kala duwan oo cunto tayo leh, cuntooyinka la qaato iyo isticmaalka koobka oo loogu talay is-quudinta iyo barashda nafaqada. Caruurta waa in lagu dhiirigeliyo inay cuntada qaataan oo naftooda quudiyaan.

5.11.1.5 Caruurta waa in la siiyo cunto iyo in loo diyaariyo fursad si dhakhso ah marka cuntada uu bixinayo barnaamijku, laakiin lagu khasbi mayo si ay u cunaan.

5.11.2 Nafaqada ku jirta Cunto-xiliyeedyada iyo Cuntada Fudud

5.11.2.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in carruurta ugu yaraan la siiyo cunto-xiliyeedyo iyo cunto fudud ee soo socda oo ku salaysan wakhtiyada caruurta joogaan:

- Afartii (4) saacadood ama ka yar: hal (1) cunto fudud ah;
- Afar (4) ilaa lix (6) saacadood: hal (1) cunto-xiliyeed iyo hal (1) cunto fudud ah;
- Lix (6) ilaa kow iyo toban (11) saacadood: laba (2) cunto-xiliyeed iyo hal (!) cunto fudud ah, ama hal (1) cunto-xiliyeed iyo laba (2) cunto fudud ah;
- In ka badan kow iyo toban (11) saacadood: saddex (3) cunto-xiliyeed iyo laba (2) cunto fudud ah; iyo
- Caruurta da' da dugsiga ee dhigata dugsiga maalin dhan waa in hal (1) saac gudaheed lagu siiyaa cunto fudud markay galinka dambe yimaadaan.

5.11.2.2 FCCP waa inay xaqiijisaa in cunto-xiliyeedka iyo cuntada fudud ee la diyaarinayaa ay buuxinayo shuruudaha cusub ee cunto-xiliyeedka ee USDA/Barnaamijka Daryeelka Cuntada ee ilmaha iyo waayeelka (CACFP) in lagu sargooyay si waafaqsan da' da ilmo kasta.

5.11.2.3 Waa suuragal in sharaab 100% khudrad laga miiray la siiyo. Sharaab kale iyo sonkor lagu macaaneeyay ama sharaabyada sida aan dabiiciga ahayn loo macaaneeyay lama siin karo.

5.11.2.4 Marka caanaha ay bixinayso FCCP waa inay buuxiso shuruudahan soo socda: caano lo'aad lis ah oo la karkariyay, 1% ama subaga laga saaray waa in la siiyo caruurta da' doodu laba (2) sano ka wayn tahay; carruurta da' doodu tahay hal (1) ilaa laba (2) sano waxay qaadanayaan caano lo'aad la karkariyey marka aanay u socon caana-boodhaha abaydinka ama caanaha naasku; iyo cabitaan darted, caano-boodhe looma isticmaali karo inuu caanaha caadiga ah halkoodii buuxiyo.

5.11.3 Dhamaan cuntooyinka iyo sharaabka kulul waa in laga fogeeyo meel caruurta gaadhi karto, taas waxa ka reeban marka si toos ah loo ilaalinayo ee caruurta ku foogan yihiin hawlo cunto-karin la xidhiidha ama cunto-xiliyeedyada hab qoysnimo loo bixinayo. Waayeelka karinaya ama cabaya sharaab kulul waa in aan caruur haysan.

5.11.4 Biyaha la cabaa waa in caruurta mar walba u diyaar yihiin oo ay heli karaan.

- 5.11.5 FCCP waa inay xaqiijisaa in haddii cuntada FCCH bixinayso uu u keeno ganacsade in ganacsadahaasi uu Waaxda Caafimaadka ee Vermont ka haysto liisanka samaynta adeeg cunto oo shaqaynaya.
- 5.11.6 Nafaqada Dhallaanka
- 5.11.6.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in waalidka dhallaan kasta oo la qoray uu keeno qoraal ahaan tilmaamaha quudinta oo cadaynaya isha ugu mudan ee nafaqaynta ilmaha (caanaha naaska, caano-boodhaha abaydinka, ama labadaba) iyo jadwalka quudinta ilmaha. Tilmaamahas waa la cusboonaysiinaya marka cunto qaadashada ilmuhu is bedeshoba.
- 5.11.6.2 Dhallaanka waa in loo quudiyo si waafaqsan jadwalkooda quudinta shakhsi ahaaneed iyo baahidooda.
- 5.11.6.3 Soo kordhinta dhamaan cuntooyinka cusub waxa la samayn karaa oo keliya marka ogolaansho laga helo waalidka
- 5.11.6.4 Dhallaanka waa in lagu quudiyaa masaasad ilaa ay ka awoodayaan inay qabsadaan dhalada iyadoo aan la caawin. Wakhti ma jiro aan abaydinku dhalada ku tiirsanayn dhinaca quudinta.
- 5.11.6.5 Haddii daryeelka uu ku jiro hal (1) ilmo wax ka badan oo masaasad isticmaala, dhamaan masaasadaha waa in lagu calaamadiyaa magaca dhallaanka iyo in talaajada markiiba la geliyo ka dib marka FCCP diyaariso iyo/ama shaqaalaha ama isla markuu yimaado haddii waalid diyaariyey.
- 5.11.6.6 Dhallaanka lama siin karo caano-boore ama caanaha naaska ee dhallaan kale.
- 5.11.6.7 Caano-booraha iyo caano naas midnaba lama kululayn karo ama moofada laguma gubi karo. Caano-booraha, ama caanaha, haddii la kululeeyo, waxa keliya oo carruurta la siin karaa ka dib marka si haboon loo walaaqay iyo marka la aqoonsado in heer-kulkoodu amaan yahay.
- 5.11.6.8 Inta ka soo hadha caano-booraha ama caanaha naaska ee ilmaha la siiyay waa la qubayaa quudin kasta ka dib ama hal (1) saac ka dib haddaan talaagada la gelin. Weelka afka furan ee loo diyaariyey quudinta ama caano-booraha aan la badxin waa la daboolayaa, talaagadda la gelinayaa, waana la qubayaa afartan iyo sided (48) saacadood ka dib haddii aan la isticmaalin. Caanaha naaska ee aan la isticmaalin waa la qubayaa afartan iyo sided (48) saacadood ka dib haddii la talaagadeeyay, laba (2) todobaad ka dib haddii la barafeeyay.
- 5.11.6.9 Caano-booraha ama caanaha caadiga ah laguma walaaqi karo midhaha firida, sharaab khudrad laga miiray, ama cunto kale toona masaasada ilmaha iyadoo aan dhokomenta qoraal ah laga helin cida xanaanada caafimaad siisa dhallaanka. Caano-booraha ganacsi ahaan loo diyaariyay waa in la diyaariyaa loona kaydiyaa si waafaqsan awaamiirta.
- 5.11.6.10 Cuntooyinka dhallaanka waa in tayadeeda iyo joogtaynteedu horseedo quudasho ammaan ah iyo inay yarayso halista saxashada.

- 5.11.6.11 Cuntada ilmaha ee dhallaan kasta waa in laga soo guraa saxan haddii aan gabi ahaanba cuntada dheriga ku jirta hal (1) mar la quudanayn. Weelka ay ku jirto cuntada ilmuhu ee la furay hasa yeeshee aan la wada isticmaalin waa in la daboolo, taariikhda lagu qoro, iyo calaamad lagu dhigo. Cuntada ilmaha ee la furay waa in la isticmaalo ama la qubo soddon iyo lix (36) saacadood gudahood oo ka bilaabmaysa markii ugu horaysay ee la furay.
- 5.11.6.12 Farsamooyinka nadaafadda ayaa loo isticmaalayaa maamulka caano-booraha, caanaha naaska, masaasadaha iyo mujurucyada. Masaasadaha iyo mujurucyada dib loo isticmaalayo waa in si xoogan loo dhaqo dib-u-isticmaalka ka hor. Masaasadda hore loo buuxiyay ee hal (1) ilmo mar keliya isticmaalay waa in la nadiifiyo oo la xereeyo.
- 5.11.7 Marka waalidku keenaan cunto-xiliyeedka ama cuntada fudud, waalidku waa inay keenaan nuqul ka hagaha CACFP waxana lagu dhiirigelinayaa inay keenaan noocyadii ku haboonaa kuwaas oo ku filan nafaqona leh.
- 5.11.8 Codsiyada Nafaqo ee gaarka ah iyo Xadidaada.
- 5.11.8.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in cuntooyinka gaarka ah ama waxtarka caafimaad leh ay bixiso FCCP iyo/ama shaqaalahu keliya marka la helo amar qoraal ah oo ka yimi u qaybsanaha daryeelka caafimaadka ilmaha.
- 5.11.8.2 FCCP waa inay xaqiijisaa in haddii waalidku codsadaan wax ka bedelka cuntada aasaasiga ah sababo la xidhiidha baahida caafimaad ee ilmaha awgeed sida xasaasiyada cuntada ama oon-diidka in waalidku uga keenaan FCCP dhokomenti qoraal ah u qaybsanaha daryeelka caafimadka ilmaha kaas oo awood u siinaya wax-ka-bedelka cuntada.
- 5.11.8.3 FCCP waa inay xaqiijisaa in haddii codsiga waalidka ee wax-ka-bedelka cuntada aasaasiga ah sababo la xidhiidha danaynta qoyska ee cuntadaas ama diin ay aamisan yihiin awgeed waa in waalidku FCCP uga keeno dhokomenti qoraal ah oo qeexaya cuntooyinka aan la ogolayn iyo cuntooyinka kuwa bedelkooda la ogol yahay ee ka mid ah isla nooca cuntadaas.
- 5.11.8.4 Kol haddii cadaymaha lala imanayaa yihiin kuwii saxda ahaa, FCCP waxay si xidhiidh ah u aqbalaysaa codsiyada nafaqada gaarka ah iyo xadidaada cuntooyinka ee waalidka. FCCP iyo/ama shaqaalahu way aqoonsanayaan waxna way ka qabanayaan xasaasiyadda cuntada ee caruurta.

FCCH Qaybta 6 – Baridda iyo Barashada

6.1. Barnaamijka Hawlaha Koritaanka (Manhajka)

- 6.1.1 FCCP waa inay maareysaa barnaamij-dejinta hawlaha waxbarashada iyo horumarinta si ay u xaqiijiso in manhajku kobcinta ku haboon yahay sida lagu waajibinayo qaybta nidaam sharciyeedyadan.

6.1.2 Fursadaha Barxad-ciyaareedka Dibedda

6.1.2.1 Caruurta waa in la siiyo fursado ay ku helaan ciyaaro fudud ilaa kuwo xoogan iyo ciyaar-jidheed barxadaha xarunta ama goob loo lugayn karo oo amaan ah oo FCCH ah ugu yaraan lix (60) daqiiqo maalintiiba. Barnaamijyada soconaya in ka yar afar (4) saacadood maalintiiba, FCCP waxay hubinaysaa in caruurta la siiyay ugu yaraan soddon (30) daqiiqo oo jimicsi jidh ah maalintiiba.

6.1.2.2 FCCP waa inay ka taxadirtaa xaaladaha cimilada kakan sida kulaylka iyo huurka xad-dhaafka ah, qabowga daran oo uu ku jiro xaaladaha duufaanka qabowga daran wata, ama hawada tayada liidata ee saamayn karta fayyo-qabka ama caafimaadka caruurta. Caruurta loo ogolaan mayo inay dibedda ku ciyaaraan wakhtiyada xaalada cimiladu daran tahay.

6.1.2.3 Maalinta ay caruurta awoodi waayaan inay dibedda ku ciyaaraan, FCCP waxay siinaysaa caruurta fursado ay kaga qaybgalaan ugu yaraan soddon (30) daqiiqo oo ciyaaro fudud ilaa kuwa xoogan oo jimicsi-jidheed ah gudaha dhismayaasha.

6.1.2.4 FCCP iyo/ama shaqaaluhu waxay ku dhex jirayaan carruurta mudada ay dibedda ku ciyaarayaan.

6.1.3 Jadwalka iyo Hawlaha Joogtada ah

6.1.3.1 FCCP waa inay sameysaa, qortaa oo ay fulisaa jadwal-hawleed maalinle ah oo lagu tiirsanaan karo kaas oo ay ku jirto isku-dheelitirka:

- Fursadaha ciyaarta shakhsi, koox kooban iyo koox balaadhan iyo waxbarashada;
- Fursadaha hawlaha ilmaha ku jihaysan iyo sidoo kale kuwa ku jihaysan macalinka;
- Firfircoon iyo ciyaar deggan;
- Nasasho ama wakhti deggan hadba sida haboon; iyo
- Ciyaarta gudaha iyo ta dibedda

6.1.3.2 FCCP rukhsadda heystaa waa inay xaqiijisaa in jadwal qoraal ah la diyaariyey iyo in lagu dhejiyay meel si fiican ugu muuqan karta waalidiinta, shaqaalaha iyo caruurta hadba sida haboon. Jadwalku wuxuu muujinayaa wakhtiyada intada badan loo gaar yeelay noocyada kala duwan ee ciyaareed ee maalinlaha iyo todobaadlaha joogtada ah sida uu dhigayo qodobka 6.1.3.1 ee xeerkan

6.1.4 Fursadaha Horumka iyo Waxbarshada

6.1.4.1 Qalabka Carruurta ku Ciyaarto iyo Agabka Waxbarshada (Gudaha iyo Dibedda)

6.1.4.1.1 Qalabka carruurta ku ciyaarto, agabka iyo qalabka waa inay noocyo badan yihiin iyo inay taalo tiro ku filan oo dhamaan carruurta ka faa'iidayso isticmaalkooda, u ogolaanaysa noocyo ay kala doortaan, iyo inay yarayso khilaafka caruurta dhexdooda iman kara.

6.1.4.1.2 Qalabka carruurta ku ciyaarto, agabka iyo qalabku waxay taageerayaan inay kobcinta ku haboon yihiin iyo khibrad waxbarasho oo macna leh iyo inay buuxinayaan baahida iyo dookha ilma kasta.

6.1.4.1.3 Qalabka carruurta ku ciyaarto, agabka iyo qalabku waxay ka tarjumayaan dhaqanka caruurta iyo kan bulshooyinka iyo dhiirigelinta ku baraarujinta dhaqanada iyo bulshooyinka kale.

6.1.4.1.4 Firmijarka iyo qalabka caruurta u isticmaalayaan ciyaarta iyo maalinlaha joogtada ah waa inuu raandhiis leeyahay kuna haboon yahay xaga cabirka, awooda iyo dhaqdhaqaaqa caruurta.

6.1.4.1.5 Kuraas cabirka waayeelka ah oo raaxo leh oo shaqaalaha loogu talagalay waa inay yaalaan gudaha.

6.1.4.2 Khibradaha Kobcinta Ku Haboon

6.1.4.2.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in xaddiga wakhtiga soo jeedka caruurta da'doodu ka yar tahay afar iyo labaatan (24) bilood ay ku qaataan qalabka ciyaareed kasta, sida naqlinta, xidhmooyinka, marso-naqlinta, leexada, ama kursiga ay ku xadidan tahay wakhti ka yar soddon (30) daqiiqo labadii (2) saacadood ee kasta.

6.1.4.2.2 FCCP waa inay xaqiijisaa in caruurta da'doodu ka yar tahay saddex (3) sanadood lagu dhiirigaliyey laguna gargaaray inay horumariyaan xirfadda iyo dhaqanka daryeelka naftooda. FCCP waxay hubinaysaa in caruurta saddex (3) sano jirsadey lagu dhiirigeliyey laguna gargaaray inay horumariyaan iyo inay ku guulaystaan si madaxbanaan xirfadda iyo dhaqanka daryeelka naftooda.

6.1.4.2.3 FCCP waa inay xaqiijisaa in caruurta lagu mashquuliyey ciyaar horumarintooda ku haboon, dhaqdhaqaaqyo dareen, iyo barashada khibradeed ee arrimaha soo socda:

- Xidhiidhka iyo muuqaalka: horumarinta luqada iyo akhris-qorista, iyo halabuurka fanka;
- Barashada ku saabsan dunida: cilmiga bulshada, sayniska, iyo xisaabta; iyo
- Horumarinta qof-ahaaneed: hababka barashada, horumarinta bulsheed iyo caadifadeed, korista, dhaqaajinta, iyo faqo-qabnaanta.

6.1.4.3 Tixgelinta Kala Duwanaanshaha

6.1.4.3.1 Jawigu waa inuu yahay mid is qadarin leh iyo inuu ka tarjumayo fahamka kala duwanaanshaha qoysaska, dhaqamada, iyo isirada imanaya FCCP iyo kuwa bulshooyinka ku hareeraysan

6.1.4.3.2 Agabka iyo khibradaha la siinayo caruurta waxay ka tarjumaysaa kala-duwanaanshaha ka jirta bulshada dhexdeeda oo ay ka mid yihiin lamaanaha, dhismaha qoyska, da'da, luqadda iyo kartida.

6.1.4.3.3 FCCP waa inay waalidiinta kala tashataa hababka xanaanaynta ee u gaarka ah dhaqanka caruurta iyo bulshada waxayna u diyaarinaysa inta ugu badan ee suurtagalka ah ilma kasta dhaqankiisa FCCP dhexdiisa.

6.1.4.4 Xadidida Wakhtiga Daawadashada

6.1.4.4.1 Wakhti daawasho marnaba loo isticmaali mayo sidii hawl qorshaysan carruurta da'doodu ka yar tahay laba (2) sano.

6.1.4.4.2 Wakhtiga daawasho waa inuu ku koobnaado barnaamijyada iyo ciyaaraha kobcinta ku haboon iyo kuwa waxbarshada, marka laga reebo filimka kobcinta ku haboon madadaalada kaas hal mar ka badan bishii aan la isticmaali karin.

6.1.4.4.3 Wakhtiga daawasho waa inuusan u soo bandhigin caruurta wax aan haboonayn sida waxay ku jirto muuqaalo qaaqaawan, rabshad ama waxay ku jirto luqad aan haboonayn.

6.1.4.4.4 Wakhtiga daawashada waa in uu ilaaliyo FCCP iyo/ama shaqaaluhu.

6.1.4.4.5 Wakhtiga daawashadu waa inaanu ka badan soddon (30) daaqqiyo maalintii ilmo kasta ama koox caruur ah marka laga reebo caruurta gaadhay da'da dugsiga ee isticmaala tiknoolajiga si ay u dhamaystiraan hawl-guriga loo diray. Iyo hal mar bishii filim laba (2) saacadood soconaya.

6.1.4.4.6 Istimaaalka tiknoolajiyada caawimada ee ilmo baahi gaar ah qaba taas oo ay ku jirto adeegga iskudhafan ee caruurta (CIS) Hal Qorshe, Qorshaha Adeega Qoys Gaar ah (IFSP), ama Qorshaha xubin waxbarasho (IEP) laguma darayo halkan fasiraada wakhtiga daawashada.

6.1.4.4.7 Hawlo kale oo kobcinta ku haboon waa inay jiraan marka daawshada telefishanka /Fiidiyowga socoto.

6.1.5 Fursadaha Baridda iyo Barashada

6.1.5.1 Dhallaanka iyo socod baradku (caruurta da'doodu ka yar tahay afar iyo labaatan (24) bilood))

6.1.5.1.1 Hawlaha horumarinta iyo waxbarsho ee shakhsiga ah waa in la sameeyaa lana fuliyaa daryeelka iyo ilmo kasta oo da'diisu ka yar tahay laba iyo toban (12) bilood. Hawlahaas waxa ku jiraya himilooyinka horumarineed oo leh hawlo iyo khibrado cayiman waa in la siiyaa shaqaalaha si ay taageeraan himilooyinka. Horumarka ilmuhu sameeyo waa in lala wadaagaa waalidka.

6.1.5.1.2 FCCP rukhsada haystaa iyo/ama shaqaaluhu waa inay hayaan qoraalka quudinta maalinlaha ah ee cunto siinta, seexashada, xafaayad-xidhista, iyo horumarka ay gaadhaan dhamaan caruurta da'doodu ka yar tahay afar iyo labaatan (24) bilood taas oo lala wadaagayo waalidiinta dhamaadka maalinta.

6.1.5.1.3 Carruurta da'doodu ka yar tahay afar iyo labaatan (24) bilood waxay kala kulmayaan macaamiil togan oo soo noqnoqonaya oo joogta ah FCCP-da rukhsadda heysataa iyo/ama xubin shaqaalaha ee ilma kasta siinaya fursadaha soo socda maalinta gudaheeda oo dhan:

- La dhaqan waji ka waji ah;
- Hayn iyo qaadis;
- Ciyaar shaqsi iyo mid bar socota;
- Ka caawin Ciyaar iyo hawlo kooxeed kooban;
- La hadal xilliyada ciyaarta, quudinta iyo xanaanada joogtada ah;
- U akhrinta iyo eegista buugaagta;
- Magac-bixinta walxaha iyo khibrada degaanka;
- Masaafada iyo qalabka si u caawiyo barashada xirfadaha socodka sida daadegista, fadhiisiga, dhaqaaqista, gurguurashada, istaagista, korista iyo socodka;
- Masaafadda iyo agabka si uu uga caawiyo barashada xirfadaha yar yar sida cunista cuntada yar, urursan, iyo sawir-gacmeedka;
- Xalinta mushkiladaha si horumarinta ku haboon;
- Diirigelinta sahaminta, tijaabinta iyo hawlaha hal-abuurka;
- Ciyaar daba xidhan iyo dhaqdhaqaaqyo; iyo
- Wakhti iyo masaafad si uu u kororsado khibrad uu ka helayo ciyaarta iyo waxbarshada wax-qabashada ku salaysan.

6.1.5.1.4 FCCP iyo/ama shaqaalaha waa inay falceliyaan dhaqdhaqaaqa caruurta, codkooda iyo bilaabidda afka oo ay u muujinayaan xiise iyo dhiirigelin.

6.1.5.2 Dhallaanka roon roon iyo kuwa ka kahor-dugsiga barbaarinta (carruurta laba (2) sano ugu dhiman tahay da'da dugsiga).

6.1.5.2.1 Carruurta laba (2) sanno uga dhiman tahay da'da dugsiga waa inay waa inay helaan isdhexgal togan oo soo noqnoqda oo ay la yeeshaan FCCP rukhsada heysta oo joogto ah iyo/ama xubin shaqaalaha ah ee siinaya ilmo kasta fursadaha soo socda maalinta oo dhan dhexdeeda:

- La dhaqan waji ka waji ah;
- Isku darka khibradaha shakhsi, koox kooban, iyo koox balaadhan;
- La sheekaysi waayeelka iyo filkoodba xilliyada ciyaarta, wax cunista, iyo xanaanada joogtada ah;
- U akhrin iyo buug eegis shakhsi ahaan iyo koox ka mid ahaanba;
- Masaafad iyo qalab si uu ugu kaalmeeyo barashada xirfaddo sida qabashada iyo tuuryada, dheelitirka, boodada, korista, orodka iyo fakashada;
- Masaafad iyo agab si uu ugu kaalmeeyo barashada xirfado sida qancinta, sawir-gacmeedka iyo qorista;
- Agab iyo khibrad si uu ugu kaalmeeyo kobcinta ku haboon xirfadda wax-qoris iyo akhris horteed;
- Agab iyo khibrad si uu ugu kaalmeeyo fikradaha kobcinta ku haboon sayniska iyo xisaabta;
- Ciyaarta iyo xarakaadka;
- Garashada togan ee tacabka, maaha natiijada oo keliya;

- Kobcinta ku haboon mushkilad xallinta;
- Agabka, wakhtiga iyo ku dhiirigalinta inuu ku mashquulo ciyaar adag oo fidsan ciyaaro keligii iyo filkiisaba;
- Khibradaha si uu u horseedo kartida bulshada iyo iskaashiga ciyaarta;
- Dhiirigelinta sahaminta, tijaabinta, iyo hawlaha hal-abuurka;
- Kobcinta ku haboon madaxbanaanida; iyo
- Wakhti, masaafad iyo dhiirigelin inay kororsadaan khibrad ciyaarta iyo waxbarashada ku salaysan wax-qabashada dhexdeeda

6.1.5.2.2 FCCP iyo/ama shaqaaluhu waa inay ka falceliyaan hadalka iyo ficilka caruurta oo ay la socoto xiiso iyo dhiirigelin, taageeridda barashada madaxbanaanidda iyo hanashada xirfaddo kobcinta ku haboon

6.1.5.3 Carruurta da'da Dugsiga

Caruurta da'da dugsigu waa inay la kulmaan dhaqan soo noqnoqanaya oo togan FCCP iyo/ama xubin shaqaalaha ah ee siinaya ilmo kasta fursadaha soo socda maalinta oo dhan dhexdeeda:

- Ciyaar jimicsi darban;
 - Hawlo isku dhafan mid shakhsi, koox kooban, iyo koox balaadhan;
- La sheekaysi waayeelka iyo filkoodba;
 - Ciyaar iyo jimicsi
 - Aqoonsiga toggan ee tacabka, maaha keliya natiijada;
- Kobcinta ku haboon mushkilad xalinta;
- Agabka, wakhtiga iyo ku dhiirigalinta inuu ku mashquulo ciyaar adag oo fidsan ciyaaro keligii iyo filkiisaba;
- Khibradaha si uu u horseedo kartida bulshada iyo iskaashiga ciyaarta;
- Dhiirigelinta sahaminta, tijaabinta, iyo hawlaha hal-abuurka;
- Kobcinta ku haboon madaxbanaanida;
- Wakhti, iyo masaafad isdhexgalka bulsheed, nasashada iyo dhaqdhaqaaq xasiloon;
- Wakhti iyo kaalmo la xidhiidha dhamaystirka shaqada guriga lagu qabanyo sida baahidu tahay; iyo
- Dhiirigelinta inuu qorsheeyo iyo fuliyo hawl uu doortay iyo mid loo dirayba

6.1.6 Indho-indheynta, Qiimeynta and Cadaynta

6.1.6.1 Nidaam kobcinta ku haboon oo la xidhiidha dhugashada, qiimaynta iyo qoraal ka reenidda ilma kasta waxabarshadiisa iyo koritaankiisa waa inay hirgelisaa FCCP rukhsada heysataa.

6.1.6.2 FCCP-da rukhsada heysata cadaynta waxbarshada iyo koritaanka caruurta ee looga baahanyay xeerka 6.1.6.1 ee nidaam sharciyeedyadan waxa waalidka lala socodsiiyayaa shirarka sanadkii laba jeer la qabto sida looga baahanyay qodobka 4.3.1 ee nidaam sharciyeedyadan.

6.2 Sameynta Xidhiidho Fayow

Mugga iyo Shaqaalaynta: mugga waa in uu xaqiijiyo nooca rukhsada uu haysto, da'ada caruurta ku dhex nool ama joogta FCCH, joogista hal (1) ama ka badan qoys oo kaaliya xanaanada ilmaha, iyo inta ay le'eg tahay masafada loo isticmaali karo xanaanada ilmaha ee FCCH dhexdiisa.

*Qeybta 6.2.1 ee nidaam sharciyeedyadani waxay tilmaamaysa si gaar ah mugga iyo shaqaalaynta ee FCCH-ta diiwaangashan

** Qaybta 6.2.2 ee nidaam sharciyeedyadani waxay tilmaamaysa si gaar ah mugga iyo shaqaalaynta FCCH-ka rukhsada heysata.

* 6.2.1 Mugga iyo Shaqaalaynta Ugu Badan FCCH-ta diiwaangashan

FCCH-da diiwaangashan waa inay xaqiijisaa in FCCH-ta diiwaangashani aanu dhaafin xuduudka lagu sheegay qaybtan, oo ay ka mid yihiin jaantusyada hoose.

*6.2.1.1 Dhamaan carruurta joogta FCCH-ta diiwaangashan ee aanu la socon waalid waxay ku jirayaan kuwa la sheegay inay waafaqsanaadaan qodobada qaybta 6.2 ee nidaam sharciyeedyadan.

*6.2.1.2 Marnaba isugaynta tirada carruurta daryeelka ku jirtaa ma dhaafi karaan toban (10) mudada xulashada koowaad (1): xanaanada wareega sanadka oo dhan ama laba iyo toban (12) caruur ah xulashada labaad (2): fasaxa xagaaga.

*6.2.1.3 Caruurta ay hayso FCCP-ta diiwaangashan ee da' doodu ka yar tahay afar iyo labaatan (24) bilood ee degan hoyga waa in tirada lagu daro iyadoo loo tixgelinayo xuduudka loo dhigay caruurta da' doodu ka yar tahay afar iyo labaatan (24) bilood iyo inaan lagu darin tirada xadaynta guud ee caruurta marka la isticmaalayo qodobka 6.2.1.6 ee xeerkan.

*6.2.1.4 FCCP-da diiwaangashan waa inay joogaan laguna tiriyo saamiga ugu yaraan 60% saacadaha shaqada.

*6.2.1.5 FCCP-da diiwaangashan waa inay xaqiijisaa in tirada shaqaalaha joogta buuxinayso shuruudaha ku qeexan jaantuska hoose ee da' da carruurta, cabirka ugu badan ee kooxda, iyo saamiga shaqaale/ilmo wakhti kasta oo maalinta ka mid ah.

*6.2.1.6 In Ikhtiyaarka Kowaad (1): xanaanada sanadka oo dhan, ee ku qeexan jaantuska hoose, mudada fasaxa xagaaga ee dugsiga FCCP diiwaangashan waa suuragal inuu xanaaneeyo ilaa toban (10) caruur ah isugaynta oo aanay la socon waayeel, bishardi waa in dhamaan caruurta da' da dugsigu ay ku jiraan xanaanada ka hor 1da May mudada sanad-dugsiyeedka hore ama ay yihiin xigtada caruurta yar yar ee qoran FCCH diiwaangashan.

* FCCH-da Diiwaangashan: Ikhtiyaarka (1): Daryeelka Sannadka oo Dhan				
Wadarta Shaqaalaha	Wadarta Carruurta	Da'da Carruurta		
		Ka Yar 24 bilood *	2-5 sanno	Da'da ugsiga
2	5-6	5-6	0	0
2	6-10	4	2	0-4
2	5-10	4	1	0-5
2	4-10	4	0	0-6
2	6-10	3	3	0-4
2	5-10	3	2	0-5
2	4-10	3	1	0-6
2	4-10	3	0	1-7
1	3	3	0	0
1	6-10	2	4	0-4
1	5-10	2	3	0-5
1	4-10	2	2	0-6
1	3-10	2	1	0-7
1	2-10	2	0	0-8
1	6-10	1	5	0-4
1	5-10	1	4	0-5
1	4-10	1	3	0-6
1	3-10	1	2	0-7
1	2-10	1	1	0-8
1	1-10	1	0	0-9
1	6-10	0	6	0-4
1	5-10	0	5	0-5
1	4-10	0	4	0-6
1	3-10	0	3	0-7
1	2-10	0	2	0-8
1	1-10	0	1	0-9
1	1-10	0	0	1-10

* 6.2.1.7 In Ikhtiyaarka laba (2): Fasaxa Xagaaga, sida lagu xusay shaxda hoose, FCCP-da diiwaangashan waa inay isticmaashaa shaxdan marka ay daryeel siinayaan lixdooda (6) carruur ah ee asliga ah iyo ilaa lix (6) carruur dheeraad ah oo da'da dugsiga ah iyo/ama marka ay daryeel siinayaan da'da mid carruurta da'da dugsiga oo ku dheeraad ah lixda (6) carruur ee asliga ah ee bilaabay daryeelka ka dib 1-dii May ee sannadkan.

* 6.2.1.8 Marka la isticmaalayo xeerka 6.2.1.7 ee nidaam sharciyeedkan, carruurta FCCP-da diiwaangashan ee ka yar da'da dugsiga ee degan guriga waa in lagu daraa go'aansashada wadarta carruurta la ogolyay ee daryeelka jooga iyo waa in carruurta FCCP-da diiwaangashan aan la tirin.

		* FCCH-ta Diiwaangashan: Ikhtiyaarka 2: Fasaxa Xagaaga		
Wadarta Shaqaalaha	Wadarta Carruurta	Da'da Carruurta		
		Ka yar 24 bilood *	2-5 sanno	Da'da dugsig
1	5-6	2	2	1-2
1	4-6	2	1	1-3
1	3-6	2	0	1-4
1	6	1	4	1
1	5-6	1	3	1-2
1	4-6	1	2	1-3
1	3-6	1	1	1-4
1	2-6	1	0	1-5
1	6	0	5	1
1	5-6	0	4	1-2
1	4-6	0	3	1-3
1	3-6	0	2	1-4
1	2-6	0	1	1-5
1	1-6	0	0	1-6
2	7-12	2	4	1-6
2	7-12	2	3	2-7
2	7-12	2	2	3-8
2	7-12	2	1	4-9
2	7-12	2	0	5-10
2	7-12	1	5	1-6
2	7-12	1	4	2-7
2	7-12	1	3	3-8
2	7-12	1	2	4-9
2	7-12	1	1	5-10
2	7-12	1	0	6-11
2	7-12	0	0	7-12
2	7-12	0	6	1-6
2	7-12	0	5	2-7
2	7-12	0	4	3-8
2	7-12	0	3	4-9
2	7-12	0	2	5-10
2	7-12	0	1	6-11

**** 6.2.2** Mugga iyo Shaqaalaynta ugu Badan ee FCCH-ta Rukhsad Heysata
FCCP-da rukhsada heysataa waa in ay xaqiijisaa FCCH-ta rukhsada heysataa la kulanto xaddidaada lagu tilmaamay qaybtan, oo ay ku jirto shaxdani.

** 6.2.2.1 Dhammaan carruurta jooga FCCH-ta rukhsada heysata ee aanuu la socon waalid marka lagu carruurta FCCP-da rukhsada heysata ee degan guriga iyo carruurta Kaaliyaha Daryeelka ilmaha ee Qoyska ee ka yar da'da dugsiga, waa in lagu daraa go'aaminta awooda barnaamijka ee wakhti kasta.

** 6.2.2.2 Tirada carruurta ee ay u adeegaan FCCH-ra rukhsada heysataa halkii (1) wakhtiba waa in aanay ka badnaanawooda ugu sareysa ee loo ogolyay kuna qoran shahaadada rukhsada.

** 6.2.2.3 FCCP-ta rukhsada heysataa waa inay joogtaa oo lagu tiriyaa saami ugu yaraan ah 60% oo ka mid ah saacadaha shaqada. FCCP-ta rukhsada heysataa waa inay masuul ka noqotaa barnaamijka, iyo ay si firfircoon uga qeybqaadataa bixinta adeegyada daryeelka iyo waxbarashada ilmaha marka la tirinayo in saamiga ilmaha/shaqaalaha.

** 6.2.2.4 FCCP-da rukhsada heysataa waa in ay xaqiijiso in tirada shaqaalaha joogaa ay buuxiyeen shuruudaha ku qeexan shaxda hoose da'da carruurta, baaxada ugu badan ee kooxda, oo saamiga shaqaalaha/ilmahaaga ee wakhti kasta oo ah maalintii.

** FCCH-ta Rukhsada Heysata: Awood saddex (3) shaqaale ah			
Da'da Carruurta			Wadarta carruurta
Ka Yar 24 bilood	2 sanno	3-12 sanno	
6	6	0	12
6	5	0-1	11-12
6	4	0-2	10-12
6	3	0-3	9-12
6	2	0-4	8-12
6	1	0-5	7-12
5	6	0-1	11-12
5	5	0-2	10-12
5	4	0-3	9-12
5	3	0-4	8-12
5	2	0-5	7-12
5	1	1-6	7-12
4	8	0	12
4	7	0-1	11-12
4	6	0-2	10-12
3	9	0	12
3	8	0-1	11-12
3	7	0-2	10-12
2	10	0	12
2	9	0-1	11-12

2	8	0-2	10-12
1	11	0	12
1	10	0-1	11-12
1	9	0-2	10-12
0	12	0	12
0	11	0-1	11-12
0	10	0-2	10-12

** FCCH-da Rukhsada Heysata: Awood laba (2) shaqaale ah			
Da'da Carruurta			Wadarta carruurta
Ka Yar 24 bilood	2 sanno	3-12 sanno	
6	0	0	6
5	1	0	6
5	0	0	5
4	5	0-3	9-12
4	4	0-4	8-12
4	3	0-5	7-12
4	2	0-6	6-12
4	1	0-7	5-12
4	0	0-8	4-12
3	6	0-3	9-12
3	5	0-4	8-12
3	4	0-5	7-12
3	3	0-6	6-12
3	2	0-7	5-12
3	1	0-8	4-12
3	0	1-9	4-12
2	7	0-3	9-12
2	6	0-4	8-12
2	5	0-5	7-12
2	4	1-6	7-12
2	3	2-7	7-12
2	2	3-8	7-12
2	1	4-9	7-12
2	0	5-10	7-12
1	8	0-3	9-12
1	7	0-4	8-12
1	6	0-5	7-12
1	5	1-6	7-12
1	4	2-7	7-12
1	3	3-8	7-12

1	2	4-9	7-12
1	1	5-10	7-12
1	0	6-11	7-12
0	9	0-3	9-12
0	8	0-4	8-12
0	7	0-5	7-12
0	6	1-6	7-12
0	5	2-7	7-12
0	4	3-8	7-12
0	3	4-9	7-12
0	2	5-10	7-12
0	1	6-11	7-12
0	0	9-12	9-12

** FCCH-da Rukhsada Heystata: Awood hal (1) shaqaale ah			
Da'da Carruurta			Wadarta carruurta
Ka Yar 24 bilood	2 sanno	3-12 sanno	
3	0	0	3
2	4	0	6
2	3	0-1	5-6
2	2	0-2	4-6
2	1	0-3	3-6
2	0	0-4	2-6
1	5	0	6
1	4	0-1	5-6
1	3	0-2	4-6
1	2	0-3	3-6
1	1	0-4	2-6
1	0	0-5	1-6
0	6	0	6
0	5	0-1	5-6
0	4	0-2	4-6
0	3	0-3	3-6
0	2	0-4	2-6
0	1	0-5	1-6
0	0	1-8	1-8

** 6.2.2.5 FCCP waa inay xaqiijisaa in daryeelka ammaanka ah iyo waxbarashada carruurta ay dhacdo marka mid (1) ama in ka badan oo tobabartayaal ahi ay FCCH kula shaqeynayaan carruurta.

- ** 6.2.2.6 Caawiyayaasha Fasalka waa in aan loo tirin saamiga shaqaalaha/ilmaha marka ay u fuliyaan waajibaadka shaqo ee caawiyanimada fasalka. Caawiyaha fasalka waxa laga yaabaa in keligiis laga tago ilmaha ama carruurta isaga/iyada loo xilsaaray.
 - ** 6.2.2.7 Shaqaalaha shuraakada waa inaan keligood laga tagin carruurta iyo waa in aan loo tirin saamiga shaqaalaha/ilmaha ee FCCH.
 - ** 6.2.2.8 FCCP, Kaaliyaha Daryeelka Ilmaha ee Qoyska, ama badel waa inuu ku sugnaadaa FCCH oo uu si firfircoon ula shaqeeyaa carruurta marka uu tobabarte joogo. Tobabartaha waa in aan loo tirin saamiga shaqaalaha/ilmaha.
 - ** 6.2.2.9 FCCP waa inay xaqiijisaa in tobabartayaasha toddoba iyo toban (17) sanno aan marnaba kaligood lagaga tagin carruurta FCCH. Tobabartayaasha ah siddeed iyo toban (18) sanno jirka kaligood waa lagaga tagi karaa carruurta FCCH marka ay FCCP, Kaaliyaha Daryeelka ilmaha ee Qoyska, ama badel uu ku sugan yahay FCCH.
- 6.2.3 Tayada Isdhexgalada
- 6.2.3.1 ilmo kasta waa in loola dhaqmaa si tixgelin iyo ixtiraam leh oo leh fursado loo siman yahay oo ay kaga qayb qaataan dhamaan hawlaha koritaan ahaan ku haboon.
 - 6.2.3.2 FCCP iyo/ama shaqaaluhu waa si haboon u qabtaa, taabtaa, una dhoola cadeeya marka uu la hadlayo ilmaha.
 - 6.2.3.3 FCCP iyo/ama shaqaalaha waa inay carruurta u foorarsadaan markay la hadlayaan.
 - 6.2.3.4 FCCP iyo/ama shaqaalaha waa in la heli karo oo ay u jawaaban carruurta, iyagoo ku dhiirigelinaya inay wadaagaan khibradaha, fikradaha iyo dareenka.
 - 6.2.3.5 FCCP ama ugu yaraan hal xubin (1) oo shaqaalaha kamid ahi waa inuu caruurta la fadhiistaa wakhtiga cuntada iyo cuntada fudud.
 - 6.2.3.6 FCCP iyo/ama shaqaalaha waa in ay carruurta u dhageystaan si ixtiraam xushmad leh.
 - 6.2.3.7 Carruurta waa in loo yimaadaa markay ooyaan.
 - 6.2.3.8 Hawlaha ababinbta ee ay sameyso FCCP iyo/ama shaqaalaha oo ay ku jiraan xafaayadda u xidhida, musqul gelida, quudinta, labiska iyo nasashada waa in loo sameeyaa hab dabacsan, u dejin oo shakhsiyeysan taas oo koritaan ahaan ku haboon oo kor u qaada waxbarashada, is caawinta iyo xirfadaha bulshada.
 - 6.2.3.9 Hawlaha ababinta ee ay sameeyaan FCCP iyo/ama shaqaalaha waa la sameeyaa iyadoo la tixgelinayo waxyaabaha ay waalidiinta codsadeen ee dhaqanada ababinta,

marka kuwani yihiin kuwo koritaan ahaan haboon iyo aanay xadgudub ku ahayn nidama sharciyeedkan.

6.2.3.10 FCCP iyo/ama codad shaqaalahu waa in aanay xukumin dhawaaqa guud ee kooxda.

6.2.4 Kormeerka Carruurta

FCCP iyo/ama shaqaalaha waa inay xaqiijiyaan inay sameeyaan kormeer muuqaal ah carruurta, marka laga reebo sida ay ogolyihiin xeerarka 6.2.4.1 - 6.2.4.4 nidaam sharciyeedkan.

6.2.4.1 FCCP iyo/ama shaqaalaha waxa laga yaabaa inay u baahdaan inay ka tagaan carruurta si ay haqab tiraan baahida daryeelka aasaasiga ah maalintii oo dhan. Tani waa inay noqotaa mid wakhti xadidin ah, iyo FCCP iyo/ama shaqaalahu waa inay awoodaan inay maqlaan dhamaan carruurta da'da fasalka barbaarinta-hore ah iyo kuwa ka yar dhamaan wakhtiyada iyo waa inay awoodaan inay si degdeg uga jawaabaan.

6.2.4.2 FCCP iyo/ama shaqaalaha waa inay halkaa halka ay joogaan iyo hawlaha dhammaan carruurta da'da dugsiga waqtiyada oo dhan iyo waa inay awoodaan inay si degdeg uga jawaabaan.

6.2.4.3 Marka carruurta ay hurdaan ama ay nasanayaan, FCCP iyo/ama shaqaalaha waa in la dhigaa meel u ogolanaaysa kormeer muuqaalka ah ee carruurta. Haddii aan dhamaan carruurta la arki karin hal (1) mar, ka FCCP iyo/ama shaqaalahu wa inay carruurta indho-indheeyaan ugu yaraan shan iyo toban (15) daqiiqo oo kasta.

6.2.4.4 Marka ay carruurta ciyaaryaan dibada, FCCP iyo/ama shaqaalahu waa inay dibada joogaan si ay u kormeeraan carruurta. Haddii ay sabab u tahay da'da isku dhafan ee carruurta iyo baahida tagida si loola kulmo baahiyaha daryeelka aasaasiga ah ee carruurta, FCCP iyo/ama shaqaaluhu waxay carruurta da'da dugsiga ah ka maareyn karaan gudaha guriga halkaas oo carruurta laga arki karo gudaha iyo goobta ciyaarida ee dibadu ay deyr leedahay si ay uga hortagto inay carruurta ka tagaan goobta ciyaarida. Carruurta ka yar da'da dugsiga waa inaanay ku ciyaarin dibada haddii FCCP iyo/ama qofka shaqaalaha ahi aanuu joogin wakhti kasta.

6.2.4.5 Marka ay carruurta ay wax cunayaan, FCCP iyo/ama shaqaalaha waa inay la joogaan si ay ugu ogolaato kormeerka muuqaalka ah ee carruurta oo dhan iyo waa inay awoodaan inay si deg deg ah uga jawaabaan ilmo kasta oo laga yaabo inuu ku saxaday cuntada.

6.2.4.6 Carruurta waa in laga ilaaliyaa falalka waxyeelada leh ee carruurta kale.

6.2.4.7 FCCP waa inay xaqiijisaa in qofna aan keligiis lagaga tagin carruurta iyadoon aan ogolaansho laga haysan Qeybta oo ku saleysan natiijooyinka hubinta taariikhda oo ay ku jiraan faraha; marka laga reebo waalidka oo lagaga tagi karo ilmihisa (carruurtiisa).

- 6.2.5 Hagida Wanaagsan iyo Maareynta Dabeecadda
- 6.2.5.1 FCCP waa inay sameysaa oo ay hirgeliso siyaasad ku qoran luqad la fahmi karo oo la xiriiirta hagida wanaagsan iyo maareynta dabeecada ee carruurta. Siyaasadda waa in si joogto ah loo siiyo shaqaalaha iyo waalidiinta.
- 6.2.5.2 Filashooyinka dhaqanada carruurta iyo u jawaabida dhaqanka carruurta ee FCCP iyo/ama shaqaalaha waa inay ku haboonoodaan heerka horumarka ee ilmo kasta iyo fahankiisa. Hagida waa in loo nashqadeeyaa si ay u haqabtirto baahiyaha ilmo kasta.
- 6.2.5.3 FCCP iyo/ama shaqaalahu waa inay isticmaalaan hababka wanaagsan ee hagida iyo maareynta dhaqanka ee dhiirigeliya is xakameynta, is hagida, kalsoonida iyo wada shaqeynta.
- 6.2.5.4 Waa inaan carruurta loo isticmaalin qaab aan anshaxa ku habboonayn ama ciqaab jireed sida laakiin aan ku xaddidnayn:
- 6.2.5.4.1 Garaacista, luxida, qaniinida, qanjiirada,
- 6.2.5.4.2 Xaddida dhaqdhaqaaqa ilmaha iyada oo la qabanaya, la xidhayo, ama la isticmaalo hab kasta oo xakameyn oo kale,
- 6.2.5.4.3 U diidida, cuntada, biyaha ama isticmaalka musqusha,
- 6.2.5.4.4 Ku go'doonimanta ilmo meel xiran ama madow, sida kabadh ama qol qufulan;
- 6.2.5.4.5 Sameynta ciqaab maskaxeed ama dareen ah sida dulleeynta, yasida, hanjabaada, ama cabsi gelinta ilmaha; ama
- 6.2.5.4.6 Samaynta aflagaada aan kala sooc lahay oo ku saabsan ilmo ama qoyskiisa/qoyskeeda.
- 6.2.5.5 Waa in aan wax tallaabo ciqaab ah laga qaadin carruurta marka ay seexan waayaan, shilalka musqusha, waayo, cunitaan la'aanta dhamaan ama qayb kamid ah cuntada ama dhamaystir la'aanta hawlaha loo qoray.
- 6.2.5.6 Aflagaado iyo af fuxshi waa in aan lagu dhex isticmaalin FCCP marka ay carruurtu joogaan.
- 6.2.5.7 FCCP waa inay la tashataa waalidka iyo shaqaalaha xirfadda leh si loo nashqadeeyo qorshe wax ku ool ah ee maareynta dabeecadda iyo inay dhaaqan galiyaan dhaqanka maamulka dabeecadda ilmaha muujiyaa qaab dabeecad adag oo soo noqnoqota.

6.2.6 Kala-guurka

6.2.6.1 FCCP waa inay taageertaa sii wadida daryeel iyo waxbarashada. Haddii ay dhacdo in sii socoshada diiwaangelinta ilmahu ay halis ku jirto waa in lagu dabaqaa kuwan soo socda:

6.2.6.1.1 FCCP waa inay la tashato waalidka (waalidiinta) ilmaha iyo xirfadoolayaasha, sida ku haboon si ay u sameeyaan una hirgaliyaan qorshe waxka qabanaya walaacyada iyadoo ay himiladu tahay sii wadida diiwaangelinta ilmaha.

6.2.6.1.2 Haddii ay dhacdo in walaaca aan la xalin karin, ogeysiis qoraal ah ayaa loo baahan yahay in loo diro waalidka (waalidiinta) ilmaha ugu yaraan shan (5) maalmood kahor eryidda.

6.2.6.1.3 Marka ilmo laga eryo barnaamijka, nuqul buuxa oo feylka ilmaha ah waa in la siiyaa waalidka (waalidiinta) ilmaha maalinta eriga ama ka hor maalinta barnaamijka ugu danbeysa ilmaha. FCCP waa inay heysaa qoraalka in waalidka la siiyay waalidka.

6.2.6.2 FCCP iyo/ama shaqaalaha waa inay la shaqeeyaan waalidka si ay u abuuraan oo ay istimaalaan qorshe kala-guur oo wanaagsan marka ilmo cusub lagu soo darayo FCCH. Tani waa inay kamid noqotaa nidaamyada sida is-dhaafsigu macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan ilmaha iyo gelitaanka barnaamijyada.

6.2.6.3 FCCP-da rukhsada heysata iyo/ama shaqaaluhu waa inay abuuraan oo ay istimaalaan qorshe kala-guur oo wanaagsan ee isbarida xubin shaqaale oo cusub iyo waa inay xaqiijiyaan in waalidka lala socodsiiyay.

6.3 Taageeridda Carruurta Baahiyaha Gaarka ah Leh

6.3.1 Manhajka waa in la waafajiyaa si uu carruurta u siiyo fursado ay uga qaybqaataan dhamaan hawlaha ku haboon da'dooda iyo horumarkooda.

6.3.2 Haddii waalid si mutadawacnimo wax u siiyo ilmo laga helay naafanimu, nuqulada Qorshaha Waxbarasho ee La Shakhsiyeyay (IEP), Adeegyada Carruurta ee La Isku Dhafay (CIS) Hal Qorshe (One Plan) ama wax u dhigma, FCCP waa inay dhokumentigan ku haysaa feylka ilmaha oo ay dib ula eegtaa dhamaan shaqaalaha la shaqeynaya ilmahaas.

6.3.3 Hawlaha waa in la waafajiyaa carruurta naafada ah si ay u gaaraan himilooyinka lagu tilmaamay IEP, CIS, One Plan ee ilmaha ama wax u dhigma.

6.3.4 FCCP iyo/ama shaqaalaha waa inay raacaan isbadelka joogtada ah iyo nidaamka xaaladaha degdega ah ee hawlaha ababinta oo ay ka mid yihiin xafaayada u gelinta, musqul geynta, quudinta, u labisida iyo nasashada, ee la xiriira caruurta leh baahida khaaska ah ee la sameeyay iyadoo lalla tashanayo waalidka ilmaha iyo xirfadoolayaasha ama hay'adaha ilmaha siiya adeegyada.

Qaybta 7 - Shaqaalaha Barnaamijka/Shaqaaleysiinta

7.1 Shuruudaha Guud ee FCCP iyo Shaqaalaha

7.1.1 Shuruudaha Caafimaadka

7.1.1.1 FCCP, shaqaalaha, iyo shaqaalaha shuraakadu waa inay caafimaad qabaan iyo jir ahaana ay awoodi karaan inay gutaan waajibaadkooda daryeelka. FCCP, shaqaalaha iyo shaqaalaha shuraakadu oo ay daciifiyeen xanuun, daal xad-dhaaf ah ama xaalad kasta xadidaysa awoodda ay si ammaan ah ula shaqeyn karaan carruurta waa in aanay shaqeyn ilaa iyo ay xaaladoodu hagaagayso.

7.1.1.2 FCCP, shaqaalaha, iyo shaqaalaha shuraakadu waa inay raacaan siyaasadaha ka saarida sida ku xusan Shaxda Calaamadaha iyo Astaamaha ee xannuunka la xiriira cudurka faafa ee, (Ka fiiri Lifaafa A).

7.1.2 Gargaarka Degdegga ah iyo CPR

7.1.2.1 FCCP waa inay si guul leh u dhameystirtay gargaarka degdegga ah ee carruurta iyo CPR ka hor intaan rukhsad la siin iyo waa in ay hadda shahaado heysato.

7.1.2.2 FCCP waa inay xaqiijisaa in ugu yaraan hal (1) qof weyn oo masuula oo si guul leh u dhameystiray immikana shahaado ka heysta gargaarka degdegga ah ee carruurta iyo dhallaanka iyo CPR uu goobta ku suganyay dhamaan waqtiyada ay carruurta joogaan oo dhan.

7.1.2.3 FCCP-da rukhsada heysataa waa in ay xaqiijiso in shaqaalaha lagu tiriyo saamiga shaqaalaha/ilmaha ay tobabarka gargaarka degdegga ah ee carruurta iyo dhallaanka iyo CPR ilmaha ay heleen lix (6) bilood gudahood kahor intii aanay shaqada ka bilaabin FCCH-da rukhsada heysta iyo waa inay hadda shahaado heystaan.

7.1.3 Jihaynta FCCP iyo Shaqaalaha Cusub

FCCP waa inay dhameystirtaa tobarar jiheyn ee ay ansixiyey Qeybtu ka hor bilowga daryeelka carruurta. FCCP waa inay hubiso in shaqaalaha ay dhameystiraan tobarar hagd oo ay ansixiyey Qeybtu ka hor intaan carruurta lagaga tagin. Tobabartayaashu waa inay dhameystiraan tobararka hagida hal (1) bil gudahood taariikhda ugu horeysa ee ay la shaqeyaan carruurta. Tobabarka waa inay kamid noqdaan:

- Aqoonta aasaasiga ah ee koritaanka iyo horumarka ilmaha;
- Xaaladaha degdegga iyo ilaalinta caafimaadka joogtada ah ee carruurta oo ay ku jiraan ka saarista caafimaadka la xiriira;
- Shuruudaha ammaanka iyo faya-dhawrka oo ay ku jiraan maareynta iyo kaydinta alaabaha halista ah iyo qashin raacinta sunta bio;
- Maareynta dhaqanka ee wanaagsan,
- Kormeerka carruurta;
- Nidaamyada shilka iyo dhaawaca ilmaha oo ay ka mid yihiin dhismaha iyo badbaadada goobta;
- Dhaqanada hurdada ammaanka ah;

- Shuruudaha daawo siinta;
- Shuruudaha daad-gureynta xaaladaha degdega ah;
- Nafaqada iyo ammaanka cuntada oo ay ku jirto ka hortagga iyo wax ka qabashada xaaladaha degdega ah ay sabab u tahay cunto iyo dareen diidmo oo xasaasiyadeed,
- Diiwaan heynta,
- Gaadiid qaadista iyo ilmo qaadista ammaanka leh;
- Sii deynta carruurta;
- Dhexgalka xushamada leh qoysaska;
- Ka hortagga, aqoonsashada, iyo soo sheegida ku xadgudubka carruurta iyo dayacaada ilmaha, oo ay ku jiraan macluumaad ku saabsan calaamadaha iyo astaamaha xadgudubka galmada, rabshada galmada, hanaanka la saaxiibida ilmo yar, qurxinta geedi socodka, aqoonsashada khataraha xadgudubka galmada ee ilmaha, iyo dabeecadaha kale ee waxshinimada ah ee dembiilayaasha galmada;
- Aqoonsiga iyo wax ka qabashada astaamaha cudurada caadiga ah ee carruurnimada,
- Ka hortagga faafida cudurada faafa;
- Siinta carruurto hawlaha iyo waayo-aragnimada koritaan ahaan ku haboon;
- Kudarida carruurta baahida gaarka ah leh;
- Tilmaamaha mutadawaciinta, tobabartayaasha, iyo shaqaalaha shuraakada,
- Mas'uuliyadda u hoggaansamida nidaam sharciyeedyada rukhsad siinta ee lagu dabaqi karo hadda,
- Shuruudaha hubinta taariikhda si ay ugu darto isbedelada xaaladaha, xayiraadaha iyo ka reebitaanka kuwa ay mamnuucday nidama sharciyeedkani
- Shuruudaha shaqaaleysiintu waa inay kamid noqdaan furitaanka iyo xidhitaanka, iyo
- Xaqijinta in carruurta ay heystaan dhar iyo xafaayado dheeraad ah oo la heli karo.

7.1.4 FCCP waa inay akhridaa oo ay heli karto nidaam sharciyeedyada rukhsad siinta hadda, sidoo kale, FCCP waa inay xaqiijisaa in shaqaaluhu ay akhriyaan oo ay heli karaan iyo ay heleen fursada ay ku weydiin karayeen cadeyn sida lagu baahdo oo ku saabsan nidaam sharciyeedyada lagu dabaqi karo ee hadda.

7.2 Hubinta Taariikhda iyo Ansixinada Haboon

7.2.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in dhamaan shaqaalaha cusub, iyo shakhsiyaadka cusub ee iyagoon la kormeerin carruurta kula kulmaya FCCH ay qeybta usoo gudbiyaan foomka Ogonlaansha Hubinta Diiwaanada iyo waa inay faraha kusoo gudbiyaan meesha ay qoondeysay Qeybtu kadib markay Qeybtu helaan Shahaadada Ogolaanshaha Faraha.

7.2.2 FCCP waa inay foomka Ogolaanshaha Hubinta Diiwaanka ee shakhsiyaadka cusub ee ah ama ka wayn lix iyo toban (16) ee degan FCCH ama jooga in ka badan shan (5) jeer 365 maalmood inta lagu guda jiro saacadaha FCCH ee shaqada u gudbisaa qeybta sida looga baahan yahay xeerka 2.3.7.2 nidaam sharciyeedkan.

- 7.2.3 Qeybta, ayaa ikhitiyaarkeeda natiijoyinka hubinta taariikhda ee la hayo u isticmaali kara Qeybta haddi la buuxiyay intii lagu jiray shantii (5) sanno ee ugu dambeysay iyo halkii ay uga baahan lahaayeen hubin taariikheed oo cusub.
- 7.2.4 FCCP waa inay xaqiijisaa in aan qofna lagaga tagin carruurta iyadoon ogolaansho laga heysan Qeybta taas oo lagu saleyn doono natiijada hubinta taariikhda oo ay ku jiraan farahu.
- 7.2.5 Qeybtu waa inay buuxisaa oo ay ka baaraandegtaa dhamaan ansixinada hubinta taariikhda sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ah, laakiin aan ka badnayn shan iyo afartan (45) maalmood laga bilaabo maalinta Xarunta Macluumaadka Dembiyada ee Vermont ay hesho dhamaan cadaymaha.
- 7.2.6 Iyada oo ku saleysan natiijoyinka hubinta taariikhda dadka lagu tilmaamay qaybtan soo socota ayaa la mamnuucay oo waa inaanay ka shaqeyn, degenaan, laga shaqaaleysiin, ama loo ogolaan inay kormeen la'aan la joogaan carruurta joogta FCCH:
- Qofka waxaa looga baahan yahay inuu maro hubinta taariikhda ee diida ama isagoo o sameeya bayaan been ah oo la xiriira hubinta taariikhda;
 - Qofka lagu helo musuqmaasuq;
 - Qof lagu xukumay dembi oo ka kooban:
 - Dil,
 - Ku xadgudubka ma dayacida ilmo,
 - Dambi ka dhan ah ilmo, oo ay ku jiraan hawlaha galmada ama filimada xunxun ee ilmo,
 - Ku xadgudubka sayiga/xaaska,
 - Dambi ku lug leh kufsi ama faraxumayn,
 - Afduub,
 - Gubid/Dab qabadsiiin,
 - Weerar jirka ah ama baytari, ama
 - Dembi la xiriira daroogada oo la sameeyay shantii (5) sano ee lasoo dhaafay;
 - Qofka lagu helay dembi yar oo ka dhan ah ilmo ama qof kale oo ka kooban:
 - Dulmi,
 - Ku xadgudubka ama dayacida ilmo,
 - Khatar gelinta ilmo,
 - Ku xadgudub ama hawl galmo
 - Filimada xunxun ee ilmaha, ama
 - dhaawacyada kale ee jirka,
 - Qofka ay maxkamadda ku heshay inuu ku xadgudbay, dayacay ama si xun ula dhaqmay ilmo, qof duq ah ama naafo, ama xayawaan.

- Waayeel ama ilmo soo warbixiyay xadgudub ama dayacaad ka dhan ah isaga/iyada oo hoos timaada Cutubyada 49 iyo 69 ee Cinwaanka 33 Sharciga Vermont ee Ku Qoran, ama
- Qofka ka diiwaangashan, ama looga baahan yahay inuu is diiwaangaliyo, oo ku jira diiwaanka dembiilayaasha galmada ee Diiwaanka Qaranka Dembiilayaasha Galmada ee la aasaasay sida waafaqsan Xeerka Adam Walsh ilaalada iyo Badbaadada Caruurta ee 2006.

7.2.7 Waaxda ayaa qof u go'aansan karta inuu yahay mamnuuc marka ay jiraan macluumaad la garanayo oo sheegaya in ficilkiisa/ficilkeedu uu carruurta diiwaangashan gaadhsiiin karo halis ama waxyeelo.

7.2.8 Ka Saarida Dadka La Mamnuucay

7.2.8.1 Qeybtu waa inay natiijada hubinta taariikhda siiyaan FCCP-da la filayo, ee sheegaysa haddii shakhsiga lagu sameeyay hubinta taariikhdu laga mamnuuco sida looga baahanyay xeerka 7.2.6 ee nidaam sharciyeedkan ama xeerka 7.2.7 ee nidaam sharciyeedkan daaha laga qaadayn waxa salka u ahaa go'aanka sida looga baahanyay xeerka 7.2.8.3 ee nidaam sharciyeedkan iyo waa in la aqoonsadaa haddii qofka la mamnuucay uu xaq u leeyahay ka duwanaysiin.

7.2.8.2 Marka ay Qeybtu go'aamiyaan in shaqsi uu mamnuuc yahay sida uu u baahan yahay xeerka 7.2.6 ama xeerka 7.2.7 ee nidaam sharciyeedkan, Qeybtu waa inay shakhsiga maray hubinta taariikhda siiyaan natiijada hubinta taariikhda; waxa salka u ahaa go'aanka; hanaanka uu shakhsigu mari karo haddii uu rabo inuu tartansiyo saxsanaanta ama buuxsanaanta macluumaadka lagu saleeyay go'aanka iyo haddii uu shakhsigu uu xaq u leeyahay inuu codsado ka duwanaysiin.

7.2.8.3 Qeybtu waa in aanay wadaagin wax macluumaad ah oo la xiriira hubinta taariikhda cid aan ahayn sida looga baahanyay xeerka 7.2.8.1 ama xeerka 7.2.8.2 ee nidaam sharciyeedkan.

7.2.8.4 Wax ku ool ah marka la helo go'aanka, FCCP ka saaraan dadka oo hubintooda taariikhdu ay go'aamisey inay yihiin kuwa la mamnuucay oo ay ku jiraan laakiin aan ku koobnayn ka shaqaaleysiinta FCCH ama si joogto ah u joogida FCCH.

7.2.8.5 Kaliya dadkna lagu mamnuucay xeerka 7.2.6 ee nidaam sharciyeedyadan ama xeerka 7.2.7 ee nidaam sharciyeedyadan ee sababahan soo socda ayaa xaq u leh inay codsadaan ka duwanaan:

- Xukun musuqmaasuq;
- Dembi la xiriira daroogo oo la sameeyay intuu lagu jiray shantii (5) sanno ee lasoo dhaafay,

- Xukumida dembi yar oo ka dhan ah qof kale kana kooban:
 - Dulmi;
 - Dhaawacyo kale oo jireed, ama
- Macluumaad kale ee loo sheego Waaxda.

Shakhsiyaadkan waxay degenaan karaan, laga shaqaaleysiin karaa, ama si joogto ah u joogi karaan FCCH ah keliya marka FCCP iyo qofka ku lug lihi, ay qoraal ka duwanaysiin ah ka helaan Gudoomiyaha ama qof loo xilsaaray. FCCP iyo qofka ku lug leh waa in codsadaan ka duwanaysiin iyagoo cadeynta ku haboonaanta ama kasoo kabashada u gudbinaya Gudoomiyaha ama qofka loo xilsaaray. Culayska caddeyntu wuxuu saaran yahay FCCP iyo qofka ku lug leh.

7.3 Aqoonta iyo Khibradaha

7.3.1 FCCP diiwaangashan oo ka hawlgasha FCCH diiwaangashan waa inay xaqiijisaa oo ay heysaa cadaymaha in isaga/iyagu ugu yaraan yahay siddeed iyo toban (18) sanno, uu ka qalanjabiyay dugsiga sare ama uu dhamaystay GED, oo uu la kulmay ama ka badiyay mid (1) kamid ah aqoontan soo socda ka hor intaan rukhsad la siin ama laba iyo toban (12) bilood ee rukhsad siinta hore gudahooda:

- Ugu yaraan Heerka Sallaanka Kow (1) ee Waayaha Shaqada Carruurta Vermont ama wax ka sareeya, ama
- Ugu yaraan si guul leh u dhameystiray koorsada Aasaaska Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore ; ama
- Ugu yaraan CDA hadda ah (Shahaadada Aqoonsiga ee Iskaashatada Koritaanka Ilmaha) ee Golaha Qaranka ee Aqoonsiga Xirfada); ama
- Ugu yaraan Shahaadada Daryeelka Carruurta ee Kulliyada Vermont; ama
- Ugu yaraan si guul leh u dhameystirka laba toban (12) dhibcaha kulliyada ee maado waafaqsan meelaha aqoonta asaasiga ee ay aqoonsatay NLCD.

7.3.2 FCCP-da rukhsada heysata ee ka hawlgasha FCCH-ta rukhsad heysata waa inay xaqiijisaa oo ay heysaa cadaymaha in isagu/iyadu ugu yaraan yahay siddeed iyo toban (18) uu ka qalanjabiyay dugsiga sare ama uu dhamaystay GED, oo uu la kulmay ama ka badiyay mid (1) kamid ah aqoontan soo socda

- Ugu yaraan Heerka Sallaanka Laba (2) ama Heerka Saddex (3) ee Waayaha Shaqada Carruurta Vermont; ama
- Ugu yaraan CDA hadda ah (Shahaadada Aqoonsiga ee Iskaashatada Koritaanka Ilmaha) ee Golaha Qaranka ee Aqoonsiga Xirfada iyo laba iyo toban (12) bilood oo khibrad ah la shaqaynta kooxaha carruurta fasalka saddexaad (3) ama ka yar; ama
- Ugu yaraan Shahaadada Daryeelka Carruurta ee Kulliyada Vermont iyo laba iyo toban (12) bilood oo khibrad ah la shaqaynta kooxaha carruurta fasalka saddexaad (3) ama ka yar; ama
- Ugu yaraan Shahaadada Dhameystirka ee Barnaamij Xirfad Barashada ee Daryeele Ilmo oo Vermont ka Diiwaangashan; ama
- Ugu yaraan si guul leh u dhameystirka laba toban (12) dhibcaha kulliyada ee maado waafaqsan meelaha aqoonta asaasiga ee ay aqoonsatay Xarunta Horumarinta

Waayaha Shaqada ee Northern Lights (NLCDC) iyo laba iyo toban (12) bilood oo ah khibrada la shaqaynta kooxaha carruurta fasalka saddexaad (3) ama ka yar; ama

7.3.3 Kaaliyaha Daryeelka Qoyska ee Ilmaha

FCCP waa in ay xaqiijisaa oo ay hasyo cadaymaha in Kaaliyaha Daryeelka Qoyska ee ilmaha uu yahay siddeed iyo toban (18) sanno jir oo la kulmay am aka badiyay mid (1) ka mid ah shahaadooyinkan:

- Ugu yaraan ka qalinjabiyay dugsi sare ama dhamaystay GED iyo koorsada Aasaaska Xirfadoolayaasha Carruurnimada Hore inta lagu jiro laba iyo toban (12) bilood ee shaqada u horeeya; ama
- Ugu yaraan ka qalinjabiyay dugsi sare ama dhamaystay GED iyo si guul leh u dhameystiray ugu yaraan saddex (3) dhibcood kuliyadeed oo ah maado waafaqsan dhinacyada aqoonta aasaasiga ah ee ay aqoonsatay NLCDC inta lagu jiro laba iyo toban (12) bilood ee shaqada u horeeya; ama
- Ugu yaraan isqoray ama ka qalinjabiyay dugsi sare iyo ka qalinjabiyay Barnaamijka Shahaadada Adeegyada Aadanaha oo ay ansixiyeen Guddiga Waxbarashada ee Gobolku taas oo xooga saarta koritaanka carruurta ama waxbarashada carruurnimada hore.

7.3.4 Kaaliye Fasal

Kaaliyaha fasalku waa inuu ugu yaraan yahay siddeed iyo toban (18) sanno, waa inuu awoodaa inuu fahanka qaabka aasaasiga ah ee qoraalka, oo uu buuxiyaa mid ka mid ah (1) aqoontan ee soo socota:

- Ugu yaraan ka qalinjabiyay dugsi sare ama dhamaystay GED iyo koorsada Aasaaska Xirfadoolayaasha Carruurnimada Hore inta lagu jiro laba iyo toban (12) bilood ee shaqada u horeeya; ama
- Ugu yaraan ka qalinjabiyay dugsi sare ama dhamaystay GED iyo si guul leh u dhameystiray ugu yaraan saddex (3) dhibcood kuliyadeed oo ah maado waafaqsan dhinacyada aqoonta aasaasiga ah ee ay aqoonsatay NLCDC inta lagu jiro laba iyo toban (12) bilood ee shaqada u horeeya.

7.3.5 Tobabartaha

FCCP waa inay xaqiijisaa oo ay haysaa cadaymaha in tobabartuhu uu awoodo inuu fahmo qaabka aasaasiga ah ee qoraalka, oo uu buuxiyo mid kamid aqoontan socota:

- Uu yahay toddoba iyo toban (17) sanno uuna qoran yahay Barnaamijka Shahaadada Adeegyada Aadanaha oo ay ansixiyeen Guddiga Waxbarashada ee Gobolku taas oo xooga saarta koritaanka carruurta ama waxbarashada carruurnimada hore, ama;
- Uu yahay toddoba iyo toban (17) sanno kana qalinjabiyay Barnaamijka Shahaadada Adeegyada Aadanaha oo ay ansixiyeen Guddiga Waxbarashada ee Gobolku taas oo xooga saarta koritaanka carruurta ama waxbarashada carruurnimada hore, ama;
- Uu yahay siddeed iyo toban (18) sanno uuna qoran yahay Barnaamijka Shahaadada Adeegyada Aadanaha oo ay ansixiyeen Guddiga Waxbarashada ee Gobolku taas oo xooga saarta koritaanka carruurta ama waxbarashada carruurnimada hore.

- 7.3.6 Badelka
Badelku ugu yaraan waa siddeed iyo toban (18) sanno, uu awoodo inuu fahmo qaabka aasaasiga ah ee qoraalka iyo uu ka qalinjabiyay dugsi sare ama uu dhameystiray GED.

7.4 Horumarinta Xirfadaha ee Sannadlaha ah

- 7.4.1 FCCP waa inay xaqiijisaa in lix (6) bilood laga bilaabo marka shaqada laga bilaabo FCCH, in FCCP iyo ama shaqaalahu ay leeyihiin Qorshaha Horumarinta Xirfadaha Shakhsiga ah (IPDP). Tan waa in lagu cadeeyaa Akoontka Tayada iyo Aqoonsiga ee BFIS ama feylka shaqaalaha ee yaala goobta. IPDP waa in la cusbooneysiisaa ugu yaraan hal mar 365 maalmood oo kasta.
- 7.4.2 The FCCP iyo shaqaalahu waa inay si firfircoon ugu qeybqaataan hawlaha horumarinta xirfadeed sida ku cad IPDP.
- 7.4.3 Dhamaan hawlaha horumarinta xirfadeed waa inay la kulmaan shuruudaha sida ay qeexday NLCDC iyo waa inla xaqiijiya oo lagu cadeeyaa Akoontka Tayada iyo Aqoonsiga BFIS ee shakhsiga. Saacadaha horumarinta xirfadlaha waxa lagu dabaqi karaa buuxinta IPDP-da shakhsiga.
- 7.4.4 Dhamaan shaqaalaha, marka laga reebo badelka, waa inay dhameystiraan shan iyo toban (15) sacadood oo ah hawlaha horumarinta xirfadeed ee sanadlaha ah sida looga baahan yahay xeerka 7.4.2 ee nidaam sharciyeedkan.
- 7.4.5 FCCP iyo/ama shaqaalaha hadda heysta rukhsada waxbarista ee Hay'ada Waxbarashada Vermont ee sidoo kale ayidaad ka haysta Waxbarashada Carruurnimada Hore, Waxbarashada Khaaska ama Waxbarashada Hoose waa inay rukhsadooda hadda u isticmaalaan cadaynta dhameystirka shuruudaha horumarinta xirfada ee xeerka 7.4 .3 ee nidaam sharciyeedkan. Rukhsadan hadda ee waxbaridu waa in la xaqiijiya oo lagu cadeeyaa Akoontka Tayada iyo Aqoonsiga BFIS ee shakhsiga.
- 7.4.6 Shaqaalaha hadda heysta rukhsada waxbarista ee Hay'ada Waxbarashada Vermont ee sidoo kale ayidaad ka haysta Waxbarashada Carruurnimada Hore, Waxbarashada Khaaska ama Waxbarashada Hoose waa inay rukhsadooda hadda u isticmaalaan cadaynta shuruuda IPDP ee xeerka 7.4.1 ee nidaam sharciyeedkan. Rukhsadan hadda ee waxbaridu waa in la xaqiijiya oo lagu cadeeyaa Akoontka Tayada iyo Aqoonsiga BFIS ee shakhsiga.
- 7.4.7 Tababarka CPR iyo Gargaarka Hore waa inaan lagu darin shuruudaha horumarinta xirfadeed ee sannadlaha ah ee xeerka 7.4.4 ee nidaam sharciyeedkan.

7.5 Siyaasadaha iyo Nidaamyada Shaqaalaha

7.5.1 FCCP-da rukhsada heysataa waa inay heshaa cadaayn qoraal ah taas oo ay shaqaaluhu helaan si buuxdana u fahmaan falsafada barmaajika FCCH-da rukhsada heysata iyo dhamaan siyaasadaha iyo nidaamyada FCCH-ta rukhsada heysata sida looga baahan yahay qaybta 4.7 ee nidaam sharciyeedyadan.

7.5.2 FCCP-da rukhsada heysataa waa inay xaqiijisaa in shaqaaluhu ay feylashooda ku haystaan faahfaahin shaqo oo qoraal ah taas oo qeexaysaa darajada shaqada, waajibaadka shaqada, iyo tilmaamaysaa xubinta shaqaalaha ee masuulka ka ah kormeerka. FCCP-da rukhsada heysataa wa inay xaqiijisaa inay sharaxaadaha shaqada ee shaqaalaha ayaa sidoo kale tilmaamaysaa xubinta shaqaalaha ee mas'uulka ka ah qiimaynta booska.

7.5.3 FCCP-da rukhsada heysataa waa inay dib u eegista hawlqabadka sannadlaha ah oo qoraal ka heshaa kormeerahiisa/kormeeraheeda.

7.5.4 FCCP-da rukhsada heysataa waa inay aasaastaa oo ay hirgalisaa nidaam xiriir isgaarsiinta oo ka dhaxeeya shaqaalaha kaas oo xubin kasta oo la shaqeeya ilmaha (carruurta) lagu wargeliyo macluumaadka muhiimka ah ee la xiriira daryeelka iyo waxbarashada ilmaha (carruurta).

7.6 Isticmaalka Badelka

7.6.1 FCCP waa inay u hogaansanaataa hubinta taariikhda ee dhamaan badelada sida looga baahan yahay xeerka 3.1.7 iyo xeerarka qaybta 7.2.1 iyo 7.2.2 ee nidaam sharciyeedyadan

7.6.2 FCCP waa in ay xaqiijisaa in dhamaan badeladu ay u hogaansamaan waajibaadka sharciga ee la xidhiidha ku xadgudubka iyo dayacida ilmaha ee xeerarka qaybta 3.2 ee nidama sharciyeedyadan.

7.6.3 FCCP-da rukhsada heysataa waa inay hayaan feylka shakhsiga ah ee dhamaan badelada sida looga baahanyay xeerka 3.3.5.1 ee nidama sharciyeedyadan.

7.6.4 Badeladu waa inay dhawraan qarsoodiga sida looga baahanyay xeerka 3.7 ee nidaam sharciyeedyadan.

7.6.5 Badeladu waa inay noqdaan kuwo caafimaad iyo jir ahaan awooda inay gutaan waajibaadkooda daryeel. Badeladu aan u gudan karin waajibaadkooda sababo la xiriira xanuun, daal xad-dhaaf ah ama xaalad kasta xaddidaysa awoodda lagula shaqeeyo si badbaado leh carruurta ah; waa in aanay shaqeyn ilaa ay xaaladoodu hagaagayso.

7.6.6 Badeladu waa inay raacaan siyaasadaha ka saarista sida ku xusan Jaantuska Calaamadaha iyo Astaamaha Xanuunka ee la xiriira cudurka faafa ee (Ka eeg Lifaafa A).

7.6.7 FCCP-da rukhsada heysataa waa inay xaqiijisaa in dhamaan badeladu ay heleen tobabarka hore iyo dhallaanka iyo ilmaha CPR sida looga baahan yahay in xeerka 7.1.2.3 ee nidaam sharciyeedyadan.

7.6.8 FCCP waa inay xaqiijisaa in badelada wakhtiga ku qaadanaya barnaamijku lagu hago barnaamijka iyo dhaqanada FCCH. Badelada way ka reeban yihiin xeerka 7.1.3 ee nidaam sharciyeedyadan.

7.6.9 FCCP waa inay xaqiijisaa in badeladu ay akhriyeen oo ay heli karaan nuqulka nidaam sharciyeedyada lagu daqabai karo ee hadda.

7.6.10 FCCP-da rukhsada heysataa waa inay xaqiijisaa in badelku ay feylkiisa ku qorantay sharxaad qeexaysa darajada shaqada, waajibbaadka shaqada, iyo tilmaamaysaa xubinta shaqaalaha ee ka masuulka ah kormeerida badelka.

7.6.11 FCCP waa inay xaqiijisaa in badelada lagu daro nidaamka macluumaadka ee isgaarsiinta ee shaqaalaha sida looga baahan yahay in xeerka 7.5.4 nidaam sharciyeedyadan.

7.6.12 Marka uu badel buuxiyo jago soddon (30) maalmood ama in ka badan ee muddo 365 maalmood gudahood, badelku wuxuu si buuxda ugu qalmi doonaa jagada uu isagu/iyadu buuxinayo iyo wixii ka danbeeya looma tixgelin doono badel ee waxa loo tixgelin doonaa shaqaale wakhti buuxda ah iyadoo ku xiran oo dhamaan waxyaabaha looga baahan yahay shaqaalaha ee nidaam sharciyeedyadan.

7.7 Isticmaalka Mutadawaciinta

7.7.1 Dhamaan mutadawaciinta waa inay ilaaliyaan qarsoodiga (sirta) sida looga baahanyay xeerka 3.7 ee nidaam sharciyeedyadan.

7.7.2 FCCP waa inay xaqiijisaa in dhamaan mutadawaciinta aan lagu darin saamiga shaqaalaha/ilmaha oo aan marna keligood lagaga tagin ilmaha ama carruurta jooqta FCCH; marka laga reebo waalidka oo laga yaabaa in keligood lagaga tago ilmaheeda/ilmahiisa (carruurteeda/carruurtiisa).

7.7.3 Mutadawaciintu waa inay raacaan siyaasadaha ka saarida sida ku xusan in Shaxda Calaamadaha iyo Astaamaha Xanuunka ee la xiriira cudurada faafa ee (Ka eeg Lifaafa A).

7.7.4 FCCP waa inay haysaa diiwaanka qoraalka ah ee jadwalka dhamaan mutadawaciinta ugu yaraan 365 maalmood, oo ay ku jiraan magacooda iyo maalmaha iyo saacadaha saxda ah ee ay joogeen FCCH.

7.7.5 FCCP waa inay xaqiijisaa in mutadawaciinta aan ahayn waalidka ilmaha ka diiwaangashan FCCH ah, ee jooga inka badan shan (5) jeer 365 maalmood, xaaladahan soo socda ayaa lagu dabaqayaa:

7.7.5.1 FCCP waa inay u hogaansanaataa hubinta taariikhda ee mutadawaciintan, sida ku qoran xeerka 7.2.2 ee nidaam sharciyeedyadan.

7.7.5.2 FCCP waa inay xaqiijiso in mutadawaciintani ay u hogaansan yihiin waajibka sharci ee la xiriira ku xadgudubka ama dayacida ilmo ee xeerarka qaybta 3.2 ee nidaam sharciyeedyadan.

7.7.5.3 FCCP waa inay xaqiijiso in mutadawaciintu ee wakhtiga ku qaadanaya barnaamijku lagu hago barnaamijka iyo dhaqanada FCCH.

7.7.5.4 FCCP rukhsad heysataa waa inay hayaan feylka dhameyskatiran ee la cusbooneysiisay ee mutadawaciinta jooga FCCH-ta rukhsada heysata. Feyl dhameystiran waa inuu ugu yaraan ka koobnaado macluumaadkan soo socda:

- Magaca, taariikhda dhalashada, cinwaanka guriga iyo lambarka telefoonka;
- Bayaanka la saxeexay ee cadaynaya fahamka shuruuda sharci ah ee soo sheegida xadgudubka ama dayaca ilmaha ee laga shakiyo;
- Cadeynta hadda Foomka Oggolaanshaha Hubinta Diiwaanka haddii mid loo baahdo; iyo
- Sharaxaad qoraal ah oo ku saabsan doorkiisa/doorkeeda oo sharaxaysa darajada shaqada iyo waajibaadka shaqada.

LIFAAQA A

Shaxda Calaamadaha iyo Astaamaha Xanuunka (La Habeeyay)

Liisaska shaxda ee socda, ee ukala horeeya qaabka xarfahu ukala horeeyaan, waa qaar kamid ah calaamadaha iyo astaamaha ugu badan ee shakhsiyaadka carruurta jooga goobaha daryeelka laga yaabo inay qaadaan marka ay jiraan cuduro faafa. Xirfadlayaasha caafimaadka ayaa isticmaali kara shaxdan si ay ugala hadlaan daryeel bixiyayaasha/macalimiinta waxa ay raadin karaan si ay u aqoonsadaan cudurada iyo ay u qaataan go'aanka marka ay shakhsiyaadku u baahan yihiin daryeel caafimaad. Daryeel bixiyayaasha/macalimiinta/bixiyayaasha barnaamijka waa inay isticmamalaan macluumaadkan si ay uga warhayaan waxa keeni kara astaamo iyo calaamado kala duwan, marka ay haboon tahay in la ogeysiiyo lataliye caafimaad iyo/ama waalidka, iyo shuruudaha si loo ogaado markii shakhsi ay tahay in laga saaro iyo uu kusoo noqon karo goobta kooxda. Dhamaan daryeel bixiyayaasha/macalimiinta iyo shaqaalaha tooska ahi waa in ay la shaqeeyaan shaqaalaha caafimaadka si loo hubiyo ogaanshaha cudurka iyo daaweynta ku haboon.

Ogsoonow in shaxda ay muujinayso marka ay booqashada xirfadle caafimaad ay lagama maarmaan tahay. Dhammaan dadka laga saaro goobta daryeelka ilmaha uma baahna inay booqdaan xirfadle caafimaad ka hor inta aanay soo noqon. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad ka welwelsan tahay nooca xanuunka gaarka ah ee shakhsiga ama aad u baahan tahay tilmaamaha ku saabsan sida loo daryeelo shakhsiga, waalidka/mas'uulka ilmaha ayaa telefoonka ka wici xirfadlaha caafimaad ee ilmaha si loo cadeeyo haddii qiimeyn dheeraad ah loo baahan yahay. Iyadoo la haysto ogoanshaha waalidka/masuulka, xirfadlaha caafimaad ee ilmaha ayaa ku siin kara tilmaamo dheeraad ah oo qoraal ah ama taleefanka uga sheegi kara daryeel bixiyayaasha/macalimiinta.

Shaxda Calaamadaha iyo Astaamaha waxaa laga soo xigtay Maaraynta Cudurada Faafa ee Daryeelka ilmaha iyo Dugsiyada: Hagaha Tixraaca Degdega, Soo Saaristii 2aad oo ah daabacaada Akadamiga Maraykanka ee Carruurta. Waxaa la daabacay iyadoo la haysto fasaxa in lagu daro Nidaam Sharciyeedyada Daryeelka ilmaha ee Vermont. Tixraaca: Maaraynta Cudurada Faafa ee Daryeelka Ilmaha iyo Dugsiyada: Hagaha Tixraaca Degdega, Soo Saaristii 2aad, Akadamiga Maraykanka ee Carruurta, Susan S. Aronson MD FAAP (Tafatire), Timothy R. Shope MD FAAP MPH (Tafatire).

Shaxda Calaamadaha iyo Astaamaha

<i>Calaamada</i>	<i>Sababaha Caadiga ah</i>	<i>Cabashooyinka ama Waxa Laga Yaabo In La Arko</i>	<i>Ogeysii La Taliyaha Caafimaadka</i>	<i>Ogeysii Waalidka</i>	<i>Si Kumeel Gaar ah Uga Saar?</i>	<i>Haddii Laga Saaro, Goorma Dib Usoo Celi</i>
Astaamaha Hargabka	<i>Fayrusyada (marxaladda hore ee fayrasyada badan)</i> <ul style="list-style-type: none"> • Adeenofeyrus • Kogsakfeyrus • Inteerofeyrus • Feyruska Barainfulunsa • Feyruska neefsiga ee saynishiyal • Hinofeyrus • koronofeyrus • Hargab 	<ul style="list-style-type: none"> • San dareeraya ama cabursan • Cune cuncun • Qufac • Hindhiso • Indho biyood • Qandho 	Maaha muhiim	Haa	Maya, haddii mooyee: <ul style="list-style-type: none"> • Qandho ay la socoto isbadel dhaqan. • Shakhsigu u eeg yahay ama u dhaqmo sidii mid xanuunsanaya. • Shakhsiga oo ay dhibto neefsashadu. • Shakhsigu uu leeyahay casaan dhiig ama furuuruc buluug guduud ah oo aan la xiriirin dhaawac. • Shaqsigu uu la kulmay 	<ul style="list-style-type: none"> • Shuruudaha ka Saarida la xaliyay

Shaxda Calaamadaha iyo Astaamaha

<i>Calaamada</i>	<i>Sababaha Caadiga ah</i>	<i>Cabashooyinka ama Waxa Laga Yaabo In La Arko</i>	<i>Ogeysii La Taliyaha Caafimaadka</i>	<i>Ogeysii Waalidka</i>	<i>Si Kumeel Gaar ah Uga Saar?</i>	<i>Haddii Laga Saaro, Goorma Dib Usoo Celi</i>
	<i>Bakteeriya</i> • Maykobalaasma				shuruudaha kale ee ka saarida	
Qufac (Waxay kai man kartaa buuxsamida/ciriiriga dhagaha ilaa sambabada. Qufacu waa jawaabta jirka marka ay wax xajiimaynayaan unugyada ee marinka hawada)	<ul style="list-style-type: none"> • Hargabka caadiga ah • Caabuqa dhiska neefsashada hoose (tusaale ahaan, oof, bronchiolitis) • Kuroob • Xiiq • Caabuqa sanqaroorka • Boronkiito 	<ul style="list-style-type: none"> • Qufac qallalan ama qoyan • Sanka oo dareera (waadix, cad, ama huruud-cagaaran) • Cune xanuun • Cune cuncun • Cod xabeeb leh, qufac sida ciyitaanka oo kale ah 	Muhiim maaha	Haa	Maya, haddii mooyee: <ul style="list-style-type: none"> • Uu leeyahay qufac daran • Neefsasho degdeg iyo/ama ku adag • Hinraagid haddii aan hore loo qiimeeyn oo la daweyn • Dhiigrooraan (micnaha, midab buluuga ah oo uu maqaarku yeesho iyo xub-axaleedka) 	<ul style="list-style-type: none"> • Shuruudaha ka Saarida la xaliyay
Shuban	Sida caadiga ah waxa keena feyrus, mararka qaarna bakteeriya ama dulinka	<ul style="list-style-type: none"> • Saxaro dabacsan ama biyo leh oo joogto ah marka la barbardhigo hanaanka caadiga ah ee ilmaha. (Ogow in dhallaanka naaska sida caadiga ah loo nuujiyo ay caadiyan leeyihiin saxaro biyo leh ama waxaa laga yaabaa in dhowr maalmood aanay saxaroon) • Casiraad caloosha. • Qandho. • Guud ahaan si fiican ma dareemayo. • Mararka qaarkood waxa la socda matag. 	Xaaladaha midka ah ama ka badan ee shuban dhiig leh ama marka 2 ama in ka badan oo carruur oo leh shuban ay ku jiraan kooxda todobaad gudahii	Haa	Haa, haddii <ul style="list-style-type: none"> • Saxaradu aanay ku jirin xafaayada carruurta xafaayada loo xidho. • Shubanku uu sababay inay "shil" sameeyaan carruurta loo tababaray inay musqusha galaan. • Soo noqnoqshada saxaradu ay ka badan tahay 2 ama inka badan oo saxarada caadiga ah ee ilmaha, maxaa yeelay, waxan sidoo kale waxay keeni kartaa shaqo badan macalinka/daryeel bixiyayaasha iyo waxay adkaynaysaa ilaalinta fayoaqab wanaagsan. • Saxarada ay ku jirto dhiig/xab. • Ay saxarada ilmuhu yeelato midab aan caafi ahayn (tusaale ahaan, dhammaan madow ah ama midab aad u barax ah). 	<ul style="list-style-type: none"> • Marka uu xirfadle caafimaad u ogolaado inuu soo noqdo dhamaan xaaladaha shuban dhiig leh iyo shubanka ay keento bakteeriyada <i>Shigella</i>, <i>Salmonella</i>, ama Gaarda Laambiya. • Carruurta xafaayada loo xidho ay saxaradoodu ku jirto xafaayada (xitaa haddii ay saxarada dabacsan tahay) iyo carruurta loo tababaray inay musqusha galaan ayna sameynayn shilalka musqul galida. • Uu awoodo inuu ka qeybqaato.

Shaxda Calaamadaha iyo Astaamaha

<i>Calaamada</i>	<i>Sababaha Caadiga ah</i>	<i>Cabashooyinka ama Waxa Laga Yaabo In La Arko</i>	<i>Ogeysii La Taliyaha Caafimaadka</i>	<i>Ogeysii Waalidka</i>	<i>Si Kumeel Gaar ah Uga Saar?</i>	<i>Haddii Laga Saaro, Goorma Dib Usoo Celi</i>
					Aanuu kaajin 8 saacadood Cagaarshow (micnaha, maqaar ama indho huruud ah). <ul style="list-style-type: none"> • Qandho la isbedelka dabecada. • Fiirinta ama u dhaqmo aad u xanuunsan. 	
Neefsasho Adag ama Shanqadh leh	<ol style="list-style-type: none"> 1. Hargabka caadiga ah 2. Karoob 3. Hilib dalqe 4. Boronkiito 5. Xiiq 6. Oof 7. Walax ku dhagan Hawo mareenka 	<ol style="list-style-type: none"> 1. Hargabka caadiga ah: san cabudh, dhuun xanuun, qufac, iyo/ama qandho yar. 2. Karoob: qufac sida ciyitaanka oo kale ah, xabeeb, qandho, suurto gal ah xanuun laabta ah (calaamadaha waxay xun yihiin habeenkii), iyo/ama neefsashada oo aad u shanqadh badan, gaar ahaan marka neefta la qaadanayo. 3. Hilib dalqe: U taahida si shanqadh leh marka la neefsanayo oo afka oo furan, garka hoos u loo dhigo, qandho sare, iyo/ama buluug noqoshada (cyanotic) cidiyaha iyo maqaarka, dhareerin, aysan dooneyn inay jiiifsadaan. 4. (Iyo 5.) Boronkiito iyo Xiiq: Shakhsigu wuxuu si adag uga shaqaynayso inuu neefsado, neefsashada oo deg deg ah; meel u dhaxaysa feeraha ayaa u eeg inay isku dhagsantay neefsasho kastaba (neefjiidida); hinraagid, dhawaaq foodhi ah oo la socda neefsashada, hargab/qufac, xanaaq leh iyo xanuunsanaya. Wakhti dheer ay ku qaadataa inuu neefta saaro marka la barbar dhigo neef qaadashada 	Muhiim maaha	Haa	Haa, haddii <ol style="list-style-type: none"> 1. Qandhada ay la socoto isbedel dhaqan. 2. Shakhsigu u eeg yahay ama u dhaqmayo sidii mid xanuunsanaya Shakhsiga ay ku adag tahay neefsashadu 3. Shakhsigu uu leeyahay furuuruc casaanka dhiiga ama basali ah oo aan la xiriirin dhaawac. 4. Shakhsigu uu la kulmay shuruudaha kale ee ka saarida. 	<ul style="list-style-type: none"> • Shuruudaha ka Saarida la xaliyay

Shaxda Calaamadaha iyo Astaamaha

<i>Calaamada</i>	<i>Sababaha Caadiga ah</i>	<i>Cabashooyinka ama Waxa Laga Yaabo In La Arko</i>	<i>Ogeysii La Taliyaha Caafimaadka</i>	<i>Ogeysii Waalidka</i>	<i>Si Kumeel Gaar ah Uga Saar?</i>	<i>Haddii Laga Saaro, Goorma Dib Usoo Celi</i>
		5. Eeg kor. 6. Oof: Qufac qoto dheer, qandho, neefsasho degdeg ah, ama meel u dhaxaysa feeraha u eeg inay isku dhageen neefsasho kasta (neefjiidida). 7. Walax ay ku xayiran tahay marin-haweedka, Calaamadaha la mid yihiin croup (2 ee kore)				
Dhego Xanuun	1. Bakteeriyada ama fayrusyada 2. Inta badan waxay u dhacdaa qaabka hargabka caadiga ah	1.Qandho 2.Xanuun ama xanaaq 3.Adkaanshaha maqalka 4."Dhego xiran" 5.Dheecaan 6.Barar agagaarka dhegta ah	Muhiim maaha	Haa	May, haddii mooyee: <ul style="list-style-type: none"> Aanuu awoodin inuu ka qeybqaato Daryeelku uu ka dhexgalo awooda sahaqaaluhu ay ku daryeelaan carruurta kale. Qandho ay la socoto dhaqan isbadel. 	<ul style="list-style-type: none"> Shuruudaha ka Saarida la xaliyay
Cuncunka Indhaha, Isha oo Basali noqota	1. Caabuqa bakteeriyada ee xuubka daboosha indhaha iyo baalasha indhaha (bakteeriyada qeybta cad ee indhaha) 2. Caabuqa uu keeno feyrusku ee xuubka daboosha indhaha iyo baalasha indhaha (feyruska qeybta cad ee indhaha) 3. Cuncunka Xasaasiyada leh ee xuubka daboosha indhaha iyo baalasha indhaha (xasaasiyada qeybta cad ee indhaha) 4. Cuncunka kimikaalka	1. Caabuqa bakteeriyada: midabka basali ah halkii ay indhuhu cadaan ka noqon lahaayeen iyo dheecaan huruud/cagaar ah oo qaro leh. Waxa laga yaabaa inay cuncun yeelato, bararto ama qolof yeelato subaxdii. 2. Caabuqa uu keeno feyruska; Indho basali/casaan ah, cuncun leh oo barara, dheecaan-biyood, Waxa laga yaabaa inuu jiro caabuqa dhiska neefsiga sare. 3. (Iyo 4.) Xasaasiyad iyo cuncun kiimikada: casaan, oohin, indho cuncun leh; sanko oo dareera, hindhiso, dheecaan biyood.	Haa, haddii 2 ama in ka badan oo carruurta ay leeyihiin indho cas oo ay la socoto dheecaan biyood	Haa	<i>Waayo, bakteeriyada qeybta cad ee indhaha</i> Maya. Ka saarida wixii ka dambeeya immika looma baahna xaaladan. Xirfadlayaasha caafimaadka kala duwanaan karaan haddii ay tahay in xaaladan lagu daweeyo daawada antibayootik iyo haddii kale. Dooroka antibayootika ee daaweynta iyo hortaga faafidu ma cada. Badi shakhsiyaadka leh indho basali ah waxay fiicnaadaan 5 ama 6 maalmood ka dib iyadoon la qaadan antibayootikis. <i>Noocyada kale</i> Maya, haddii mooyee: <ul style="list-style-type: none"> Shakhsigu uu la kulmo shuruudaha kale ee ka saarida. 	<ul style="list-style-type: none"> <i>Waayo, conjunctiviti bakteeriyada, mar waalidka ayaa ka hadlay aqoonyahan caafimaadka. Antibiyootikada laga yaabaa ama ma laga yaabaa in lagu qoro.</i> shuruudaha ka Saarida waxaa xalin.

Shaxda Calaamadaha iyo Astaamaha

<i>Calaamada</i>	<i>Sababaha Caadiga ah</i>	<i>Cabashooyinka ama Waxa Laga Yaabo In La Arko</i>	<i>Ogeysii La Taliyaha Caafimaadka</i>	<i>Ogeysii Waalidka</i>	<i>Si Kumeel Gaar ah Uga Saar?</i>	<i>Haddii Laga Saaro, Goorma Dib Usoo Celi</i>
	ee xuubka daboosha indhaha iyo baalasha indhaha (cuncunka qeybta cad ee isha oo cuncun leh) (tusaale, ku dabaalashada biyo aad loo darat koloriin, wasaqowga hawada)				Fiiro Gaar ah: Mid ka mid ah noocyada feyruska qeybta cad ee ishu si degdeg ah u fido una baahato ka saarid. Haddii 2 ama in ka badan oo kamida caruurta kooxda ay leeyihiin indhaha-biyood oo cas oo aan wax la garanayn wax kiimiko ah oo cuncunka dhalisay, waxa laga yaabaa in loo baahdo ka saarida iyo maamulka caafimaadka waa in la ogeysiyo.	
Qandho	<ul style="list-style-type: none"> • Feyrus, bakteeriya, ama caabuq dulin oo kasta • Kulayl dheeraad ah • Falcelinta daawada (tusaale ahaan, tallaalka, afka) • Xanuunada kale ee aan faafin (tusaale ahaan, lafa xanuunka, kansar) 	<p>Jirka oo casaada, daal, xanaaq, dhaqdhaqaaq hoos u dhaca</p> <p>Fiiro-Gaar ah</p> <ul style="list-style-type: none"> • Qandho oo keliya ma aha waxyeello. Marka uu shaqsigu leeyahay caabuq, taas oo dalacaysa heerkulka jidhka waa qeyb ka mid ah difaaca jidhka ee caadiga ah ee ka dhanka ah ee weerarada dibada ka imanaya. • Kor u kaca degdega ah ee heerkulka jidhka mararka qaarkood waxay dhalisaa suuxdinta febrile ee carruurta yar yar, Sida caadiga ah tan waxaa laga weynaadaa da'da 6 sanno. Markii ugu horeysa ee ilmaha ay qabato suuxdinta febrile wuxuu u baahanayaa qiimeyn. Suuxdintani waa mid cabsi leh, laakiin uma keenaan ilmaha wax dhibaato oo muddo dheer ah. Waalidiintu 	Muhiim maaha	Haa	<p>May haddii mooyee:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Dhaqanku isbadelo. • Aanuu aqoodin inuu ka qeybqaato. • Daryeelku uu ka dhexgalo awooda sahaqaaluhu ay ku daryeelaan carruurta kale <p>Fiiro gaar ah: Heerkulada loo tixgeliyo inay dhaafeen heerka caadiga ah, inkastoo aanay daruuriyan ahayn calaamad dhibaato caafimaad oo weyn, shakhsiyaadka ka weyn 4 bilood waa</p> <ul style="list-style-type: none"> • 100 ° F (37.8 ° C) Kilinkilada • 101 ° F (38.3 ° C) afka • 102 ° F (38.9 ° C) malawadka • Maqalka (dhegta) heerkul La mid ah heerkulka afka ama malawadka 	<ul style="list-style-type: none"> • Marka uu awoodo inuu ka qeybqaato • Shuruudaha ka Saarida la xaliyay

Shaxda Calaamadaha iyo Astaamaha

<i>Calaamada</i>	<i>Sababaha Caadiga ah</i>	<i>Cabashooyinka ama Waxa Laga Yaabo In La Arko</i>	<i>Ogeysii La Taliyaha Caafimaadka</i>	<i>Ogeysii Waalidka</i>	<i>Si Kumeel Gaar ah Uga Saar?</i>	<i>Haddii Laga Saaro, Goorma Dib Usoo Celi</i>
		<p>waa in ay wargeliyaan xirfadlaha caafimaadka ilmahooda mar kasta oo uu ilmuhu leeyahay suuxdin, xitaa haddii ilmaha la og yahay in uu leeyahay suuxdinta febrile.</p> <p>Digniin: Ha siin asbiriin. Waxaa lala xiriirinayay in ay halis dheeraad ah oo ah Reye Syndrome (cudur dhif ah oo halis ah kaas oo saameeya maskaxda iyo beerka).</p>			<p>Hel dareen caafimaad oo degdeg ah marka dhallaanka ka yar 4 bilood uu yeesho heerkul aan la garanayn oo ah 101 ° F (38.3 ° C) malawadka ama 100 ° F (37.8 ° C) kilankisha. Dhallaan kasta oo ka yar 2 bilood oo leh qandho waa inuu helaa daryeel caafimaad saacad gudaheed.</p>	
Madax xanuun	<ul style="list-style-type: none"> • Caabuuq kasta oo bakteeriya/uu keeno feyrus • Sababaha kale ee aan faafin 	<ul style="list-style-type: none"> • Daal iyo xanaaq • Dhici kara iyadoo ay la socdaan calaamadaha kale ama aanay la socon 	Muhiim maaha	Haa	<p>May, haddii mooyee:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Shakhsigu aanuu awoodin inuu ka qeybqaato <p>Fiiro gaar ah: Ogeysii xirfadle caafimaad haddii ay ku dhacdo madax-xanuun daran oo kadis ah oo leh matag ama qoor giigsan oo laga yaabo in ay calaamad u tahay menanjiito. Qoorta giigsan ee walaac keentay waa diidista iyo raaxo-daro aan caadi ahayn marka ilmaha laga codsado inuu eego xuduntiisa (isagoo gelinaya garka xabadka) - ka duwan xanuunka dhinaca qoorta</p>	<ul style="list-style-type: none"> • Marka uu awoodo inuu ka qeybqaato
Cuncun	<ol style="list-style-type: none"> 1. Fayada 2. Busbuska 3. duneed 4. Injirta madaxa 	<ol style="list-style-type: none"> 1. Fayada: Dhibco cuncun leh oo qaabka wareega u sameysan oo ku yaala maqaarka ama dhibco timo aan lahayn oo ku yaala madaxa. 2. Busbuska: dhibco u eeg sida 	Cayayaanka sida injirta iyo isnadaamiska, haddii in ka badan hal	Haa	<p><i>Busbuska, isnadaamiska, iyo findoobka</i></p> <p>Haa</p>	<ul style="list-style-type: none"> • Shuruudaha ka Saarida la xaliyay • Daawo u socoto ama la daweyyay sida uu ku taliyay

Shaxda Calaamadaha iyo Astaamaha

<i>Calaamada</i>	<i>Sababaha Caadiga ah</i>	<i>Cabashooyinka ama Waxa Laga Yaabo In La Arko</i>	<i>Ogeysii La Taliyaha Caafimaadka</i>	<i>Ogeysii Waalidka</i>	<i>Si Kumeel Gaar ah Uga Saar?</i>	<i>Haddii Laga Saaro, Goorma Dib Usoo Celi</i>
	<p>5. Isnidaamiska</p> <p>6. Xasaasiyad ama falcelin cuncun leh(tusaale ahaan, suntan geedka xajiimada)</p> <p>7. Maqaar qallalan ama canbaar</p> <p>8. Findoobka</p>	<p>Nabaro biyo galeen oo ay ku hareereysan yihiin Halos cas ku taala madaxa, wejiga, iyo jidhka; qandho, xanaaq.</p> <p>3. Duneed: dabo cuncun.</p> <p>4. Injirta madaxa, cayayaanka yar-yar ama qindhicilka ee timaha.</p> <p>5. Isnidaamiska: kuuskuus cuncun leh oo aad daran ee meelaha diiran jirka, gaar ahaan inta u dhexeysa faraha ama suulasha.</p> <p>6. Xasaasiyad ama falcelin cuncun leh: Kacsan, furuuru wareega ah; maqaarka oo casaada; nabarada biyaha lihi waxay raacaan falcelinta hoose (xajiinta, falcelinta taabashada).</p> <p>7. Maqaar qallalan ama canbaar, meelaha qalalan ee jirka. Badanka six un ugu dhacda dhabanada, xaga hore ee suxulada iyo xaga danbe ee jilbaha. Dhallaanka meelaha qalalani waxa laga yaaba inay noqdaan xaga hore ee cagaha iyo meelkasta oo kale oo jidhka kamid ah, laakiin badanka ma noqoto dhinaca xafaayada. Haddii ay barar cas leedahay, ama ay biyo ku jiraan, ka fikir caabuuq.</p> <p>8. Findoobka: Meelaha leh qolof huruud ah, nabaro cascas. Inta badan laga helo agagaarka furitaanada afka ama sanko.</p>	<p>ilmo oo ku jira kooxdu uu leeyahay findoob ama fayada; busbuska.</p>		<p><i>Fayada iyo injirta madaxa</i></p> <p>Haa, dhamaadka maalinta</p> <ul style="list-style-type: none"> Qofka waa in loo gudbiyo xirfadle caafimaad dhamaadka maalinta si loo daweeyo. <p><i>duneedka, xasaasiyadeed, falcelin diidmo ah ama cambaarta</i></p> <p>Maya, haddii mooyee:</p> <ul style="list-style-type: none"> Ay u muuqato xanuun liijiyaya ama qolof dhacsaday <p>Fiirro gaar ah: Ka saarida ay sabab u tahay furuuruca cuncunka lihi waxay kaliya laga maarmaan tahay in lagu talo caafimaad si loo daweeyo, haddii aanay haddii aanay hore u jirin qiimeyn iyo qorshe daryeel oo hore loo sameeyay oo loogu talagalay furuuruca cuncunka leh.</p>	<p>Xirfadoole caafimaad haddii tilmaamay xaaladda iyo waqtiga loo baahan yahay in la dib loosoo celiyo, Xaaladaha u baahan siinta daawooyinka antibayootikiska nabarada ama ka qaadashada antibayootikiska afka, muddada daawaynta si loo yareeyo halista ku faafinta kuwa kale inta badan waa 24 saacadood. Dadka intooda badan ee leh cayayaan ama dulin, dib usoo celinta isla marka la siiyo dawadu waa mid la aqbali karo.</p>
Nabarada Afka	<p>1. Cabeebka afka: (caabuqa yeast)</p>	<p>1. Cabeebka afka: dhibco cadcad oo ku yaala carabka iyo</p>	Muhiim maaha	Haa	<p>Maya, haddii mooyee:</p> <ul style="list-style-type: none"> Uu u Dhareerinayo si aan 	<ul style="list-style-type: none"> Marka uu awoodo inuu ka qeybqaato Shuruudaha ka Saarida la

Shaxda Calaamadaha iyo Astaamaha

<i>Calaamada</i>	<i>Sababaha Caadiga ah</i>	<i>Cabashooyinka ama Waxa Laga Yaabo In La Arko</i>	<i>Ogeysii La Taliyaha Caafimaadka</i>	<i>Ogeysii Waalidka</i>	<i>Si Kumeel Gaar ah Uga Saar?</i>	<i>Haddii Laga Saaro, Goorma Dib Usoo Celi</i>
	<p>2. Herbes ama caabuqa fayruska coxsackie</p> <p>3. Nabarada koronkorroda</p>	<p>daanka</p> <p>2. Herbes ama caabuqa fayruska coxsackie: Xanuunka liqida; qandho, dhibco hurdi oo xanuun badan oo afka ku yaala; qanjidhada qoorta oo barara, nabad ay biyo galeen, xanuunka qabowga, casaaday, bararay, bushimaha oo xanuuna</p> <p>3. Nabarada koronkorada, boogo xanuuna oo ku yaala dhabanada ama ciridka</p>			<p>Joogsi lahay oo la xidhiidha nabarka afka.</p> <ul style="list-style-type: none"> Anuu awoodin inuu ka qeybqaato Daryeelku uu ka dhexgalo awooda sahaqaaluhu ay ku daryeelaan carruurta kale 	xaliyay
Furuuruc	<p>Waxyaabaha badan ee sababa</p> <p>1. Feyrus keeno: Roseola infantum, cudurka shanaad, bus-buska, herbes, molluscum contagiosum, burooyinka, xanuun hergab, buruqyo (Zoster herpes), iyo kuwa kale</p> <p>2. Caabuqyada iyo cayayaanka maqaarka, fayada (boqoshaa), cudurka isnadaamiska (baarasayt), findoobka, malaxda, iyo Cellulitis (bakteeriya)</p> <p>3. Caabuqyada bakteeriyada ee dara: meningococcus, pneumococcus, Staphylococcus aureus (MSSA, MRSA)</p>	<p>Maqaarka wuxuu muujin karaa natiijooyinka la mid ah oo ay sababeen waxyaabo badan oo kala duwan. Aqoonsashada Sababta furuurucu waxay u baahan tahay qiimeynta caafimaadka qof karti xirfadeed leh ku xisaabtama macluumaadka kale oo aan ahayn kaliya sida uu furuurucu u eeg yahay.</p> <p>1. Feyrus: Caadi ahaan waa calaamadaha cudurada guud sida sanko oo dareera, qufac, qandho iyo (marka laga reebo burooyinka ama molluscum). furuuruc kasta oo fayrus keenay waxa laga yaabaa inuu yeesho muuqaal ka duwan.</p> <p>2. Caabuqyada iyo cayayaanka maqaarka ee yar: Eeg “cuncun” caabuqyada maqaarka ee halista ah: casaan, xanuun, qandho, malax.</p> <p>3. Caabuqyada bakteeriyada ee daran: Waa dhif.</p>	Cudurada dilaaca	Haa	<p>Maya, haddii mooyee:</p> <ul style="list-style-type: none"> Finan iyo la socoto dhaqan isbadal ama qandho Uu leeyahay booqo biyo leh/nabar furan Uu leeyahay nabar aan la xidhiidhin wax dhaawac ah Uu leeyahay xanuunka laabatooyinka iyo furuuruc Anuu awoodin inuu ka qaybgaato Meel maqaarka ah oo jilicsan, cas, gaar ahaan haddii uu xajmigeedu ama jilicsanaanteedu uu sii kordhayo 	<ul style="list-style-type: none"> Marka uu awoodo inuu ka qeybqaato hawlaha maalinlaha ah. Uu ugu yaraan qaatay daawada antibiyookitada (haddii la sheegay). Shuruudaha ka Saarida la xaliyay

Shaxda Calaamadaha iyo Astaamaha

<i>Calaamada</i>	<i>Sababaha Caadiga ah</i>	<i>Cabashooyinka ama Waxa Laga Yaabo In La Arko</i>	<i>Ogeysii La Taliyaha Caafimaadka</i>	<i>Ogeysii Waalidka</i>	<i>Si Kumeel Gaar ah Uga Saar?</i>	<i>Haddii Laga Saaro, Goorma Dib Usoo Celi</i>
		Carruurtani waxay leeyihiin qandho ay la socoto furuuruc waxaana laga yaabaa inay aad u xanuunsadaan.				
Cune xanuun (Pharyngitis)	<ol style="list-style-type: none"> Feyrus keeno - fayrusyada hargabka ee caadiga ah oo keeni caabuqyada neef-mareenka sare Istreebka cunaha 	<ol style="list-style-type: none"> Fayrus: Carruurta hadashaa waxay caban doonaan cune xanuun; carruurta ka yar waxaa laga yaabaa in cadhoodaan hoos rabitaanka cuntada oo hoos u dhacay aawadeed iyo candhareer kordhay (diidmada calaliska). Waxa la arki karaa calaamadaha la xidhiidha xanuunka neefsashada-sare, sida sanko oo dareera, qufac, iyo sanko oo xidhma. Istreebka cunaha: caabuqa istreebku inta badan ma keeno qufac ama sanko oo dareera. Calaamadaha la dagaalanka jirka ee ka dhanka ah caabuqada waxa ka mid ah unugyo cas oo leh dhibco cad oo kasoo baxa dhinaca cunaha, xaga danbeee carrabka (aagga quman), iyo derbiga dambe ee cunaha. Qumanka waxaa laga yaabaa inay weyn yihiin, xataa ay iyagu istaabanayaan. Qanjidhada oo barara (mararka qaar si qaldan loogu yeedho "qanjiro bararsan") waay dhacaan marka jidhka uu dagaalama cudurka. 	Muhiim maaha	Haa	May, haddii mooyee: <ul style="list-style-type: none"> Aanuu awoodin inuu wax calaaliyo. Sameynayo dhareer xad dhaafka oo ay la socoto neefta oo ku dhiba. Leeyahay qandho dhaqanka badasha Shaqsigu uu buuxiyo shuruudaha kale ee ka saarida. 	<ul style="list-style-type: none"> Marka uu awoodo inuu wax liqo. Marka uu awoodo inuu ka qeybqaato. Uu daawo qaatay ugu yaraan 24 saacadood (haddii ay tahay isbreeb) Shuruudaha ka Saarida la xaliyay
Calool xanuun	<ol style="list-style-type: none"> Feyrus keeno - caloosha ama istreebka cunaha 	<ol style="list-style-type: none"> Caloosha ama istreebka cunaha: Mataga iyo shubanka iyo/ama jiirogada ayaa calaamadaha caabuqa 	Ma aha haddii xaaladaha kala duwan ee isku group 1 toddobaad gudahood.	Haa	Maya, haddii mooyee: <ul style="list-style-type: none"> Uu qabo xanuun daran ilmaha ku keeni kula laba jibraarmo ama uu qeyliyo Calool xanuun kadib dhaawac 	<ul style="list-style-type: none"> Xanuunku uu xalismo Uu awoodo inuu ka qeybqaato Shuruudaha ka Saarida la xaliyay

Shaxda Calaamadaha iyo Astamaha

<i>Calaamada</i>	<i>Sababaha Caadiga ah</i>	<i>Cabashooyinka ama Waxa Laga Yaabo In La Arko</i>	<i>Ogeysii La Taliyaha Caafimaadka</i>	<i>Ogeysii Waalidka</i>	<i>Si Kumeel Gaar ah Uga Saar?</i>	<i>Haddii Laga Saaro, Goorma Dib Usoo Celi</i>
	Gudaha ee caloosha sida xiidmaha, xiidanka, beerka, kaadi heysta	Fayruska ee caloosha iyo/ ama xiidmaha. Isbtareebka cunahu waxay keeni kartaa calool xanuun leh dhuun xanuun, madax xanuun, iyo qandho suurto gal. Haddii qufac ama sanko oo dareera uu jiro, lagama yaabo inay istereeb tahay. 2.Dhibaatooyinka xubnaha gudaha ee caloosha: Xanuun aad u daran oo joogto ah oo ku dhaca caloosha			<ul style="list-style-type: none"> • Saxaro dhiig/madow • Ma kaajin 8 saacadood • Shuban • Matag • Maqaar/indho huruud ah • Qandho leh dhaqan isbadela • U eegyay ama u muuqdaa mid xanuunsanaya 	

LIFAAQA B

Guddiga Ammaanka Alaabta Macmiilka 16 CFR § 1220 Ee La Xidhiidha Sariiraha Carruurta

Laga bilaabo **Diisambar 28, 2012**, sariir carruureed kasta oo la siiyo goobaha daryeelka ilmaha iyo guryaha qoyska ee daryeelka ilmaha waa in ay buuxiyaan heerarka ammaanka wax laga badalay ee cusub ee federaalka. Heerarka cusub waxa lagu dabaqi doonaa soo saarayaasha, tafaariqlayaasha, soo dejiyayaasha iyo qeybiyayaasha markay taariikhdu tahay **Juun 28, 2011**, iyadoo wax laga qabanayo khataraha dilaaga ah ee hore loogu arkay sariiraha carruurta ee dhinaca la furo ee u baahanaya qalab iyo qaybo raagaya una baahda baaritaanno badan oo adag.

Waxyaabaha aad ogaanayso ...

- **Tani way ka qoto dheer tahay mushkilada dhinaca furmaya. Joojinta dhaqdhaqaaqa sariirta immiku kama dhigi doonto mid waafaqsan.**
- **Ma go'aansan karti waafaqsanaanta adigoo eegaya alaabta.**
- **Heerarka cusub waxay khuseeyaan dhamaan sariiraha carruurta ee dhameyskatiran iyo kuwa dhameyskatirnayn oo ay ka mid yihiin qoryaha, biraha iyo kuwa isdul saaran.**
- **Haddii aad iibsato sariir carruureed ka hor taariikhda ay dhaqangelyso ee ah Juun 28, 2011 oo aadan hubin inay la kulantay heerka federaalka cusub, CPSC waxay ku talinaysaa in aad xaqiijiso sariir carruureedu la kulantay heerka adigoo weydiisanaya caddayn.**
 - Weydii soo saaraha, tafaariqlaha, soo dejiyaha ama qaybiyaha si ay u muujiyaan Shahaadada Waafaqsanaanta. cadeyntu waa in ay:
 - Sharaxdaa alaabta
 - Sheegtaa magaca, cinwaanka boostada oo buuxa iyo lambarka telefoonka soo dejiyaha ama soo saaraha gudaha.
 - Aqoonso xeerka ay waafaqsantay(16 CFR 1219 ama 1220)
 - Sheegtaa magaca, cinwaanka boostada oo buuxa iyo lambarka telefoonka diiwaan hayaha iyo gooba uu ku yaalo shaybaarka tijaabadu.

- Sheegtaa taariikhda iyo goobta soo saarida iyo tijaabada
- Sariirta ayaa sidoo kale ku waa inay yeelataa calaamad ku lifaaqan oo sheegaysa taariikhda ee soo saarida

Waxyaabaha aad sameynayso ...

- **Dhammaan goobaha daryeelka caruurta, guryaha qoyska ee daryeelka ilmaha, iyo meelaha qaabilaada dadweynaha:**
 - Waa inay u diyaar garoobaan inay sariir caruureedooda hadda ku badalaan kuwo cusub oo waafaqsan kahor Diisambar 28, 2012.
 - Waa in aanay dib u iibin, deeqin ama bixin sariirta aan la kulmin heerarka sariiraha caruurta ee cusub.
- **Qashinka raaci sariirihii hore ee aan waafaqsanayn, una tuur hab aad dib loo xidhxidhi oo la isticmaali Karin.**
- **Sariiraha caruurta ee aan waafaqsanayn waa in aan la iibin iyadoo loo marayo xaraashyada onlaynka ah ama aan la siin bakhaarada gudaha ee jaban. CPSC waxay ku talinaysaa inaad kala furfurto sariirta kahor intaanad tuurin**

Warbixin ka daabacaadan 5023 042011 - [Bixiyeyaasha Daryeelka Ilmaha: Hagaha Heerarka Cusub ee Sariiraha Carruurta ee ka socda Guddiga Ammaanka Alaabta Macmiilka \(www.cpsc.gov\)](#)

